



# HAGARLAAWE

Diiwaanka Maansooyinka  
Maxamed Xaashi Dhamac  
'Gaarriye'

Waxa tifaftiray Maxamed Xasan 'Alto',  
Martin Orwin iyo Yaasiin Jaamac Nuux 'Suldaan'

London, 2007

First Edition 2007CE  
London

ISBN: 978-0-9550274-2-0

©All rights reserved. No parts of this publication may be reproduced, stored in a retrieval system or transmitted in any form or by any means, electronic, mechanical, photocopying, recording or otherwise, without the prior permission of the copyright owner.

Published by Aftahan Publications



180 Mile End Road, London, E1 4LJ

Tel: 44 (0) 207 790 6611


Fax: 44 (0) 207 790 5654

[www.aftahan.org](http://www.aftahan.org) — [www.aftahan.com](http://www.aftahan.com)

Typeset with L<sup>A</sup>T<sub>E</sub>X

Printed and bound by Vasan Printers

@SOMALIBOOKS



# Tusmada

<b>1</b>	<b>Arar</b>	<b>7</b>
1.1	Waa Kuma Gaarriye? . . . . .	7
1.2	Mahad-naq . . . . .	8
1.3	Hor-dhac . . . . .	10
<b>2</b>	<b>Guubaabo</b>	<b>15</b>
2.1	Qasab Kuma Balweyn Karo (1978) . . . . .	16
2.2	Hoobal (1976) . . . . .	19
2.3	Uurkubbaale (20/2/1984) . . . . .	22
2.4	Kabo-caseeye (1979) . . . . .	28
2.5	Beer-wale (1979) . . . . .	31
2.6	Dugsi Ma Leh Qabyaaladi (10/12/1979) . . . . .	35
2.7	Colka Wadhaf Ma Lagu Deyey? (1/1/1980) . . . . .	41
2.8	Madax Goodir (4/4/1980) . . . . .	46
2.9	Hashii Cosob (1980) . . . . .	49
2.10	Qiyaame (1980) . . . . .	53
2.11	Gashi (1980) . . . . .	58

TUSMADA

5

2.12	Run (1984)	61
2.13	Ergo (30/4/1992)	68
2.14	Daba-taxan (5/1/1997)	90
2.15	Sidaasaa La Ahaa (28/10/1979)	111
<b>3</b>	<b>Guluf</b>	<b>114</b>
3.1	Keena-diid (7/9/1989)	115
3.2	Waaya-arag (1/1/1983)	121
3.3	Gar-naqsi (25/4/1983)	137
3.4	Saxansaxo (17/10/1987)	149
3.5	Hagarlaawe (1984)	167
3.6	Maddaacale (1984)	171
3.7	Dhahar 'Hadraawi' (17/9/1980)	176
3.8	Dhederbi (30/9/1988)	183
<b>4</b>	<b>Googoos</b>	<b>195</b>
4.1	Aadmi (14/6/1973)	196
4.2	Hayaan (1979)	199
4.3	Tanaad (1972)	201
4.4	Dhallaannimo Hufnaydaa (1973)	205
4.5	Garaad-daran (1972)	211
4.6	Damaq Iyo Xusuus (1973)	216
4.7	Damaashaad (1974)	219
4.8	Fad Galbeed (1978)	222
4.9	Carshigii Jamaalka (1979)	225
4.10	Dhabannahays (1979)	228
4.11	Ka Kufriyey Jacaylkii (1978)	231
4.12	Eed Hooyo (1979)	234
4.13	Bixiso (1979)	237

4.14	Wiil Gaabsi (1979)	240
4.15	Dhaleeco (1979)	242
4.16	Hordhaca tixaha <i>Siinleyda</i>	244
4.17	Salaan Guud (1973)	246
4.18	Sidataal (1973)	249
4.19	Samir-siis (1973)	254
4.20	Gurmad (20/10/2005)	261

## **5 Goloobal (Caalami) 268**

5.1	Anwar Saadaat (Oktoobar 1981)	269
5.2	Wootar-gayt (1977)	278
5.3	Simbaabwi (7/4/1980)	281
5.4	Maandheela (Luulyo 1980)	286
5.5	Nabdaado (Oktoobar 1981)	292
5.6	Geeridii Ina Boqor (13/4/1981)	296

# Cutub 1

## Arar

### 1.1 Waa Kuma Gaarriye?

Gaarriye wuxuu ku dhashay Magaalada Hargeysa 1952. Waxaa korisay eeddadii oo dhimatay isaga oon weli hanaqaadin. Magaalooyinka Hargeysa iyo Sheekh ayuu ku dhammaystay waxbarashadiisii hoose, dhexe iyo sare intii u dhaxaysay 1960 ilaa 1970. Dabadeed wuxuu ku biiray Kuliyadda Lafoole ee Afgooye, halkaas oo uu shahaadada BSc ka qaatay 1974. Wuxuu bare ka noqday dugsiyo sare oo dhawr ah ilaa 1976. Sannadkii 1977 ayaa loo beddelay Kuliyadda Lafoole oo uu ka dhigi jirey Suugaanta Soomaaliyeed. Muddo yar ka dibna waxa loo magacaabay guddoomiyaha Waaxda Suugaanta Soomaaliyeed ee Kuliyaddaas. Sannadkii 1980 ayuu ku wareegay Akaademiyaadda

Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta. Halkaaas oo uu ka shaqaynayey ilaa 1982, markaas oo uu ku biiray halgankii hubaysnaa ee lala galay taliskii Siyaad. Wuxuu sannadkii 1973 helay miisaanka maansada Soomaaliyeed (taas oo ah qawaaniinta xukunta dhis-maha maansada). Waxaanuu markii u horreysay si taxane ah ugu daabacay joornaalkii Xiddigta Oktoobar sannadkii 1976. Isla sannadkaas buu ku biiray Guddigii Af-Soomaaliga ee u xil-saarayd erey-bixinta iyo cilmi-baadhista afka iyo suugaanta. Wuxuu wax ka qoray riwaayaddii *Aqoon iyo Afgarad* 1971. Wuxuu qoray sannadkii 1979 riwaayad aan iftiinka arag oo la yidhaahdo *Eed Hooyo laga Galay*. Wuxuu ka mid ahaa abwaan-nadii ugu waawaynaa ee ka qayb galay silsiladdii caanka noqotay ee *Sinley* sannadkii 1973. Isagaana bilaabay silsiladdii xiisaha badnayd ee *Deelley* sannadkii 1979. Waxaana faan ugu filan inaanuu weligii gabay qabyaalad ah tirin.

Gaarriye maansooyinkiisu buuggan kuma dhanna. Waxa jir-tay in qaar ka mid ahi ay ka lumeen intii uu halganka ku jiray. Nasiib wanaag, sannadkii 2005 oo uu Ingiriiska booqasho ku tagay ayuu si lama filaan ah uga helay dhawr maanso oo kala ah: *Sidaasaa La Ahaa, Dhabano-hays, Anwar Saadaat iyo Sir-ma-qabe*. Maansooyinka ilaa hadda ka maqanna waxa ka mid ah: *Dardaraan, Bayruut, Indhoole, Bilic-haldhaaley, Ma Caddee Ha Caddaado* iyo kuwa kale.

## 1.2 Mahad-naq

Marka hore waxa arrimaha lagu mahadiyaa Ilaaha amarka iska leh. Marka xigta waxaan mahad u celinayaa cid allaale ciddii



gacan igu siisay inuu diiwaankanu daabacmo. Gaar ahaanna Soomaalida ku nool magaalada Abidjaan ee dalka Ivory Coast. Sababta oo ah iyaga ayaan ka helay gurmaddii ugu weynaa ee hawshanu u baahnayd. Waxa iyana xusid mudan raggii ii suurto-geliyey inaan Abidjaan tago si aan waqti ugu helo qoraalka. Raggaas oo ay ugu cuslaayeen: Maxamed Samatar, Antoine Francois iyo Cabdi Ismaaciil Yoonis.

Waxaan xusuustayda ka maydhmayn daryeelkii iyo dhiirrigelintii aan ka helay Axmed Muuse Geeddi ‘Sanjab’. Isaga ayaan gurigiisa ku noolaa intii hawshani ii qabsoomaysay. Maalin qudha ahna i muu tusin wax i dareensiya culayskaan ku hayey. Waxaa isaguna xusid gaar ah mudan Inj. Saleebaan Nuux Cali oo aan la’aantii waxba ii suurto galeen. Wuxuu kaalin weyn ka qaatay garaaciddii iyo tifaf-tirkii diiwaankan. Waxaan kale oo aan u mahad celinayaa Shirkadda Dahabshiil oo tuurta u ridatay daabaciddii buuggan.

Waxa intaas ii raaca muddo rubuc-qarni ah ayaan maansooyinkan hadba meeris ku darayey. Mar walbana waxaa i ag joogay rag iyo dumar fara badan oo iga dhadhaminayey iguna dhiirri-gelinayey. Mana wada xusi karo dhammaantood. Waxaanse muuno uga dhigayaa inaan qaar ka mid ah magacyadooda hoos ku xuso:

Muuse Galaal, B.W.Andrzejewski, Rashiid Sh. Cabdillaahi, Maxamed Ibraahim Warsame ‘Hadraawi’, Boobe Yuusuf Ducaale, Axmed Yuusuf Ducaale, Muuse Axmed Saxar, Ibraahim Xaaji Muuse ‘Wacays’, Saalax Jaamac, Axmed Cabbaas, Yaasiin Axmed X. Nuur, Maxamed Daahir Afrax, Maxamed Saalax Xasan, Yuusuf X. Aadan, Yaasiin Ibraahim Magan, Xasan X. Cabdillaahi ‘Geney’, Aamina X. Aadan, Maxamed

Doonyaale, Amal Xuseen, Siciid Maygaag Samatar, Ibraahim Jibaax Ismaaciil, Cabdillaahi Maxamed Daahir, Cabdi Xuseen Gurraase, Samsam Haybe Xirsi, Cumar Salaad Cilmi, Maxamed Yuusuf Cilmi, Xasan Aadan Samatar, Yuusuf Aw-Xasan Ismaaciil.

Waxaan iyagana u mahad celinayaa Dr. Martin Orwin, Maxamed Xasan Alto, Yaasiin Jaamac Nuux ‘Suldaan’ iyo Mustafe Maxamed Khayre oo iyagala qayb qaatay tifaftiriddii, garaacid-dii iyo qaabeyntii buugga.

### 1.3 Hor-dhac

Diiwaankan waxa ugu horreyntii, sida aad ku aragteen mahad-naqa buugga lagu talo galay inuu daabacmo, soona baxo san-nadkii 1994-tii. Wakhtigaas oo abwaanka iyo aqoonyahanno kale oo dalka Ivory Coast kula sugnaa ay dadaal u galeen sidii maansada Gaarriye loo diiwaan gelin lahaa ee buug looga dhigi lahaa. Waxay dadaalkii ugu weynaa ku ururiyeen tixda dii-waankani koobayo inta ugu badan. Nasiibdarrose ma suurto gelin in buuggu qabyotirmo oo daabacmo wakhtigaa, sababo badan dartood (Allaan qadderin).

Dabayaaqadii labada kun iyo shantii (2005) ayaa abwaanka lagu soo casumay Xarunta Turjumada Maansada Dunida ee Jaamacadda SOAS (School of Oriental and African Studies). Isaga iyo shan qof oo kale oo ka kala socday dalalka Suudaan, Afganistaan, Hindiya, Indhooniisiya, Meksiko iyo Gaarriye oo ka socday Somaliland. Markii uu abwaanku Socdaalkaa suugaanta Dunida dhammaystay, waxa u bilowday socdaal kale oo

jaaliyadda Soomaalida ee deggen dalka Ingiriiska ay ku damceen inay abwaanka la kulmaan. Waxaana loo sameeyey kulamo tiro badan oo dalkoo dhan ka dhacay. Waxa markiiba isa soo taray xiisaha loo qabo in lala kulmo suugaanta abwaanka oo qoran.

Waxaana fursad weyn oo muhiim ah noo noqotay in aannu abwaanka kulamadaas si gaar ah ugula kulanno si aannu wixii suugaan ah ee uu qoraal ku hayo uga reebno, oo aannu mustaqbalka dhow buug uga dhigno. Waxaase nasiibwanaag noo noqotay oo aannu fursad u hellay buug dhammaystiran oo tixooyin dhowr ah mooyee, intii kale oo dhami ku urursan yihiin. Waa taa sababta nagu dhiirri gelisay in aannu diiwaankan qabyo-tirro, isla markaana ka dhigno buug, soona saarro. Waxaana fikradda noo rumeeyey shirkadda Dahabshiil oo kharashkii daabacadda tuurta nooga ridatay, la'aanteedna aannu buugani qabyo tirmeen.

Waxa ku urursan diiwaanka tixihii Gaariye intoodii badnayd. Waxa diiwaanku koobayaa 48 tixood oo afar cutub u kala qaybsan. Waa tixo abwaanku curinayey in ka badan dhowr iyo soddon sano. Diiwaankani, waxa uu xambaarsanyahay maansooyin tiro badan, gudo fidsan, aragti fog, xeeldheeri iyo farshaxan aqoon ku dhalatay. Waa maansooyin colaad iyo nabadba wax ka tidhi. Waa maansooyin nacayb iyo jacayl ka hadlay. Waa maansooyin jabhadayn iyo jamhuuriyadaynba ka qayb qaatay. Waa maansooyin caalamka iyo cibaarooyinka ka dhacay ka tixooday. Waa maansooyin dareen, aqoon, waayo-aragnimo, falsafad, siyaasad iyo shucuur waddaniyeed ka dabqaadanaya.

Diiwaanka waxa loo bixiyey *Hagarlaawe*, waxaana loogu wanqalay tixda *Hagarlaawe* ee diiwaanka ku jirta. Magacu dhowr macne ayuu yeelan karaa. Kow: dulucda, nuxurka

iyo farriinta maansada *Hagarlaawe* ay gudbinayso waa ka hagarla'aanta qabyaaladda, eexda, aflaggaaddada, dhaleecaynta, iwm. Laba: Abwaanka ayuu tilmaan ka bixinayaa. Waxaa dhici karta inta abwaan uu dhul qaso oo gabayo eex iyo aano ah tiriyo, inuu marka dambe ka koro, oo diiwaankiisa ka tifaftiro suugaanta inta iinta leh. *Xaasha!* Gaarriye hore iyo haddaba waa ka korsanyahay qabyaaladda, eexda, aflaggaaddada, dhaleecaynta, maanso-hungurida, “anigaa idhi”-da, iwm.

Si aanu akhristuhu ula kulmin tix seenyoon oo mudhux, oo aanu hadba meel afka u saarin, sababta iyo ujeeddada loo allifay, waxa tix kasta oo diiwaankan ku jirta loo sameeyey arar ama hordhac kooban oo tilmaamaya ulajeeddada tixda loo curiyey iyo taariikhda ay soo baxday.

Diiwaankan *Hagarlaawe* waxa lagu ururiyey maansooyinkii ugu badnaa oo abwaanku allifay. Inkastoon la odhan karin way ku dhan yihiin, haddana xilliga hadda la joogo intii ugu badnayd ee la heli karayey ayaa lagu kaydiyey. Tixaha diiwaankan *Hagarlaawe* ku jira looma kala horreysiin siday u kala taariikh horreeyeen, hase yeeshee, waxa la isu raaciyey loona habeeyey oo la isu xigsiyey siday isugu ujeeddo dhowaayeen, waana sababta diiwaankan loo qaybiyey afar cutub oo kala ah:

1. *Guubaabo*: oo koobaya shan iyo toban (15) tixood oo ah maansooyinkii uu abwaanku dadka ugu sii bislaynayey inay ku kacaan taliskii naxariista darraa ee askarta (xukuumaddii Maxamed Siyaad Barre) ee Jamhuuriyadda Soomaaliya ka talinayey 1969-1991 kii. Qaybtan waxa ka mid ah tixihii uu abwaanku *Deelley* ku lahaa iyo qaar kale oo badan.

1.3. HOR-DHAC

13

2. *Guluf*: oo koobaya siddeed (8) tixood oo ka hadlaya, kana faalloonaaya markii halganka hubaysan lagala hor-tegey taliskii askarta ahaa ee talada dalka xoogga ku maroorsaday. Waxa maansooyinka qaybtan ku jira ab-waanku intooda badan ka curiyey goobihii dagaalka ee jabhadaynta. Waana tixaha ugu kulul ee diiwaankan ku jira. Waxaana ka mid ah tixda dheer ee wada taariikhda ah ee *Saxansaxo* iyo maansada *Waaya-arag* iyo qaar kale.
3. *Googoos*: oo koobaya labaatan (20) tixood oo ka hadlaya arrimo kala duwan, wakhtiyo kala geddisanna soo baxay. Tixda qaybtan waxa ka mid ah suugaantii uu *Siinleyda* ku lahaa, tixihii jacaylka iyo cishqiga ku saabsanaa, kuwii ku jiray riwaayaddii aan ifka arag ee *Eed Hooyo Laga Galay*, iyo kuwo kaloo la mid ah.
4. *Goloobal*: oo ku saabsan maansooyinka caalamiga ah oo ka hadlaya dhacdooyinka dunida ka jira. Waa maansooyinka uu, gaar ahaan, Gaarriye kaga hadlayo adduunweynaha. Ma uu qabo abwaanku in caalamku, guud ahaan, isu hayo caddaan iyo madow, gaalo iyo Muslin, qaarad qaarad, iwm. Wuxuu Maxamed Xaashi Dhamac amminsanyahay in adduunku uu u qaybsanyahay in yar oo dhiigmiirad ah oo u heellan dadweynaha sidii loo boobi lahaa iyo inta badan oo muruqmaal iyo xalaalquudato ah oo dhidid-kooda cuna oo u hoggaansan sharciga oo nabadda jecel una halganta xuquuqdooda iyo xuquuqda aadanaha kale sidii ay u soo dhacsan lahaayeen.

Waqtiigan casriga ah oo teknoolojiyadda warfaafinta aad u hor-

martay, surtaggal ma aha in qofku danayn waayo adduunweynaha ku xeeran ee isaga/iyada saameeya. Dalkeennuna ma aha jasiirad ka go'an is-hirdiga axsaasiyadda adduunka.

Gabyaaguna waa lama huraan inuu wax ka yidhaahdo dhacdooyinka dunida sida ay la tahay.

@SOMALIBOOKS

## Cutub 2

# Guubaabo

Shan iyo toban tixood oo uu Gaarriye dadweynaha ku farayo waddada samaanta, wanaagga, walaalnimada, wadajirka iyo waddaniyadda.

## 2.1 Qasab Kuma Balweyn Karo (1978)

Waxay ka hadlaysaa gabayaaga iyo kaalintiisa. Waxay soo baxday xilligii ay suugaantu dagaalka hubaysan dadka u bislay-nayasay.

Wallee been ma qaayibo;  
Wallee gabay qardoofa ah  
Ama iga qandoodsama  
Qalbigaygu ma hollado.

Wallee “qaaf” ujeeddo leh  
Qiimahayga kuma rido;  
Magac waa qasaanade  
Wallee qado ma dhaafsado.

Wallee qalabka maansada  
Heesaha qumbuladda ah  
Uma qubo dhugmo-la’aan.

Ninkii beesha qaayima  
Qar hadduu ku soo dumo,  
Wallee ciidda kama qodo.

Wallee qalin-daraalaha  
Dambi qaranka laga galay  
Kama qariyo wadhatada.  
Wallee qoonta mililka leh  
Qaarka sare ma dhaydhayo.

Haddii ay qudh-gooyiyo



2.1. QASAB KUMA BALWEYN KARO (1978) 17

Joogto qoorta-soo-dhigo,  
Wallee gabay ma qurux tiro.

Shacbi qawdhamoo kacay  
Qarqarsiga hadduu jaro,  
Wallee qoofal kuma xidho.

Haddii qoys agoon yahay  
Wixiisii rag qaybsaday,  
Qaan-gaadhna sara-kaco  
Qabyadooda raadshaa,  
“Qori, sii!” ha joogtee,  
Wallee quuso kuma diro.

Waxaruhu sidaan qabo  
Weligoodba qoor-qabad  
Biyo kuma qudhqudhiyaan;  
Anna qiiro mooyee  
Qasab kuma balweyn karo.

Qaraf iyo tixaa gabay  
Ku qadhaabo uma baran;  
Quudhkaygu muu gelin,  
Qatanaha la duudsiyey  
Ayaan ugu qabbaanaa,  
Dantoodaan ku qumiyaa.

Hadba wiilka qooqane  
Maalintaasi qoodha ah  
Qushuuciisa ma akhriyo;  
Ways kala qab weynahay  
Qofna kabaha uma tiro.

Qolo-sheegashana daa;  
Iska dhaaf qabiiloo  
Qarankeenna oo idil  
Qol yar baan u haystaa.

Qummaneey xuduuddiyo  
Qaaradaha la kala xidhay  
Qoqob bay i geliyaan.

Haddaan qabi lahaa taag,  
Quruumaha adduunyadu  
May kala qaloodeen;  
Qodaxdaan ka guri laa  
Qoys baan ka dhigi laa.

@SOMALIBOOKS

## 2.2 Hoobal (1976)

Waxay ka hadlaysaa gabayaaga iyo kaalintiisa. Waxay soo baxday intaan taliskii Siyaad xoog loogu kicin.

Cumaraw Ha' iyo Woow!  
Hal madow araar culus,  
Higgaad alif-wax-maale ah  
Ama xarafka hoos dhaban,  
Hor-dhaceeda maansada  
Harawaati mawjad ah  
Hindisaha ujeeddada,  
Iyo hogo-tusaalaha  
Hal-abuurka ila garo.

Hinji oo ka sii gudub;  
Horta aan iskaa baro:  
Haybtayda guudnimo  
Heesaa ayaan ahay;  
Hantidaydu waa gabay;  
Hirwadaan ku noolahay.

Habeenkiyo dharaartii  
Intaa heegan baan ahay;  
Hurdo baal ma soo rogo.

Holac ololayaan ahay;  
Hilinkaan iftiinshaa;  
Anna ku hurunshoobaa.

Wadnahayga habayaan  
Hadba tuujiyaayoo,

Hadhuubbada u dhigataan.

Cirka haadda duushaan

Heellada la jiiibshaa.

Badahaas hugmaayaan

Baloolleey la haystaa;

Ma hafado haddaan galo.

Hoobal bay yidhaahdaan;

Indhoolaha anaa haga;

Ka hallaysan lay direy;

Halyey-yada anaa ladha;

Anaw hiisha wadhatada.

Hayaanka iyo geeddiga

Hayin dhaamiyaan ahay.

Haddii ay dagaal tahay

Hub dhacaaya baan ahay;

Nabaddana hadh baan ahay.

Adoo nacab ku haystoo

Halis aad u dhawdahay,

Rajo kuu hirtaan ahay.

Hanfigiyo kulaylaha

Hadhac lagu nastaan ahay.

Adigoo harraad qaba

Haro laga cabbaan ahay.

Taariikhda hodanka ah

Hor-dhaceedi baan ahay.

Hirdi iyo colaad iyo

Wixii halas la soo maray

2.2. *HOOBAL (1976)*

21

Giddi waan u hagar baxay.

Hurdankii Biyaan Fuu

Hujuunkii Aljeeriya,

Anaa heeray Faransiis.

Afrikaanku hororkii

Sebenkay halgaadeen,

Hootadoodi baan ahay.

Cirkay hegebo ii taal;

Dhulkaan hoos u xulanahay;

Hillaac “bilig” yidhaan ahay.

Kolkaan felegga haybsaday

Waa Ina-habreedkeey.

Qorraxdana hal-maal iyo

Hooyaan wadaagnaa.

Hogoshiyo daruuruhu

Higgaaddeey ku deexdaan;

Anoo heesa mooyee

Weligood ma hooraan.

Mankoo hiirta waa-bari

Huwan dharab ayaan ahay;

Habeenkii riyaan ahay.

Hoosiiska sagalkiyo

Saxar-qaad hawaan ahay.

Gitaarrada hadaaqana

Sir ku hoos jirtaan ahay.

Muusig hibo leh baan ahay;

Hannaan luuqdu leedahay.

## 2.3 Uurkubbaale (20/2/1984)

Waa maanso tilmaamaysa gabayaaga iyo kaalintiisa. Waxay soo baxday intii dagaallada hubaysani socdeen.

“Cawdu billooy balooy baydh.”

“Bismillaahi Yaasiin.”

Botorkiyo ciyaartoo

Sidaa lagu bilaaboo,

Anna biito-biitiyo

Bille-jire ku dheelaan

Beri hore garaadsaday.

Dadka waxan ka bawsaday:

“Dhool bari ka hirey baa

Dhaanka loo bariiyaa”.

Gabaygana Burhaanoow

Waxa aniga lay baray

Inu laba u kala baxo

Beeshana u kala yahay:

Waxay Biliso igu tidhi:

“Hadday maanso beer tahay

Run baa lagu biyeeyaa.

Bilicsiga dareenkaa

Lagu baalaleeyaa;

Xaq baa lagu bac-rimiyaa.

Baaqbaaqa noloshiyo

Biyo-dhiijinteediyo

Xilligay ku biqishaa”.

2.3. *UURKUBBAALE (20/2/1984)*

23

“Midho waxay u bixisaa  
Habka loo barbaarshiyo  
Barta lagu abqaalaa.  
Sida loogu baahdaa  
Loo buushe-bixiyaa;  
Ama loo bislaystaa.”

“Waxa lagu bardaanshaa  
Baqoolkiyo geeddiga  
Fac kastaa intuu bogo.  
Bullashada dagaalkana  
Bundugay tilmaantaa.”

“Waa buun wax lagu hago;  
Boodaanta yeedhmada  
Bigil ereygu leeyahay.  
Caws baar leh weeyaan;  
Lana baxay sabool-diid  
Soddon laguma baayaco.  
Boqor laguma caabudo.  
Biidhi-qaatennimiyo  
Baqas waa ka xaaraan.”

“Waana biime liidda ah,  
Boqnihiisa lama xidho.  
Nin baqdaa ma halabsado;  
Bayd-gaabku kuma galo;  
Beentana wax kuma laha.  
Waa Bilan ma-geyno ah;  
Bog-dooxeedu waa sino.”

\* \* \*

“Waxay bilic wax dheer tahay;  
Iyadoon bariidada  
Ballankeedi ka hor dhicin,  
Kolkay bocorta maansado,  
Adoo baalku kaa qoyey  
Xadantana u baahnaa,  
Sidii baalalleey iyo  
Balanbaallis qalimo leh,  
Ooy ubax baraarugay  
Isku waa-bariisteen.”

“Bogga kuu salaaxdee  
Burcad kuugu duugtee,  
Bu’da leebka kugu mudan  
Baydari-abbaartee,  
Bulxankeedu laba-dhaca  
Sida uur-ku-baalaha,  
Boogahaaga hoosiyo  
Bayrtaada qoomee.”

“Kolba baaq xiloodin ah  
Barta aad u nogoshahay  
Intuu baac u sii dego,  
Tixda miino-baadhkii  
Fiix kugu biskootiyo  
Dhul bacdii ku taal iyo,  
Ku banayso meel aan  
Beryahaaba gacal dayin.”

“Ee baahi-laawuhu  
Adigoo basiiro leh



2.3. *UURKUBBAALE (20/2/1984)*

25

Intuu boodhka kaa tumo,  
Xiisaha basaasiyo  
Beer-qaado laabtee,  
Tuduc wali gun iyo baar  
Meel baas ku taabtee,  
Intuu baaxad le'eg yahay  
Isagoo banbaane ah  
Badhtankaaga ka sanqadho.”

“Ee kugu ballaadhee  
Markii bayd la sheegaba,  
Sidii baal qarsoodi ah  
La bac dhabay xogtaadii,  
Hadba baallo-daymada  
Faraq-bood ka qaaddee.”

Maansada ba'leeyda ah  
Ee baadi-soocda leh,  
Bog kastoo la soo rogo  
Sir aad bixisay mooddee,  
Nafta oo baraad li'i:  
Kolba “baga!” tidhaahdiyo,  
“Bishmaha Eebbe kuma jaro.  
Ninka yidhi run badanaa!  
Ma afkaygu kala baxay?”

Afartaas baldhooleey,  
Waxa lagu ballaysimay  
Maansadu balooleey,  
Markay bilic wax dheer tahay.

\* \* \*

Waxa taasi baal taal  
Iyadoo bakooro leh,  
Kolkay baydda furatee  
Biyo-dhaca wax dheer tahay.

Ee baqalka tiriya,  
Dhulkoo baaxad-soore ah  
Afka wada bustaan iyo  
Kaga dhigo barwaaqee;  
Barakada Suldaankiyo  
Badhaadheeye saaree;  
Baydanoo la yaabbani  
Ku tidhaahdo: “Bacaluul,  
Waan dhega-barjoobe  
Adoon hadalka sii badin  
Bes waxaad ku daysaa.”

“Murtidaadu Booshaaq  
Badhax iyo cindiid iyo,  
Sida caanihii baqay  
Buqbuqood hadday tahay,  
Anna biirta maansada  
Ereyada baryoodka ah  
Balalaan ka qaadaa.”

“Baashaal hadday tahay  
Markaad gurato beesado,  
Buculloow manaam iyo  
Riyo lagu ballaysimo;  
Adaa, boowe, seexdee  
Anuu baal ma soo rogo.”

2.3. *UURKUBBAALE (20/2/1984)*

27

“Hadday buur ku joogtoo  
Buska hoose neceb tahay,  
Anuu boodhka kama kaco.”

“Buubaal hadday tahay  
Oo baalal leedahay,  
Waa baayadeedee  
Badhidaan ku siqayaa.”

“Hadday biira-biiriyo  
Bakhti iyo nijaas tahay;  
Oo booli lagu sabo  
Bisinkaan ka haystaa.”

“Hadday seebab bixisoo,  
Badaa cido ku dhaqan tahay  
Baan loogu talo galay,  
Waxa biisay oo qudh ah  
Barrigaan ku noolahay.”

## 2.4 Kabo-caseeye (1979)

Waxay ka hadlaysaa wiil kabo-caseeye ah (baalashle), oo aan Ceel-gaabta Muqdisho galab kula kulmay. Isaga oo i shaxaaday ayaa dabayl dhabatay oogadiisa maradii ka feydday. Waxaan halacsaday boogo wada caabuqay oo kor iyo kal jidhkiisa qariyey, iyo dooryaan ku soo hoobanaya oo uu gamcaha ku didinayo. Aniga oo yaabban ayaa mise waa gaadhi shabagle ah oo askari ka buuxdo. Durba wiilkii yaraa bay, intay sidii kubbadda malaaseen, baabuurkii guradiisii ku tuureen oo la galbadeen. Markaan u sii dhabbo-galayna waxaan ogaaday in amar lagu bixiyey in carruurta dib-jirka ah magaalada laga ururiyo. Si aanay u arag wufuudda shisheeyaha ah ee Xamar u imanaysa xuska “Sannadkii Carruurta”.

Waa curub abaadday;  
Waa laan cusayb ah  
Oo ciiro fuushay;  
Curdin weeye qaadhay;  
Waa cudur jidh yeeshay;  
Waa baahi cago leh;  
Waa ciil dad-weyne  
Canug laga sameeyey.

Caynkuu u eeg yey  
Carrab laguma koobo;  
Waa caato miiqan  
Oo caday ka dhuuban.  
Waa ciirsi-laawe;  
Waa kabo-caseeye

2.4. KABO-CASEEYE (1979)

29

Ceel-gaabta jooga.

Waa caado-goys yar;  
Ma yaqaan cisaynta  
Qofna kama cabsoodo;  
Waa cadho gadhoodhay.

Casar buu agtayda,  
Isagoo cagaagan  
Oo caano-waaye  
Baatrool cabbaaya,  
Anoon caanad haysan  
Kaga cawday gaajo;  
Oo aanan caawin.

Sidii ruux canaaday  
Goortuu cabbaar yar  
Isha igu canaantay,  
Waxa caratay siigo  
Calooshiisa qaawan  
Markii ay ku ciirtay  
Masraxii cadaabta  
Oo car iyo bay la'  
Calalkii ka feyddey;  
Kana curatay sheeko.

Cayayaanki firshay  
Cartanaw boggiisa  
Boogaha cunaayey.

Dukhsi aad col mooddo  
Oon cadad lahayni,

Caabuqi korkiisa  
Durba caasha saare.  
Carcartiyo kulaylka  
Kolkuu caydhshu guuto  
Cutub soo hor yeelay.

Anna camal-wareeray;  
Caal-waa daraaddi  
Ciddiyaha qaniinay.

Waxna cirirka gaaxday  
Igu sii cusleeyey,  
Cagiduu dhaqaaqay  
Ciidan baa taxaabay;  
Lagu yidhi: “ciyaalka  
Cid daryeesha haysan  
Ee aragga cawlan,  
Si naloogu caayin,  
Ku cabbeeya gaadhi!”

Sababtoo ah caawa,  
Waxa yimi Curuuba  
Dhawr wafdoo caddaan ah  
Iyo qaar Ciraaq ah;  
Oo Cabbaas i leeyey:  
“Waxa loo casuumay  
Sannadkii Carruurta”.

## 2.5 Beer-wale (1979)

Nin beer-wale ah oo sabool ah ayaan Af-gooye kula kulmay. Wuxuu ag yiillay Webiga Shabeelle dhinaciisa. Hase ahaatee wax xidhiidh ah oo labadooda ka dhexeeyaa ma jirin. Sababta oo ah qalabkii uu biyihiiisa kula soo bixi lahaa ayaanuu haysan. Matoorrada iyo cagafyada la sheegana wuxuun buu ka maqli jirey idaacadaha. . . siiba marka uu “Macallinku” uu guulaha Ok-toobar tirinayo. Isaguse ciddiyihiiisa ayuu beertiisa ku fali jirey. Dhididkiisa iyo biyaha cirkana wuu ku waraabin jirey. Ayaantay bislaatana (A.D.C.<sup>1</sup>) ayaa midhaheeda kala wareegi jirtay; oo uu dib uga iibsan jirey.

War-bixintaas naxdinta leh isaga oo ii wada ayuu arkay basaasiin na dhegaysanaysa. Markiiba intuu istaaqfurullaystay buu sheekadii beddeley; oo uu ammaantii ay jeclaayeen u saaray. Wuxuu yidhi: waxaan ahay asaasayashii (X.H.K.S.<sup>2</sup>); carruur-tayduna “Ubaxa Kacaanka” ayey ku wada jiraan. . . halkaas buu sheekadii mariyey, baaqigana maansada kala soco:

Gaarriyoow ammuur culus  
Gaarriyoow af-kala-qaad,  
Arrin waliba meel lehe  
Ammin wali xusuus lehe,  
Ayeydeey mas baa cunay;  
Aabbahay sidaan qabo  
Isticmaarki baa dilay,  
Awawgayna mooyaan.

---

<sup>1</sup>Agricultural Department for Crops.

<sup>2</sup>Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

Anna beer-walaan ahay;  
Afgooyaan ku noolahay;  
Arligaygu roob ma leh;  
Webigaa agtayda ah  
Intifaacsi kuma qabo.  
Aaladaha matoorkiyo  
Qalabyada ordaayana  
Weligayba maan arag.  
Cagafyada abraaree  
Ugaaskeennu sheegaa,  
Waa ii afkiisiyo  
War-idaacadeed iyo  
Guulaha Otoobare.  
Gacmahaan adeegtaa  
Ma awoodo yaambada.  
Arradkiyo falliinkaa  
Faraha i abaadshoo,  
Way wada af-beeleen.  
Uurkaygu waa milil;  
Adhaxdaydu waa boog;  
Cudur baan il-daranahay.  
Addimada cagaagiyo  
Oof baan u liitaa.  
Abuurkayga ciil iyo  
Urugada naftaydiyo  
Umal baan ku beeraa.  
Sida ugaxda diinkaan  
Eegmada ku koriyaa.



2.5. *BEER-WALE (1979)*

33

Oogada huraysiyo  
Uumiga korkaygiyo,  
Dhiiggayga oomani  
Kolkuu aburka saydhaan,  
Xididdada agoonta ah  
Ku waraabiyaa umal.

Waxay saa ahaataba,  
Ayaanteey bislaatee  
Aayaheedu soo baxo,  
Ayaax baa ku sara-kaca  
Wuu wada idlaystaa.

Inta layga adag yahay  
Isna waa anfaaciga  
Anna waa awaaraha,  
Eridhabanki baan ahay  
Nacabka u irmaanaa.

Istaaqfurulla, waa been!  
Askartii war-sheekadu  
Yeey ina af-qaadine.

Adduunkii i soo gala  
Iskaa baan ku bixiyaa.  
Xisbigenna aadka ah  
Aasaasiddiisii  
Ayidaadda sacabka leh,  
Raggii ku aqbalaan ahay;  
Dagaalkii Itoobiya  
Adaraa la ii direy.  
Ururrada dad-weynuhu

Waxay hees aloosaan  
Erey iguma seeggana.  
Ubadkayga roon-roon  
Ubaxaan kurtood qorey.  
Afadayda Xaawana  
“Oryantayshankaa” jecel.

Akhriskiyo qoraalkiyo  
Dejintiyo abaartiyo,  
Aftidiyo distoorkiyo  
Dhammaan ololayaashii,  
Irsiq hay dambeeyee,  
Ammaan baa la ii dhigay.

“Aabbaha Kacaankana”  
Asmaadiisa boqolka ah  
Waan wada aqaannaa;  
Maxaa yeelay waa amar  
Amar dawlo weeyaan.  
Aynfaadka joogiyo  
Eedaadka maantana,  
Allahiisa weeyee,  
Sida Odaygu leeyahay  
Kama iman xaggiisii:  
“Iimaaanka beeliyo  
Af-miishaarka baas iyo  
Isticmaarka weeyaan.”

## 2.6 Dugsi Ma Leh Qabyaaladi (10/12/1979)

Maansadani oo ah tii bilawday *Silsiladdii Deelley* waxaan ka bixinayaa faahfaahin dheeraad ah. Waa tahay. Sannadkii 1978 waxaa fashilmay af-gambi ay koox ciidankii qalabka siday ka tirsanayd ay isku dayeen. Muddo ka dib ayey nimankii uu ka dhicisoobay Itoobiya kaga dhawaaqeen Jabhaddii (S.S.F.<sup>3</sup>). Dadka Soomaaliyeedna cuqdad bay ka qabeen Xabashida iyada oo markaas uu laga soo jeestay dagaalkii 1977.

Arrintu si kastaba ha ahaatee, nin Khaliif Shiikh Maxamuud Siciid la odhan jirey, oo Jabhaddaas ka tirsanaa, ayaa maanso soo direy uu qabaa'ilka Soomaaliyeed oo dhan ku maagayo, isaga oo qabay inay dirirta Af-weyne kaga baxeen. Markiiba waxa ka jawaabay nin Dhirbaaxo-jin la odhan jirey. Dhirbaaxo-jin, isaga oo qoladii uu ahaa (Isaaq) difaacaya, ayuu weerar ku qaaday qoladii Khaliif ahaa (Majeerteen). Halkaas baanay ka bilaabantay *Silsiladdii Miinley* ee ay ragga badani ka qayb galeen. Dawladdii Siyaadna, iyada oo ku faraxsan dadkan qabyaaladda iskaga hor-yimi, waxay bilowday cajaladihii gabayadaasu ku jireen inay badiso oo faafiso.

Maalin maalmahaas ka mid ah, ayey niman dhallinyara ihi noo yeedheen (aniga iyo Hadraawi) iyaga oo naga codsanaya inaannu gabayadaas ka jawaabno, annaka oo “reerkayaga” difaacayna. Waxaannu u sheegnay inaannu ka jawaabayno, hase ahaatee aannu siday nala tahay uga jawaabayno. Sidaas oo ahayd inaannu magac qarannimo ku hadallo; dadka la isku di-

---

<sup>3</sup>Somali Salvation Front, Jabhadda Badbaadinta Soomaaliyeed.

rayana cududdooda isu gayno, si ay ugu midoobaan dagaalka taliska lagula jiro.

Annaka oo sidaas ku ballansan ayuu Siyaad noo yeedhay horraantii Bishii Diisambar 1979. Waxaannu ahayn aniga, Hadraawi, Yuusuf X. Aadan, Idaajaa iyo Yamyam. Hadal isagaa iska badnaaye, wuxuu na weyddiistay inaannu dagaal kula qaadno qabyaalladda oo uu noo sheegay inay xoogaysatay. Aniga iyo Hadraawi, annaka oo ka faa'iidayshanayna fursaddaas, ayaannu fulinnay arrintii aannu hore ugu heshiinnay. Markaas baan anigu bilaabay *Silsiladdii Deelley* oo maansada hoos ku qoran ku furantay.

“Dig” dheh deelka maansada  
Tixo dur iyo daabac ah,  
Isku-duubni wadareed  
Ha ka dido shan-xuublulu.

Arrin waa la diga-rogay;  
Doonyihii la raran jirey  
Markab baa ka daba yimid;  
Cirka haadda duushaa  
Ka duuduubte samadii;  
Waxa helay dayuurado  
“Deja!” baalashii yidhi.

Daacuunki fridhkiyo  
Daaniyii dhaqaalaha  
Rag duraa ku soo baxay.  
Inta daafka fidisiyo  
Dab-layaasha dhimanaw,

2.6. *DUGSI MA LEH QABYAALADI* (10/12/1979) 37

Digtoonaada way kane!

Afartaa docdaa mari

Dersigaygu waa meel.

Taariikhda duugga leh

Waxan ugu hor daabacay,

Xil damiirku qaadiyo

Waa faral dushayda ah.

Qalinkiyoo dawaaddaa

Inaan fuliyo ii direy.

Waxan uga dan leeyahay;

Nin qabyaalad doojaw,

Doqonniimo waa cudur.

Haddii aad dux leedahay

Bal docdaada uun eeg:

Inta dumar agoomo ah!

Inta dhiig dad lagu qubay!

Inta darib nin lagu cunay!

Inta duul ku qaran-jabay!

Debec-yaa-lahaayeey,

Maxaa degel ku baaba'ay!

Maxaa dhacay ummulo-doox!

Anigaa nin-door iyo

Anigaa wax dumin kara

Maxaa beel ku "dumug" tidhi!

Immisaa dugaag qaday

Dubaaxdiina loo wadhay!

Darka iyo xareeddiyo

Daaq laysu qoonsaday,  
Dirirtiyo colaaduhu  
Maxay haad dibbiriyeen!  
Islaani wiilki laga dilay  
“Dugayeey!” maxay tidhi  
Dadab iyo aroos iyo  
Aqal laba-deryaale ah  
Maxaa daaha loo rogay!  
Waxan uga dan leeyahay;  
Summad iyo dir-sooc iyo  
Qofkii duuf ku noolow,  
Alla-doori baad tahay!  
Soomaali waa duud;  
Dakan-qabe ha joogee  
Waa ul iyo diirkeed;  
Deris iyo tol wada yaal  
Nin dan laana kala gura.  
Qabiilkii dorraad yiil  
Isticmaarki baa dumay;  
Shalay daba-ka-naax iyo  
Dibitaati baa waday;  
Maantana dillaal iyo  
Dibbir baa ku xoogsada.  
Waa dabin qarsoodi ah;  
Ummadday ku dagayaan;  
Boobkay ku dedayaan.  
Qolo-qoladan loo degey  
Kama iman dad-weynaha;

2.6. *DUGSI MA LEH QABYAALADI* (10/12/1979) 39

Ragga dacarta huriyaa  
Waa kooxo duumo ah;  
Daaddihiyeyaashiyo  
Maamulkay ku duran yiin.

Qaar baa diktoorro ah  
Digriigoodu madhan yahay;  
Qaar baa durbaanno leh  
Oo daacaddii jaray.

Darna waa hagoogtaan  
Waa deniyo waaweyn.

Isku soo dabbaaloo  
Waa dabaqad maal jecel;  
Waxa loo dig leeyey  
Dhididkayga dahabka ah  
Sidii loo dudubin laa.

Afartaa docdaa mari;  
Dugsi ma leh qabyaaladi;  
Waa dararta baahida;  
Waa astaanta dib-u-dhaca;  
Waa boog dalooshoo

Dadka maanka kaga taal.  
Dirxi qudhun ku nool iyo  
Waxa fadha nin daalin ah;  
Damqa oo ku joogsada.

Balse dira-diraaloow  
Dabka yaad u sidataa?  
Yaad daafacaysaa?  
Haddii uunku kala dido

Sidu yeey u daran tahay?

Dib-jir iyo nin xoolo leh  
Dambi-laawe iyo tuug,  
Doc-doc weeye shicibkuye  
Yaa daawo leediin?

Waxaan uga dan leeyahay  
Haddaad duulimaad tahay  
Riddo waa u meel dayo.  
Doxor-yahaw ab-tiriyaa  
Armaad dogobka qiiqa leh,  
Darintaad ku huruddiyo  
Dushaaduun ku hurisaa!

Afartaa docdaa mari;  
Tixdu way dagaal-timi;  
Waa daabbad aan biqin  
Cilmi baa u diirad ah.  
Durba gumuci koowaad  
Waxay daartay nabarkiyo  
Waxa doogta ugu wacan;  
Dawadiise may gelin.  
Kuwa ararta daajiyo  
Rag baan ula dan leeyahay  
Deelleeydi waa koow.



## 2.7 Colka Wadhaf Ma Lagu Deyey? (1/1/1980)

Waa maansadiisii labaad uu Gaarriye *Silsiladdii Deelley*, horey isagu u furay, ku lahaa. Waa jiifto dareenkii kolkaas jirey si wacan u cabbiraysa. Waa tixo qabyaalad-diid ah oo qoomiyad-u-dirir ah. Waa hees muggeedu iyo sarbeebteedu aad u culus-tahay.

Dood wali tixraaceed;  
Daad waliba taagtii;  
Duddo wali yagleesheed;  
Sabo waliba daaqeed;  
Damiir wali canaantii;  
Dawan waliba yeedhii;  
Dacar wali hulaaqeed;  
Deelleydu waa shaxe,  
Ninba waa godkuu dego.

“Dig” dheh faraski Doollaal,  
Mar labaad ha dananee;  
Hadraawow, ku soo durug,  
Malmal iyo dabqaad hoo,  
Ila didi abeesyada!

Dib-ka-naaxa laba kacay  
Ama diradiraaluhu,  
Yuu inoo dardaar-werin!  
Dumbukheenna shiishka leh,  
Duwi maynno weligii.

Dad hadduu istoydana,  
Danyar baa sokeeye leh,  
Dugsigeennu way-yaga.

Ifkaan daaray waa kaa;  
Dalka iyo Jabbuutiba  
Ragga iga dambeeyaa  
Hadba dogob ha saaree,  
Colka wadhaf ma lagu deyey?

Afartaa dheh: “Deelleey!”  
Deji oo rogaal celi!

Dulmar weeye ee garo;  
Kadantii duqeedii  
Lagu yidhi rag baa diley  
Ee aan ma-diiddada  
Garan duurxulkeedee  
Dhaqso loo dumaalee  
Dadabtiyo arooskii  
Iyadoo dabbaaldeh ah  
Ninkay duugtay soo galay,  
Ma inay is-dooxdoo,  
Shaamarreer dayowdaa?

Waxaan uga danleeyahay;  
Cirka danab ka soo dhacay  
Dabka fiday kamuu iman  
Digaa hoos ka noolayd,  
Deg-deg iyo hubsiinana  
Mid kastaaba duuggeed.

2.7. COLKA WADHAF MA LAGU DEYEH? (1/1/1980) 43

Afartaa dheh: "Deelleey!"  
Deji oo rogaal celi!

Gabbal dumey habeennimo  
Dayixii cadceeddii  
Inuu damiyey moodee  
Carshigeedi degayee,  
Isagoon digniin qabin  
Kolkuu waagu daalacay  
Casilaadda loo direy,  
Ma inuu dumaayoo  
Hadba doc isku qaadaa?  
Belo waa dambaysaa,  
Durba fadalku waa maxay?

Nin muraayad daawaday  
Foolxumo is-diidsiin  
Kuma doorin karayee,  
Ma inuu dillaacaa?

Duxda hadalku meel lehe;  
Dusha boogta laga dhayo  
Aan mililka loo degin  
Dawadeeda lama helo.  
Darbaddii qabiilkiyo  
Hadduu doogtay nabarkii,  
Gacantii wax duugtaay,  
Dufan baad u baahnayd!

Afartaa dheh: "Deelleey!"  
Deji oo rogaal celi.

Maska xuub-dillaacsaday  
Dabarkiyo mareegtii  
Dar Ilaahay uma furan;  
Goortuu ris daaqee  
Dibbiruu maqaarkiyo  
Ka dallacay hugiisii,  
Waa duluc ujeeddo leh.

War jiraa dareenkii;  
Danyartaay, waxgaradkaa!  
Intaad tahay darkaa wadhan  
Ee layska dawdabo,  
Darxumadaa ku nooloow,  
Anna aan dagaallamo!

Afartaa dheh: “Deelleey!”  
Deji oo rogaal celi.

Xiddiddada dawaafka ah  
Ee hoos u daaddegey  
Dhulka uma dalxiis tegin,  
Dantoodaa fogeeysoo  
Digarogashadoodii  
Didibkay qasbeen oo  
Dardar iyo awood bay  
Gebiyada ku dumiyeen  
Buuraha ku didiyeen.

Waa duluc ujeeddo leh;  
Dakanada qabiilkiyo  
Kala fridhku deyr iyo  
Derbi adag hadduu yahay

2.7. COLKA WADHAF MA LAGU DEYEY? (1/1/1980) 45

Kuuna diiday socodkii,  
Intaad duluglahaad tahay  
Dabatada ku nooshahay  
Waa daabac kugu yaal  
“Ha la daayo!” iyo hees  
Duco iyo habaar iyo  
Amar dawlo kuma baxo.

Dib u raac ujeeddada,  
Inta ciiddu dihin tahay  
Dhaqaaluhu daleel yahay  
Dadna kala sed roon yahay,  
Weligaaba duudduub  
Dusha ubax ka saarsaar  
Daqar waa halkiisii.

## 2.8 Madax Goodir (4/4/1980)

Sida kor ku xusan, sannadkii siddeetankii horraantiisii ama dabayaaqadii sagaal iyo toddobaatankii waxa dalka Soomaaliyeed ka curatay tixdii la magac-baxday *Deelley*. Tixdaas oo silsilad ahayd, waxay ka koobnayd maansooyin ay is-dhaafsadeen abwaanno Soomaali ihi. Waxa xoog looga dooday dhibaatoyinkii dalka markaas ka jirey iyo ciddii ka mas'uul ahayd. “Ninba ceesaantii ceel keen.” Rag taliskii Siyaad daafacay iyo rag cambaareeyeyba waa la lahaa. Waxaase ka aakid ahaa inay kelidii-taliyihii ku soo baxeen hal-abuurro isa soo gunaanaday, oo fool-xumooyinkiisii farta ka saaray. Isna wuu u qaadan waayey. Mar wuxuu ku taliyey in la soo qabqabto. Marna in qaarkood la laayo. Ugu dambayntii wuxuu ku adkaystay in *Deelley* la mamnuuco.

Halkaas kolka wax marayaan baan waxaan xusuustay sheekadii “Boqorkii Geesaha Lahaa” iyo dhex martay ninkii u xiirayey ee iinta ogaaday. Arrintaas ayaanay maansadu ku salaysan tahay.

Mar aan gaban ahaa beri  
Galab aan adoogeey  
Geed uu fadhiyi jirey  
Sheeko kooban kaga guray,  
Wuxu yidhi guyaal hore  
Boqor geeso laa jirey,  
Oo goostay weligii  
Inaan iinta lagu garan.  
Fule waa geddiisee,

2.8. MADAX GOODIR (4/4/1980)

47

Wuxu goorba hubiyoo  
Gedfo oo cumaamado,  
Gadh-xiir baa sirtii helay.

Godob buuse taransaday  
Garashadu u sabab tahay  
Nin gefaana laga dhigay.

Hadduu gaabsan waayana  
Inuu gawrac jiro maqal;  
Hadba giirka loo kici  
Goldooladuu helay  
Inay gudubto loo diid.  
Isna waa gartiisee  
Liqi waa gasiinkii  
War guntamay la fool-qaad.

Hadba gaadhka meel dhigay  
Dadka uurka googa'ay  
Sida garac ka wada qari.

Sidii naag shinkeed go'ay  
Ganacyadu hambaabuqe;  
Gabbashada micin mood.

Goobyaaalka laylkii  
Kolkay gama' is-waayeen,  
Gelin dhexe rugtiisiyo  
Gurigii ka soo bood.

Gudcur beegsay duurkiyo  
Geliyada dugaagga leh.  
Mugdigii galaydhkiyo

Garanuugta kala dide.  
Wuxu gabi-dhacleeyaba  
Kolkii waagu “galac” yidhi,  
Geed hoosti faadhfaadh;  
Sida bahal god dheer qoday.

Dabadeed gafuurkiyo  
Gadhka ciidda saaryoo,  
Intuu fiirshay geesaha,  
Goofkii xogtuu helay  
Gaagaabsi ugu sheeg.

Dulucdiina gaadhsii:  
“Inu boqorka goojaa,  
Madax goodir leeyahay”.

Hadda igama geyside,  
Waxaad iga guraysaa  
Sheeko beri la ii galay.

Geesigu warkiisii  
Ku cabbudhay kolkuu ganay,  
Garbahiisa laga duul;  
Gebigiis fudayd noqoy.  
Goobtiina aasyoo  
Ka hurgufay go’iisii;  
Galbay oo ka sii socoy.

Ka gadaalna meeshii  
La ye goorti roob helay,  
Geesaa ka soo baxay.



## 2.9 Hashii Cosob (1980)

Sannadkii 1980 ayuu Taliskii Siyaad olole ku qaaday wuxuu ugu yeedhay “suuqa madow”. Wuxuu magacaabay Guddida Cidhib-tirka Suuqa Madow. Nin aannu saaxiib ahayn ayaa ii yimi oo ii sheegay in guddidaas lagu daray. Isaga oo ku faraxsan ayuu iiga warramay siday u qabqaban doonaan “tuugta”. Markii uu iga waayey xiisihii uu iga filayey ayuu sababta i weyddiiyey. Waxaan uga warramay in taliska adeegsanayaa uu laftiisu yahay suuq madow. Isaguna ka mas’uul yahay dhibaataada oo dhan. Waxaan kale oo ugu daray inaan guddidiisu far saari karin ragga la naas-nuujiyo ee ka ganacsada suuqaas isaga ah. “Waxa la doonayaa” baan ku idhi, “inaad soo xidhxidhaan jeeblayaasha yaryar, si la inooga jeediyo meesha eelku yaallo.”

Codkii dadka baahan  
Caroogga saboolka,  
Adduunka ku ciillan  
Anaa cudha haysta.

Anaa Cabdillaahi  
War-geys u ah caydha.  
Caloosha danleeyda,  
Anaa cabbiraaya.

Anaa carrabkayga  
Xammaalku cabbaayo,  
U diiday cir-weyne  
Inaan ku casuumo.

Gafuur cadho yeelki

Intaan cosob-raaco,  
Wallee is-ma caayo.

Waxsay tahay caawa  
Calaacalimaayo.  
Hal baa curanaysa;  
Ufaa caranaysa;  
Malaa cir da'aaya  
U sii ah calaamad.

Ciyoowga higgooday  
Wuxuu ka cif-leeeyey,  
Colaad ka horreysa  
Cagaar hiri doona.

Haddeerse caleenta  
Xagaagu caddeeyey  
Cimraa u run-sheegay.  
Dhurwaaga ciyaaya  
Cabaadku naf weeye.

Cadceed-galabeedku  
Godkay cidhif joogto  
Dan bay ugu ciiri.

Wax taasi la cayn ah  
Cadaawe jabaaya  
Haddaan helo ciidan.

Intaa cuti koow dheh  
Su'aal yarna ii cug.  
Ayaa ku cadaadshay?  
Waxaad dhaqday deyr-cad

2.9. *HASHII COSOB (1980)*

51

Ayaw jaray cawda?  
Shabeelki Cagoole  
Hadduu dad-cunoobay  
Jidh caato ah doonay  
Caddiinkana diiday,  
Hadmaad u cadiigsan?  
Hadmaad ka cad-goosan?

Haddaad caqli leeday  
Intaad cilmi-baadho,  
Car suuqa madoobi  
Cidduu yahay soo hel!

Cagaarka la leefay  
Cirroolaha baahan  
Ciyaalka jal beelay,  
Hablaa carcaraafay  
Cibaarada joogta  
Canaanta ayaa leh?

Ma jeeblahan cawlan  
Ayaa ku curyaanshay?  
Kumaa cadawgaa ah?

Nin kuu cudud-sheegtay  
Dhashaadana caydhshay;  
Nimuu camalkiisu  
Jar dheer kala ciiray;  
Nin ceebta korkiisa  
Caddaan ugu taalla  
Aroorba cid saara,

Maxaad u cawaansan?

Fulaa cararaaya

Maxaad ugu ciidmi?

Dhiqlaa ku cunaaya

Intaad ka cabsooto,

Maxaad naf cagaagan

Islaan cimri-goys ah

Cibaado sabool ah

Culayska u saari?

Miyaan cadda-loolka

Habeenki ciyaarta

Carruurtu ku heesin:

“Maroodi cadhoole

Haddii col la sheego

Cadaadda-ku-meere

Hashii Cosob waa tan!”

## 2.10 Qiyaame (1980)

Markii lagu jabiyeey dagaalkii Itoobiya (1977) ka dib, waxa bilaabmay burburkii taliskii Siyaad Barre. Inqilaabkii 1978 fashilmay, ee lagu af-gambiyi gaadhay ayaa isna jaah-wareer ku sii riday. Durba waxa la bilaabay in jagooyinka halbawlaha ah reerka kelidii-taliyaha loo wada dhiibo. Ruushkii baa la eryey oo Maraykan baa halkiisii la geliyey. Dhaqaalihii baa burburay. Qabyaaladdii iyo naas-nuujintii baa si sidii hore ka qaawan loogu badheedhay. Markii waxba socon waayeen ayaa waxa food-saaro laga dhigtay in “kacaankii leexday” oo loo baahan yahay in la toosiyo. Waxa 1980 lagu dhawaaqay wax loogu yeedhay “laba-kacayn” oo la ina yidhi kacaanka ayaa dib loogu cusboonaysiinayaa. Xisbigii la ina lahaa dalka ayuu hoggaaminayey iyo hay’adihiisii ayaa la hakiyey. Waxa dib loo soo nooleeyey wixii la odhan jirey “Golihii Sare ee Kacaanka”. Iyada oo la isku dayayo in la ina dhacsiyo in waqtigii askartu talinayeen xaalku hagaagsanaa.

Maansadan *Qiyaame* arrintaas ayey ku soo baxday. Waxaanay dadka tusaalaynaysay in taliska gabbalkiisii gaabtay; gefafkiisuna ay wax la sixi karo ka culus yihiin. Sida Diintu ina bartayna waxa la yidhi: marka Qiyaamaha la gaadho kutubta ayaa qallasha; qalimadana waa la rafacaa; toobaddana lama aqbalo. Haddaan soo ururiyo, waxa tixdan dulucdeedu tahay inay talo faro ka haadday; oo aan hadda wax la qaban karayaa jirin mar haddii suurtii la isu afuufay.

Qoys baa la yidhi  
Wuu qadhaaban jirey,

Qayb-wadaag ahaa;  
Beri qadafka iyo  
Quudhsigu yaraa,  
Qoonsimaadna jirin.

Way qashiin baxeen,  
Qalab bay heleen,  
Qabyo korodhay iyo  
Qorshaa meeshi yimi;  
Durba qawqab dhalay.

Qori-tuuradkiyo  
Qoondaysigii,  
Keli-qayte iyo  
Qaadaa-ma-dhereg,  
Noqde laba qabiil  
Oon qira-heshiin;  
Daan iyo qadhiidh  
Qoon aan is-bixin.

Hadda qayladiyo  
Qacdu waa iyaga;  
Waa qodax dhex taal  
Qatanaha kaciyo  
Qawlaysatada  
Qawlaladu cad yiin.

Afartaasi qodob  
Qabo Abu-Hadroow!  
Qiso kalana hoo!

Ina Qaytihii

2.10. *QIYAAME* (1980)

55

Qallaxnaa ma garan?  
Kii baha-dad-qalad!  
Qayaashmaashki dee,  
Qudbadaha badnaa!  
Qabbaabaalihii  
Durba qaati noqoy;  
Qarraaq doonidii;  
Qusur oodan jiidh;  
Qiiraqirihii  
Hadba doc isku qaad  
Iyo qar iyo buur.  
Qarnigii cilmiga  
Qubanaha is yidhi  
Ku muquuni qori;  
Qallef iyo ba'naan  
Iyo Quuflihii  
Qaab laga il-baxay.  
Qaran idil ku yee,  
Qof hadlaa ma jiro.  
Qaadaa-dhig talo;  
Qardajeex ku eeg;  
Qablanyoo la diid;  
Qobtolyoo furfuran;  
Qolo-qolo u shiri;  
“Heeso qaada!” yidhi;  
Ku qaboobi waa.  
Qasan xaa jigii;  
Wuxu qaadhanaa

Ee qoor casaa  
Qabqablaa u baxay.  
Hadba qaarad aad;  
Quruumaha colka ah  
Kala qari is yidhi;  
Lagu qabay ma dayn!  
La qaniin ma garan!  
Qibladaha kunka ah  
Midna qiil u waa.  
Qarafadi ku xiiq;  
Ku qadyoo ku noqoy;  
Ku qasaar ku faan;  
Ku qatalan baryada  
Ka qatoobi waa.  
Qaydkii yaraa  
Iyo qoor-tolkii  
Qaaliga ahaa  
Sicir jaban u quudh.  
Alla-qabay misana  
Inu qaawan yahay  
Qiran waa Fircoon.  
Qorrax foorartiyo  
Naf xabaal qar taal  
U jaxaas qardhaas.  
Qod gaboobayoo  
Ka qalloocday meel  
Qofka toosi yidhi,



2.10. *QIYAAME* (1980)

57

Waa daad-i-qaad  
Oo xumbaan qabsaday.  
Goor qiyaame kacay  
Hadda qiiradiyo  
Qoomammadu bilaash.  
Qalimadi la laab;  
Kutubtii qalale;  
La quraan Dijaal;  
Quntay Daabbaddii.  
Miisaanki qaran  
Kafadihi qotomi;  
Qaan-sheegti keen:  
Dambi la isku qaad;  
Oo qire dadkii  
Inu Qawdhan yahay:  
Xawaldaar qandhadh ah  
Arasayn qufulan;  
Kabo-qaad dorraad  
Gumaystaha qudhmuun  
U qabbaani jirey;  
Maantana Qurxoon  
Gabadhaan qudh-go'a  
Kaga furay Qarqoosh,  
Ku dumaalay qori  
Qasbay oo kufsaday.

## 2.11 Gashi (1980)

Yuusuf Xaaji Aadan Cilmi, ninkii yaqaan baa yaqaane, waa taallo. Wuxuu ka mid ahaa raggii gobannimadii u soo halgamay. Wuxuu kaloo ka mid ahaa macallimiintii ugu horreysay ee wax-barashada dalka ka bilaabay. Sannadkii 1980 ayaa wuxuu jeclaystay in loo beddelo miyuusiyamka (Rugta Dhaqanka) ee Hargeysa, si uu reerkiisa ugu dhawaado. Wuxuu sidaa ka codsaday wasiirkii Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee xilligaas Axmed Ashkir Bootaan. Isna wuu ka diiday inuu ka aqbalo, isaga oo ku marmarsoonaya inaan Yuusuf xilkaas qaadi karin.

Waxaan la kulmay odaygii oo aad uga xun jawaabta kaga timi ninkaa wasiirka ahaa. Waxaan ka joojiyey warqad uu cadhadii rabay inuu u diro Maxamed Siyaad. Anigoo u sheegaya in isaga laftiisu yahay xuddunta mushkilladda. Waxaan u ballanqaaday in loo abaal-gudi doono maalinta dawlad xaq ihi dhalato.

Guclo been ah, gaalleef af-daran, gawdhis iyo duudsi  
Lib-gad iyo ammuur wada gurracan, geesi la illaawo  
Giddi xalay waxaan Yuusufoow, gurayey taariikhe.

Gedgeddoonka waayaha haddaan, gaar u  
falanqeeyey

Intii goob la soo maray intii, guluf la heenseeyey,  
Hadba goosh ha joogtee wixii, guulo laga keenay  
Dadku uma gudboonayn sidii, loogu hawl galaye.

Gambigiyo colaadaha hashii, rag isu keen gaysay  
Gilgilkii ka dhacay qaalintuu, galawgu dhiillaabay;  
Gidhligaannadii aawadeed, la isla gaadaayey

Hanqadhkiyo gariirkii markay, geesna qaban  
weydey;

Gaameeloleeyey markay, ololka googowsay  
Ee geel-jirii maali jirey, gogosha hayn waayey  
Gurmadvii ku kacay baad ahayd, “gii” da maataada’e.

Waxay geli-fardooddaba markii, la isku soo gaadhay  
Guryo-keente Maan-deeq intaad, gaydh u dirirteene  
Allaylehe abaal baw gasheen, gabiga Soomaale.

Waxse iyaba waa guul-darree, gorof ku maalaaya  
Oo aan Gobaad loogu tegin, gaalo-ka-hadheene;  
Adigiyo genkaagii halgamay, waa ka garanuuge.

Gorayey dad-weynuhu hashuu, gacan ku soo hooyey  
Gooraan nimaan raadin baa, gaawahaw sida’e.  
Waa taa candhadi giigsanayd, daysay godolkiye.  
Hays odhan wax gaaraa ku helay, garasha-dheeroowe  
Gasabkoodi may helin raggii, kula gudboonaaye.

Garab-saar-dabtii hore raggii, Ferenjigii gooyey  
Geestaa haddaan dhigo intii, hore u geeryootay  
Gabadannada waa kula qabaan, gaaggi soo hadhayee.

Gadoodkii Asayliyo Markaba, waa la gaasiraye  
Gurdankii Tog-dheer iyo la qari, Giib raggii dilaye.  
Axsaabtii gumaysiga nebcaayd, labadi geesoodba  
Gurrac bay u mariyaan waxay, goolal dhalayeene.

Hadba gobol ha faansheen intay, doc u gorgooraane  
Guntii waxa ah taariikhdu ma leh, baalal googo’ane.  
Meeshiyo Ganaaniyo ilaa, geliyadii Saylac

Gabi shicibku waw wada dhammaa,  
gayf-u-dirirkiie.

Gefka dhacay haddaad Yuusufoow, gama' la  
diidayso

Ayax guuray baa kaaga tegey, eelka gaamuraye;  
Galabtuu baxaayeey ahayd, dhab ugu googooye  
Nimankii ka gaashaaman laa, waanay garanayne.

Gaadiid ayuu kaaga tegey, lagu-ma-guuraane  
Gadh-wadeenna wuxu kaaga dhigay,  
garab-ku-daaqiie;

Geeddigi dharaartii la raray, gaadhi waa nolole  
Sidii bay u guud-saaran tahay, gibishu awrtiie.

Goor dhawse waxan maagganahay, nabar an  
gaystaaye

Mugga waan gadodee kolkaan, gamasta dhiiggeeyo,  
Een geed ku xidho booli-doon, goohu wuu damiye  
Ha degdegin gashaan kaa qabaa, waanan gudayaaye.

## 2.12 Run (1984)

Waxa runta la yidhaahdaa waa dhabbo miinaysan oo aan had-dana laga maarmin in la maro. Imminkadaa aynnu joogno bo-qollaal baa daraaddeed u xidhxidhan. Boqollaal kalena inay runta sheegeen keli ah ayaa loo deldelayaa. Maansadanuna iyada oo guud ahaan runta ka faalloonaysa, ayey haddana si gaar ah u taabanaysaa sidii taliskii Siyaad u necbaa.

Runcey lagu neceb;

Lagu rookee;

Layska kaa reeb;

Ristaad daaqdaba

Lagu raad-goob.

Fule kaa roor;

Ruxrux-doon iyo

Ra'iis daalin ah,

Midna kuma rabo.

Ninkii kuu roon

Dambi lagu raro,

Ribo iyo been

Loo rakaabsado,

Xabsi lagu rido

Rasaas lagu furo,

Raxantiisoo

Oodda loo rogo,

Oo ka-reeb iyo

Rajo laga dhigo,

Raxanraad iyo

Rafaad kugu muday.

Mase riiq-gabo

Nimaad Ruuneey

Raatubtiis tahay.

Rafiiqaaguna

Hadduu rubad-go'o,

Adaa rimmaneey

Raage kale dhala;

Ruud biraad tahay.

Aarka raanta leh

Ee ruqaansaday,

Adaw kala raray;

Oo rabbaaskiyo

Reenka ugu wacan.

In raqdaa wadhan

Rag la leeyahay,

Riddo-kululeey

Kuugu rixin waa.

Oo Riyaaloow

Hilbii Reexaan

Ruqsay kelidii;

Manuu raad-gadan.

Wuxu reemaba

Ruqruquuskiyo

Rudhmadiisii,

Rifrif-tuurkiyo

Rafad-dhabadkii,

Raamsigiisii

2.12. *RUN (1984)*

63

Dhegta raarici;  
Oo “rig”tii mood  
In rakaaddiyo  
Raaxo-dhaadhiga  
Reerku wada qabo.

Waa la raystiyo  
Rayidkuu dhacay  
Been ku raashimi.

Oo ribiishyada  
Ricirtuu naco

Risiq moodiyo,  
Eey rabbaysani

U raxleeyoo  
Madaxaw ruxe.

Kana raaride;  
Raaska oo nina

Ra'yigoo nina;  
Iyo raantiyo

Rabbiniimadii  
Fircoon lagu rogay.

Isna Reemaadh

Waa wax rubuc yare,

Nagu-raagtiyo

Rookarookada

Ku-rusheeda ah,

U riyaayoo

Rarrabtiisii

Raar dugsoon mood.

\* \* \*

Dhulku kula roor!  
Risiq lala cuno  
Run la qaawiyo,  
Ruux la garab dhigo  
Xaq la raadsado  
“Reebban!” buu yidhi.

Rasuul inu yahay  
Raxmaan soo direy  
Dadna wada rabo,  
Riddo iyo been  
Geli raadyaha;  
Ka riwaayadi  
Rakhiisnimo-hadal.

Reerka oo wadhan  
Raxmaad ugu baaq;  
Ruqday beeshii;  
Wax la rooraba  
Dadkuu rarankiyo  
Godkii lagu riday  
Uu ka soo raray,  
Ayu Raabboow  
Isna rubad-go’e,  
Rawax lama-dego  
Raasba meel furey.

Af-rambaadhsane  
Uga muu rayn.



2.12. *RUN (1984)*

65

Misna rucuskiyo  
Rucdiguu dhigay,  
Roobka gudhay saar.  
Mar riyaha maag  
Oo ku raad-gaday.

Isu-reemaha  
Rajalaha kulul  
Rimi waayiyo,  
Awrka raray hiif.  
Adhi-raacdana  
Rajci wada yidhi.

Marna raambaha  
Raaniyaashiyo  
Ranki baandhee.

Mar rugteennii  
Raygan kula xidid;  
Oo dhulkaba rahan.  
Marna Ruush aad  
Oo nin raaciyo  
Reer galbeed cay.

Mar quraan-ruug  
Raahib kelidii,  
Habeen rubuc hadhay  
Rabbi baqiihiis  
Rukuuc ugu jira;  
Oo Rashiidoow  
Ilaa ruuggiyo  
Rays-ma-gaadhada,

Ilmaduu rogay  
Isku wada raday  
Waran ruubsii.

Marna Riiraash  
Salaad raatub ah,  
Oo ruxruxashiyo  
Ka ah godob-reeb,  
Raalli-gelin iyo  
Riyo-wa-nifaaq  
Riyaad kula toos;  
Oo riyaalkii  
Nafta kula roor.

Marba si u reen;  
Marba si u rami.

Wuxu rooxada  
Rooxarooxada  
Ruxo taagtii,  
Oo ruxaan-ruxo  
Ruxmi weydoo,  
Laftii raaraco  
Ruugi kari waa.

\* \* \*

Adna Raandhiis  
Runta cabataay,  
'Beeni raad ma leh',  
Kaamanay rayn!  
Rayfalkeeduna

2.12. *RUN (1984)*

67

Waa rash aan dhicin;  
Iyo Ruuneey  
Riddo biigoo  
Yeeke lagu rogay.  
Nin rakaabsaday  
Rambas weeyaan.

Nin kastoo roga  
Nin kastoo rara  
Roob kastoo da'a,  
Raasa-maaleey,  
Raad hadhaad tahay,  
Rinji aan go'in!

Adna raray-yahaw!  
Jidku waa raran;  
Raysna waa weli;  
Jeer raxmaad da'o  
Oo rag kala baxo  
Ragaad waa ceeb;  
Raaxo waa maya.

## 2.13 Ergo (30/4/1992)

Sannadkii 1991 ayaan dalka dib ugu laabtay ka dib markaannu iska xorreynay “Faqaashii”. Waxaan wada maray magaaloyinka Berbera, Burco iyo Hargeysa, aniga oo ku faraxsan guulaha shicibku gaadhay. Hase ahaatee rayn-rayntaydii waqti dheer may qaadan. Markiiba waxaan ku war-helay in dagaallo sokeeye Burco ka bilaabmeen. Haddana waxaa ii xigtay Berbera ayaa la isku garaacayaa. Waxa intaa ii dheeraa wararka kale ee naxdinta leh ee Xamar iyo dhul kaleba igaga soo duul-duulayey. Waxaas oo dhagar ahna waxaa ka dambeeyey kooxo dano gaar ah iskaga hor-yimid; oo maslaxaddoodu gashay inay dadka isku dhuftaan. Aniga oo ka tiiraanyeysan dheg-xumida guud ahaan Soomaalida haysatay, ayaan kuwaan markaas dhex joogay maansadan kula hadlay.

Qul acuudu billaahi  
Idaajaa nasru-laahi;  
Arraxmaan iyo Qaaf iyo  
Alif-laam-ra sirteediyo  
Waxan maanta Alhaakum  
Ilhaamkawga bilaabay,  
Hadraawoow in dhawaydba  
Sidaydii ma ahaynoo;  
Waxaaneey nin arkaaya  
Waxan uunku u jeedinoo  
Kelidii anfariirsan.  
Waxaaneey nin arkaaya  
Maanka laagga ogsoonoyo,

Asaraarka dhex yaalla,  
Isha laacu u muuqdo.

Waxaaneey nin arkaaya  
Ummaddayda tasawdayee  
Usha loo qaban waayeyee,  
Anigayga biloowoo,  
Abwaankeedi ka seexdayee  
Wax-aqoonki tabaysa  
Af-weynoo laga reeyana  
Ujeeddawga dambaynnin.

Waxaaneey nin arkaaya  
Mar kastoo ayax guuro  
Inuu eel ka tagaayo;  
Weliba aad uga sii xunoo  
Libintayda af-duuba.

Waxaaneey nin arkaaya  
Ayaankaygi shin-dhaafayee  
Markii loo injirastay,  
Oomanoow daba-keenkiyo  
Isagoo ducanaaya,  
Dirqiga weysha ku ooftayoo,  
Idinkoon qof maqneeynnoo  
Indhihiinu shan yiin,  
Mar labaad ambanaaya.

Waxaaneey nin arkaaya  
Ula-jeeddo habawday;  
Ididdiilo hungawday  
Aayatiin kafad saaran.

Waxaaneey nin arkaaya  
Oodda geel laga qaaday  
Ugxaan taal gundihiisiyo  
Ayaan nool naxdin joogta.  
Aheey way iyo ciil!  
Ummalkayga “hiq” dayda!  
Calool-ooyga naftayda!  
Ilmadayga da’aysa!  
Imtixaanka i haysta!

Ma dhulkay ashtakeeyey?  
Ma cirkayga ajooday?  
Ma baddaygu ugaantay?  
Ma abdaanan lahayn?  
Ma dab baa igu oogan  
Anigu aan isku daarey?

Islaantii curadkeeda  
Markay eeydu cunaysay  
“Ax” dorraad odhan wayday,  
Kolkii ay arki wayday  
Wax gudooy ku illoowdo  
Noloshii inankeeda,  
Inay maanta u ooydo  
Inteday ku sugaysay.

Oori weerku ku raagayoo  
Geeridii odaygeedu  
Afaafkay ku bannaysay,  
Ninkii awdi lahaa  
Isagii fadhataystay,

2.13. *ERGO* (30/4/1992)

71

Yaanu eerso nidhaa?

Ninkii aasan yiqiinay  
Hadduu aarsaday maanta  
Ufanayskina guurey,  
Iyana wayga su'aale;  
Toloow yaa colka eegga,  
Loo abaabulayaa?

Toloow yaa ilma daydday  
Ummaddayda u loogay  
Ilmadoodii ka raystay.

Yaa u aano ah maanta,  
Utuntayda hallawday?  
Eebadayda ku fiqan  
Ayaantay kululaato,  
Kaan ku eeran lahaa.

Yaa u aano ah maanta  
Farta aammintay keebkiyo  
Birta layska aslaayiyo,  
Galkay diidday ableeydu?

Yaa u aano ah maanta  
Mar labaad ubadkeenna,  
Sidii eey la guhaadshay,  
In ilkaa lagu qaado?

Unugtii shalaytoole  
Isku meesha u jeedday  
Imminka yeyska hor-geeyey?

Laba ooryo-walaal iyo

Ilmaadeer is-muquunsha  
Lama sheegin adduunka'e,  
Marka aan ugu liito  
Mar aan eedda sokeeye  
Ilmahayga ku waayiyo,  
Mar aan aaye-la'aanta  
Seeddigay ugu aaro oo  
Walaashay asay qaaddo,  
Mar hadday aqalkayga  
Haddii layga adkaadiyo  
Haddaan raystay idhaahdaba  
Marlay oohin u tay,  
Bal maxaan istaafiday?  
Afartii gar-jahoodba  
Haddaan soo wada ooday,  
Xaggaan geela irmaan iyo  
Kolkay ooshu harraaddo  
U aroorinayaa?  
Saw anuu gacmahayga  
Kuma dhaabin ishii  
Berri loo irkan laa?  
Wixii aan ku if-waayey  
Kuna aakhiro-seegay  
Durba saw ma illaawin?  
Ubaxaan xinjirtaydiyo  
Ka abqaalay jidhkayga  
Kolkii aan is-awaadhay,  
Udaabtays iyo ciin iyo



Odax saw kama goosan?  
Hadduu geedki abaaday  
Kolkuu oomaba dhiigga  
Ubadka looga shubaayey,  
Saw ataar li'i maaha?  
Gadhloow awr kala guurtay  
La-arkee mar kaleeto  
Inay ool ku kulmaane,  
Hadduu uur kala guuro  
Saw ammuur culus maaha?  
Ololii halgankeenna  
Cukusoow arah-guulka  
Dhib waxaan u adkaystay,  
Waxa aan is-lahaa  
Mar uun baad arligaaga  
Iyadoon Faqash joogin  
Kula iidi dadkaagee,  
Kolkii waagu iftiimay  
Sidaanay Ina Dhoorree  
Usarkaan ka dhex toosay  
Indhahaw daranaa!  
Marka duul asal-guuro  
In Ilaah ka biyeeyo,  
Dadkoo yaalla abaar  
Haddii roob iba-dooxmay  
Ku bashiishto agtayda,  
Intaan soo ordayaabaa  
Darku sii engegaa!

Abuur baan ku tabcaa;  
Irfidaan geliyaa;  
Iniin baa ku ridaa;  
Udan bay bixisaa;  
“Gooso!” baan is-idhaa  
Waa la ii arfacaa!

Abley baan ramiyaa;  
Afeeyaa shirrabaa;  
Adhaxdaan is-jaraa;  
“Oogso!” baan is-idhaa  
Af-weyntaan u dhacaa.

*Afartaa shax dheh maanso;  
Afkaa laysku jagaaye  
Saw ma qaadin irmaan?*

Ambaqaadka kaleeto,  
Berigii isticmaarka  
Taladii la il-duufay  
Burbukaad aragteen iyo  
Hadday keentay inkaarta  
Aynnigaygu ku naaftay,  
Allanay tusi waayey  
Anna maanta gefkaygu  
Inuu aasayo miino  
Ubadkayga u taalla,  
Fardawseey ma arkaayo  
Rajadaad ulaneeysey  
Waxaan looga inaabsanoo;  
Haddii aad amakaagtay,

Sidaasaabad itaalka  
Ku ayaan badan-teeye,  
Aafo waa tan dambaysoo  
Ifafaalaha muuqdiyo  
Ishay leedahay maanta,  
Waxba yaan af-gobaadsane  
Intay doonto ha gaadho'e  
Aramaa qarxi doonta  
"Eedayeey" la yidhaahda oo;  
Dharaar baa iman doonta  
Haddaan Eebbahay caymin  
Afku uu hadal daayo.  
Dharaar baa iman doonta  
Dab munaafaq istaadhay,  
Sida aayar-gubtaa  
Ama duur olol taabtay  
Arligoo dhan dhammeeyo.  
Dharaar baa iman doonta  
Iyadooys wada wayday  
Oodda loo rogi doono.  
Dharaar baa iman doonta  
Imaaraadka sidooda  
Ninba aag ku go'doomo.  
Dharaar baa iman doonta  
Dadka Sool iyo Awdalee  
Aadanoow hakrateen,  
Raacdadoodu adkaato oo  
Lagu raadsho ilays.

Dharaar baa iman doonta  
Irsiqa laysku cidhiidhyo oo  
Wax la oonto la waayo.

Dharaar baa iman doonta  
Mujrim oogo madooboo  
Islaam sheeganayaa,  
Agab-laay hambadaada  
Isa sii kabo-raacsho.

Ku darsoo Axmed Doolloow  
Waxaaneey xog-ogaaloo  
Hir fog baan arkayaa;  
Orna waan maqlayaa;  
Waxna way urayaan;  
Amminna waan gabyayaa;  
Nin abwaanana waan oo  
Ereygiisu tuf leeyey.

Haddaydaan i addeecinoo  
Ergadaan ahay maanta  
Ka abaal-ka-dhacdaan,  
Ilaaheey ballankii  
Ibtilaa dhici doonta;  
Dhulkay Eeyro ku fooftona  
Afrikaan madmadoow iyo  
Ajnabaa degi doona;  
Iyagaa talin doona;  
Orgonkaad didiseen baa  
Dib idiin qabsan doona oo;  
Dharaar baa iman doonta

Engeg laysugu xiira oo,  
Heeco diidday ilmaa  
Qasab loo aqbalsiiyo.

Ciyawgaa alwanaayiyo  
Tukaa “uu”da hayaana  
Ways calool-og yihiinoo;  
Qaasinoow, abti, hee dheh!  
Galaw aammusi waayey,  
Haddii aan wax aqaanno  
Uma aawana beesha.

Daruuraa ibo-beeliyo  
Afaggaalaha naaftiyo  
Kolkaan moorada eegay,  
Laaxiggay ku aroortiyo  
Minka faalka inkiiskee  
Ku af-yeeshay ximruu,  
Haddaan eegga la baajin  
Waa sidoo abadaa.

Haddii aad addintaan oo  
Indhaha dhiig laga keeno,  
Idinkoon sidan dhaamin  
Inaad guul urisaanna  
Waa wax aan la arkaynnin.

*Afartaa shax dheh maanso*  
*Afkaa laysku jaqaaye*  
*Saw ma qaadin irmaan?*

Hadday heesi ab leeday

Ama loo oday-sheegto,  
 Ilaa Xaawiyo Aadan  
 Isir baan u lahaa.  
 Weligay abidkayna  
 Anoon jiiftada haadinoo  
 Isha aan ka dhammaynnin  
 Uummiyaa kuma soorin.

Imminkay wada leeday  
 Muu abwaan wax yidhaahdo'e,  
 Idahaaban diraacda  
 Sumalka loo oggolaanine  
 Haddaan aammusay waayo?

Qajeelaanse arooryo  
 Haddaan lays inkiraynnin,  
 Mankoo uunsaday deyr  
 Dhirtu ay arrad-beeshiyo,  
 Cadceed loo indho-kuulay  
 Ufo roob subaxeed  
 Araar kaaga sameeyey.

Qajeelaan hal-abuurka  
 Anigoo ka shufeer ah,  
 Afarraydu jug weeyee  
 Selef kuugu istaadhay.

Qajeelaa tix aroos ah  
 Satiyaal leh aleelyo  
 U afsaaray fiyaan  
 Qajeelaa sida iidda

2.13. *ERGO* (30/4/1992)

79

Iigu soo ururteenoo;  
Iyadood farihiina  
Arrafoo kale mooddo,  
Murtidaan odhan doono  
Rag u sii ulxiyaystay.

Intii aan kugu oomay  
Haddaan geed ooleeyo,  
Mar horuu ereygayga  
Haahay ballankii  
Ku ugbaadi lahaaye,  
'Oohow' dayda dadkayga  
Rabbi baa ka asheeday oo;

Wuxuun baa indha-buuxsha  
Nin adduunyo u haysta  
Ab-tirsiinana sheegta;  
Af-qalaadna yaqaana oo  
Isticmaarki la ceeshay.  
Aynigaan ahay oo dhan  
Wax aqoon ma bidaan,  
Maxaa aabbaday yeellay  
Siyaasaanu ahayn  
La shaqaystay Afweyne  
Ama gaalka ag joogayoo  
Afminshaarku barteen.

Aheey way iyo ciil!  
Umalkayga "hiq" dayda!  
Calool-ooyga naftayda!  
Ilmadayga da'aysa!

Imtixaanka i haysta!  
Anigays maqli waayey;  
Orod baa la i leeyey  
Oolna waw fahmayaa.  
Ayaamays gurayaana  
Waygu fool-adag yiin.  
Aheey way iyo ciil  
Aaminaay, magaceey ba'!  
Asaagayay igu wiirsay  
Inantaydu gumawday  
Ka irdhoobay shisheeye  
Ku eedoobay sokeeye  
Ehelkay ka qalooday  
Cidna aammini waayey.  
Ummul-dooxa Tog-dheer iyo  
Ragga Shiikh ku idlaaday  
Ee Aroori ku le'eday,  
Looma-ooyaha Saaxil  
Anigaa ku tol-beelay.  
Cidna eersanna maayo oo  
Inkaar baa igu biirtay  
Anigay isu gaystay.  
Dharaartii Alle keenana  
Ayni ii kordha mooyee  
Aqli iima siyaado.  
Mana waayo-arkaayo  
Wax kastood akhridaan.  
Waxaaneey Alle-doori



Seed dhanaani ku oolin.

Muddadaan il-darraana

Ayadoo soddon dhaaftay

Weli eelka salkiisiyo

“Uh”da boogta nin saafa oon

Mar uun “haakah” idhaahdo

Indhahayga ma saarin.

Addinka dhaawac ku yaallana

Haddaad oofa ka dhaydo,

Asbaroo wax ma dhaamo

In yar aad ku nafiifo.

Talana way ashiddawday;

Nin abbaaray la diid;

Nin abraarayna mooyi

Meelu beesha la aadi.

Arrin-keenna gabnaw

Aqbal-keen godliyaana

Arligii kuma noola.

Alif koow ku qalloocday

Alboqruu ku dhibaaye,

Mar horraan ka afeeftay

Af-weynoo laga reeyo

Inaan guushu ahayne;

Bidhaan baad aragteen

Baadidiini u eege,

Iyadii u qabtaane

Istiqlaalki Sitiinki

Onkodee di'i waayiyo  
Tanuna waysku itaaloo;  
Abshirtii waqlasheediyo  
Axankii tacsidedaa  
Isku maalin ahaa.

Af-laggaaddana maaha  
Haddaan maanta idhaahdo,  
Odayaashi la doortay  
Anigoon kala reebin  
Irbad dhuub gelin waaye;  
Iska daa wax kaleeto  
Ammna noo sugi waaye;  
Waxna aad uga liita  
Ilaah bay dili doonee  
Kuwa buuraha aaday.

Isku soo wada xoori oo  
Is-ma dhaanto dhasheed iyo  
Meeshu waa ulo miidhanoo  
Ul la qaato lahayn.

Arrin laysku khilaafay oo  
Ujeeddooyinka dhaw ah,  
Obocdeenni wadhnayd iyo  
Ictiraafkii maqnayd iyo  
Ku illaawi dan guud.

Abeesaa laga sheegay  
Markaan aadmiga firsho  
Aar-gudaan is-idhaa;  
Markaan Eebbe jalleecana

Awlaadsaan is-idhaaye,  
Waxaa eeg garan waaye  
Waxan eeg ka sokeeya.  
Rag hadduu is-af-dhaafo  
Aayatiinna wadaago,  
Afkaa laysku gartaaye  
Is-afwaajiya maaha;  
Isu soo ura maaha;  
Adigoo hebel diiddan  
Eryo reer hebel maaha;  
Is-ugaadhsada maaha;  
Udahaaga cun maaha;  
Isku soo wada duuboo  
Inqilaabna xal maaha;  
Anigaygu gudhaane  
Wax la eegto ka weyn.  
Anna waano ku xiiqay;  
Dharaartii alla keenana  
Abhis baan ku jiraa;  
Far baan boog ka ag dhaw  
Ka ilaalinayaayoo;  
Hebellaysu uraaya oo  
Ananaw rahmanay baan,  
Weli maynnu adkaane  
Inoo aayara leeyey.  
Mudacyaan afafkooda  
Anigoo leh gariirto  
Isku aadinayaa

Arji baan dirayaa;  
 Aleen baan ruxayaa  
 Geneyoow dhega awdan  
 Irridaa ku tumaaya;  
 Sidaasanan adduunku  
 Bal inaan ahay liid  
 Anigoo gudo aawan  
 Hay aqoonsado leeyey,  
 Waxaan fool-eryayaa  
 Hal aan awr ku salaaxinoo;  
 Is-moogtii wax ma dhaamo  
 Iyadoo la dalaagay  
 Weli haanta aslaysay.

*Afartaa shax dheh maanso*  
*Afkaa laysku jaqaaye*  
*Saw ma qaadin irmaan?*

Nin raggii ereygiisana  
 Astaan buu ku dhigtaaye,  
 Rabbaw eex ma tiraabine  
 Aqoon haygu cadaabin.

Ambaqaadka kaleeto;  
 Ishaa maanta bidhiiqdiyo  
 Ogoobeey libintaydana  
 Rag baw haysta ilaaqe,  
 Hodaneey marna aabbo  
 “Axa-yaa-waddanii” iyo  
 Axsaan layguma siinnin.  
 Halyey-yaa ku idlaaday;

2.13. *ERGO (30/4/1992)*

85

Ubad baw luga-beelay;  
Adduun baa ku dhammaaday;  
Qabar baa ka adeegay.

Anigaa rag u liita oo  
Ooridayda siddeed gu'  
Kama soo ag-wareegin.

Innagoo kala daadsan  
Nin iddiisa u qooqay  
Cirkuu roob ku og-yeeye,  
Awaydii qudhahaydeen  
Aawadeed ku god-seegay  
Awgayow taladayda  
Ku addaadurin maayo.

Ilaahay ka sokoowna  
Annakaa leh awoodda;  
Oggolana-ma-doonno  
Intuu taago unuunka  
Nin yidhaahda anaa ah;  
Af-weynaannu ka diidnay.

Nin kastoo anafooda  
Nin kastoo laba-eefa  
Nin kastoo is-afuufa  
Annakaa ka shanayna.

Lays amaahinna maayo  
Axmed-weyso-caddaw  
Ciddidaa uskaggeeda;  
Ha ogaado nin moogi.

Mar nimaan u il-duufay  
Mar labaadka Ilwaad  
U ardaa dhigan maayo.  
Nin intuu axdi qaaday  
Oofin waayeyna daa.  
Ololii lagu naaftay  
Kuwii uubta qodaayeyee  
Iblayskii ku ladhnaa  
Iyagu way garcadeen.  
Anna xaasha nin iin leh  
Wax inaan ku idhaahdo  
Uma quudho afkayga.  
“Uf” qabiilka anaa leh;  
Wuxuun baa ku adeegta  
Nin iskii kartidiisa,  
Isagoon cid ku tiirsan  
Isu taagi karaynnin;  
Una haysta ateero  
Ayaantuu dambi geysto  
Laga hoos galo eedda.  
Ayid waad is-xigtaan iyo  
Idinkaa isku reer iyo,  
Aqligii Lixdankii  
Maanta iib geli maayo.  
Sidaan aamminsanaynna  
Wuxuun baa ehelkii ah,  
Abkuu doona ha sheegto’e  
Dadka kaan af-aqaanee

Si wax ii la arkaaya ay  
Na midayso ujeeddo.

Waxaan laysku ogayn  
Ninkii hoos ka unkaana  
Aftidayda ma haysta oo  
Ansax maaha wixiisu.

Arligaynnu ku noolee  
Beryaa qaar u ekaa  
“Irama daatil-cimaaddii”  
Aayadaa lagu sheegay,  
Awaaraa ka kacaayiyo  
Ninka maanta ortiisiyo  
Oohintiisa maqlaaya ee  
Ka adkaystay gob maaha.

Arliyooyna “hiq” daadiyo  
Orgigii la shidhaystay  
Uubataysku ka weyne,  
Innakoo xalay baad-le  
U eegaynay hillaaca,  
Waxa awrta xidhiidhsan  
Loola aadayo baas-le  
Wax baa nooga iftiimay.

Dibna loo igman maayo  
Nin ishaafalataysta oo;  
Isagooy nala jooga  
Arwaaxdiisu “Walaayiyo”  
“Idaa-fayta” ku nooshoo,  
Ilinaw dabanteeyoo

Abidkiiba karreeb ahoo  
Dhulka aan wax ka oolin.

Rabbi baana na uuntayoo  
Annana taag uma haynno  
Ayaan-nool hirdi joogta oo;  
Markay kooxi orgootaba  
Ma asooli karayno'e,  
Abaal baan ku qabnaaye  
Ammaan uun ma hellaa?

*Afartaa shax dheh maanso*  
*Afkaa laysku jagaaye*  
*Saw ma qaadin irmaan?*

Sidaasaanan itaalka  
Ku asluubsanayaayoo,  
Wixii aan odhan laaba  
Mar aan maanta ahayn iyo  
Ar-dambaw dhigo leeyey.

Waxsaa buu Alle keenay  
Waxaan loo adyadooninoo,  
Aayaheennuba maanta  
Ilig liiq-liqanaayiyo  
Indhal buu sudhan-yeeyoo.

Sida xaal u eg-yey  
Ama waynnu adkaanoo  
Wax jireynnu ahaan,  
Ama waynnu idlaanoo  
Dib laynoo arki maayo'e.



2.13. ERGO (30/4/1992)

89

Iyadoo wada saaran  
Ummaddeennuba doonni  
Ku asqoowday bad-weyn oo,  
Injinkii ka duqooyay  
Ayaa-reer-hebelaay  
Afka waygala weyntee,  
Haddii aad aqli leeday  
Agoontaa loxoskaa  
Horta ood u yegleel.

Ubbadaasi jabaysa een  
U uus-miirtay darteed,  
Dib waxay ka ahaataba  
Ishii cawri taqaan iyo

Ka ilaali wed mooyee,  
Wax kaleeto illoow!

Asalkeeda bannaanna  
Maalinteey il-xun-tay bay  
Ilaah caymiya leedee,  
Markaad xeelli ammaan ah  
Kula eeratid beesha eed  
Aammusiiso rasaasta,  
Waxa aad ulanayso  
Annakaaba ku siine,  
Innagoo sidan dhaanniyo  
Adeeroow gacalloow,  
Ayaanteeda ha gaadho!  
Hadduu Eebbe yidhaahdo,  
Luga aan isku taagno.

## 2.14 Daba-taxan (5/1/1997)

Dagaalkii sokeeye ee uu Abwaanku ka digayey, wixii uu sheegay iyo wax ka sii daran ayaa dhacay; afkii baa hadal daayey. Burco, Berbera iyo Hargeysa ayaa dagaal sokeeye ka dhacay. Wakhtigaas dagaalku dhacay wuxuu Abwaanku ku maqnaa Afrikada Galbeed. Kuwii uu ka digayey ee danta gaarka ah lahaa ayaa dagaalkii horkacay. Dadkii ayaa dabka la saaray oo wixii looga digayey ayaa ku dhacay. Dabadeedna nabadayn iyo in la dhex galo ayaa bilaabmay. Mar haddii abwaanka ergonimadiisii dheg loo jalaqsiin waayey, dabkii uu ka digayeyna lagu dhacay, wuxuu bilaabay bal intuu nabadeeyo, dabadeedna wuxuu tiriyeey tixdan hoose ee *Dabataran*. Sida ka muuqata magaca tixdana waxa abwaanku ina tusaalaynayaa in dhibku weligiiba soo taxnaa. Waxay la hadlaysaa shacabka oo leedahay hebel iyo reer hebel mushkiladdu ma taagna, ee wax ma noqonnaa mise dib baynu u noqonnaa? Wuxuuna ku bilaabay sidan:

Haddaan gabay dan uga baxo

Ama dhaafo dooyada

Dacar igu hulaaqdiyo

Qalin-daar ma waayee

Maantana Abdeeqow,

Wax i “dubuq” yidhaa jira.

Duulka aan u naqayana

Dhedaa saaran lagu dedey.

Dabbaalnimana kama aha

Dagan maahsanaantiyo

Wixii laga dagaallamay

Wax u dooriyaan jirin.

Anigana dac-gudhantii

Gacmahaygu diirmoo

Weli dowliskaygii

Dirri buu ku dhacayaa.

Dalcadduna ma dheeree

Nimaan kaba dareen qabin

Inuu dayn ka maqan yahay,

Ayaan doono lagu karin.

Wax u diiddan baa jira

Faraskana durduradee

Haddaan talada lagu darin,

Inuu duulimaad galo

Ama orodka deeddamo

Doollaal ha eegina.

Dun baa meel ka xidhan weli

Goldalooladiinnuna

Door bay ku leedahay.

Digdig iyo mutuhis iyo

Dul-ka-xaadis mooyee

Bal si daawo loo helo

Darsa eelka lama odhan.

Danni baana igu jira

Inaan hoosba loo deyin

Sengaa daalay meeshuu

Ka damqaayo heensuhu

Ama dhaqanka dabatadu

Ka dabraaya qarankii  
Shalay doolka ugu yimi.

Dillaacuna wuxuu fiday  
Markii looga sii daray,  
Ee cudur darmaan galay  
Laga gubey dameeraha.

Dulucdeedu waxay tahay;  
Dawga aada Boorama  
Kuma geeyo Daafeed.

Xeerkiyo dastuurkii  
Loo dejaana kuma fulo  
Ummad aan dambi aqoon.

Anna shalay, Sandoonow!  
Dadka maan habaarine  
Dayro hore sed kama foga  
Deeqna waa u dhowdee,  
Dubaax loo kor dhigay ciid  
Doqon baan u garan hiil.

Degel ba'ay nin yiil shalay  
Oo digo-gub sahansaday  
Maantana diyaar u ah  
Lama-dego in loo raro  
Oo nolol ka deel wadhay  
Nin dabiib la leeyahay  
Dhiig ku duuli maayee,  
Dardartii haddaan dhimay  
Wax i daaray baa jira.

Ilmihii dammiin ihi;  
Iska daa abwaanoo  
Wuxuu diiqad geliyaa  
Habartiisii dihaatee,  
Diiwaannadaydii  
Haddaan duubtay yeelkay.

Inaan dararo maantana  
Xil baa igu dirqiyayee,  
In aan deexdo maan rabin;  
Deelley mudduciyo  
Ciddii ay dacweyn layd  
Noo ducee la leeyahay.

Inta xadhig la diirtee  
Midba derejo leeyahay  
Dabar iyo mareeg iyo  
Daba-gelis ma noqon karo.

Dulucdeedu waxay tahay;  
Mar haddaad is dubateen  
Aniguna danjire ahay  
Wixii uu ka digay dhacay

Oo duudka laga jabay,  
Intii aan ku digan laa  
Beelahan dabsaarka ah  
Ama ciil is dabi laa,  
Dan baan mooday keligay  
Inaan dibinta ruugoo  
Dibaddaan u suudalay.

Afartaa dheh, “Deelleey!”

Dig siiyee ku soo noqo  
Demmenaha warkiisii.

Raggu waa is dili jirey  
Dibna wuu u kaban jiray  
Duubiguu ka naaftee,  
Weli dunida lama arag  
Cudur aan dawo lahayn  
Doqonniimo mooyee.

Naas dumar mid kee buu  
Horraad iyo dambeed yahay  
Isku moora duugtee,  
Bal hadduu dirkaba yahay,  
Wixii dhacay ma daw baa?

Nimaan ul iyo diir nahay  
Oo dareen na kala galay  
Ama daad na kala xidhay  
U dabaalo mooyee,  
Ma dariiq kalaa furan?

Inkastooy dakano timi  
Dubka iigu yaal baa  
Ii dubaaxinaayoo,  
Inuu ii darsanayana  
Daah igama saarnoo  
Anigaba docdiisii,  
Dabayl bayga haysee,  
Walaalkay hadduu diday,  
Naag duddaa la celiyaa  
Amba maan ka daba tago.

Dadka geelba sibir godan  
Dembi looma saaree  
Nin dembi lihi hadduu jiro  
Oo daanta kale yahay  
Boqollaal ka daran baan  
Aniguba ku dayrree,  
“Dibso!” maan idhaahdoo  
Dabadhoonka geel iyo  
Dabadeed la soo hadho  
Dhallintiyo duqaytida  
Inta daacaddee badan  
Diinaari oo kale.  
Dulucdeedu waxay tahay;  
Isku duubni baa shalay  
Lagu daabay gudintee,  
Dhilataye maxaa dan ah?  
Afartaa dheh, “Deelleey!”  
Dig siiyee ku soo noqo,  
Hebellada dulsarka ah.  
Waxa daaf bogsiin kara  
Ninkii dooxa eelkee,  
Dilka waxa balaysimay  
Dulmigii la kowsaday  
Calankaa deldelayoo  
Qarankuna ku dumay shalay.  
Ku darsoo xorriyaddii,  
Kooxdii af-duubtay  
Keligood u dihintoo,

Lama arag gu' da'ayoo  
Anigiyo doc wadhatada  
Dushayada ku hooree,  
Durbaduu curtaa baa  
Gees loo duwaayoo  
Dabadeedna mooyaan  
Meel uu ku dactal dhabo.

Dulucdeedu waxay tahay;  
Sidii gaalka loo diray  
Ragga rag ah daruuraha  
Dabayshaa u rimisee,  
Xaggayaga dudduuc iyo  
Ducashay ku fooshaan.

Wixii dalag ka beermana  
Waxa loogu daw galay  
Diir aan hanbayn iyo  
Ayx daba-ka-yaab qaba  
Oo gaws-dambeedyada  
Dufankaw basaasiyo  
Dalqadooda mooyee  
Ninnaba u danaynnayn.

Mana laha dadweynuhu  
Daribtays la dhacayaan  
Nin sidaa u daya oo,  
Duqii qabay islaantaa  
Nagu sii dardaroo  
Iyagaa hilibaha duban  
Da' yar oo ku korayee



2.14. DABA-TAXAN (5/1/1997)

97

“Ha loo daysto” lagu yidhi.

Deegaanba awr baa  
Ku kor doobinaayoo,  
Waxay daawadaan hebel  
Lagu yidhi dartiin baa  
Duubka loogu xidhayoo,  
La yidhaahdo, “Kama-dege”;  
Durbaan bay u tumayaan  
Intuu dooddiyaayoo  
Hadday cidi danqaabtana  
Dirir bay ka xigayaan;  
Nin daardaari kara ma leh;  
Marka uu duryaa baa  
Laga daba qufacayaa.

Dadna waa hangoolkii  
Maalin cidi dan leedahay,  
Dalmarow la tabi jirey.

Maantana deyaankiyo  
Digta kuu baxaysaa  
Dushayday ku dhacayaan;  
Dulin iyo qaniin baa  
Igu deeddamaayoo  
Dalooshuu is leeyahay  
Ninba meesha ugu dagan  
Ee dubkayga tuubbada  
Degdeg looga sudhan karo.

Mana digigixoodoo  
Duumadii qabiilkiyo

Maan-dooriyaa jira  
Dedanaha sidayda ah  
Damqashada ka bi'iyoo  
Diciif loogu talo-galay.  
Dulucdeedu waxay tahay;  
Halkuu duro qaniinyada  
Doolli baa afuufee,  
Duurxulkaa igaga kulul  
Daannada i gaadhoo,  
Cudurdaar waxaa jira  
Dakharkaad qabtee hore  
Cay kungu sii dara.  
Afartaa dheh, "Deelleey!"  
Dig siiyee ku soo noqo  
Demmenaha warkiisii  
Dadka waxa ka soo dhacay  
Duruustii la barayoo,  
Daarihii burburay shalay  
Waxa maanta kaga daran  
Iimaan darnaantiyo  
Nabaad-guurka diintiyo  
Kaga dhacay damiirkoo  
Dal waxaan ku noolahay  
Saddexdii dalaagood  
Lagu furay dadnimadii.  
Dal waxaan ku noolahay  
Runtu arag darraysoo  
"Daaddihi!" la yidhi been.

Hadday dunida ceeb tahay  
Dus-duskiyo khiyaamadu,  
Noo dabeecad weeyaan.

Nin dillaala mooyee,  
Degmadaan ku noolahay  
Nin “daryeel” yidhaahdaa,  
Dulli buu ka qoran yahay.

Hebel laga ducaystiyo  
Mana laha nin dooroo  
Dayaxii u soo baxa,  
Daamur baa la mariyaa.

Mooralkaana laga dilay  
Danabyadii u kici laa,  
Markii geela loo diray  
Ninkii maqasha daayacay.

Ardayguna dedaalkiyo  
Dugsigii hadduu gabay  
Dilluu meel ka haystaa;  
Waxaan daah ka saarrayn  
Isagoon diktoor noqon  
Inuu derejo tolan karo.  
Oo doollar heli karo  
Ama dayday noqon karo  
Dabalaab ka xoogsada.

Hadday dunidu ceeb tahay  
Dulmi loo badheedhaa  
Dalkayaga ma libiqsado.

Nin kastoo dakano galay  
Qoluu dabada geliyoo  
Denbi dhacay mas'uul ma leh.  
Markaad hebel duqaysaa,  
Reer hebel damqanayaan.

Ninkii dood ka keenana  
Dicaayado raqiis iyo  
Waxaa lagu didsanayaa  
Cid baa kaa dambaysoo,  
Ninkii dooxi kara boog  
Looma waayo daabaqad  
Iyo qaar la daba gala.

Dunbuqayga hayska leh  
Waxa loo dudduwayaa  
Inuu yoolka dactal maro  
Anna waan dhug daranahay.

Ninkii daynka iga qabay  
Indhahaan ku deyi laa  
Waxa aan u dabayaa  
Mid sidayda dulugle ah.

Dab baan huri is leeyahay  
Daadna waan ku furayaa  
Markaan dami is idhaahdana  
Gaas baan ku darayaa.

Daratiyo kud iyo caal  
Kala dooro mooyee,  
Marna waxa dubuurta ah

2.14. DABA-TAXAN (5/1/1997)

101

Ma idhaa ka digo rogo.

Deggenaanna uma dhalan  
Dubbahaygu soo maqan  
Lagu sii dareemoo,  
Jeer dakharku igu dhaco  
Kama sii digniin helo.

Darayana Allaa baday  
Xaynta ii dareertoo  
Intaan Daawad lala tegin  
Uma baran daryeellee  
Digdigtaan ku fiicnahay  
Markay dhacanto dabadeed  
Lagu baadi dooniyo,  
Dugayeyda dhiillada.

Belo daaman-qabasho leh  
“Daba qabo” nin yidhi baa  
Ragna ugu aqoon daran.

Dulucdeedu waxay tahay;  
Nacas hadalku kuma duxo  
Doobir iyo nasiib badan  
Oo shil Eebbe uga digey  
Mooday inuu dedaal iyo  
Dardartiisa kaga baxay.

Afartaa dheh, “Deelleey!”  
Dig siiyee ku soo noqo  
Taladii lagaa deday.

Dhabaq dooday baa yidhi:

Damcad lama wadaagee  
Dano aan ku qabo baan  
Dacarta uga guud baxay.

Anna waxaan ku dabo karay  
Nimaad hal isku diiddeen  
Dab cas lagama bixiyee  
Ku dar talada weligaa  
Docaa idin mideeyee.

Sida geel dar loo horay  
Iska daba rakaataa  
Dimuqraadi lagu yee,  
Dermo harag sakaaroo  
Isu daysta mooyee  
Is dul buuxsha laga wacan.

Cod nimaan ku diri karo  
Col haddaan u soo dumo  
Waxuun bay u daran tahay  
Ka dambaan halkiisii  
In la doorto jecelahay.

Nin ku yidhi i daw mari  
Duudsiguu tirsanayoo  
Laga daaya mooyee  
Wixii kaleba doog iyo  
Dacar bay ku huriyaan.

Jirka deyrta hooriyo  
Dirirrada gu'gii baa  
Dunidaw sinnaynoo,

Cadli baa wax doojee  
Wax kaloo rag deeqoo  
Dadka lagaga eed baxo  
Nin u doonay heliwaan.

Markuu buuxay doobigu  
Nin danaystey keligii  
Markuu daatay kula dhimo  
Dhego uma daloolaan.

Nin dariiq xarriiqdaa  
Garan kara dayowdee  
Dhidarkii ku kacay danab  
Doc kastaaba waw toos.

Nin dhegaa dabooshoo  
Indhaa duubtay maqal iyo  
Ma dareemo muuqaal.

Nin wax diiday oon wadin  
Wax kaluu ka door biday  
Wuxuu doonayaan jirin.

Degta qaran badh lagu sido  
Badhna reerka soo degay  
Yahay reerka daba yaal,  
Hadduu kaaga jiro damac  
Mid horaa ku dumay shalay.

Dulucdeedu waxay tahay;  
Intaad Deylo qalataan  
Inaad daraar ka maashaan  
Dubaaqay ka weyntee,

Dadkaygaw mid soo gala!  
Afartaa dheh, “Deelleey!”  
Dig siiyee ku soo noqo,  
Duulkan soo gadaal baxay.

Shalay daalinkaan riday  
Dal baabu xukumayee,  
Qaar daaqi xoolaha  
Dekeddiyo madaarkii  
Iyo dawladnimadii  
Sarriftaa ka daba yimi;  
Oo sida dawaarlaha  
Ninba dhan u dillaacsaday  
Degmedii ciddiisoo  
Keligii ka diiq yahay,  
Dabna wuu ku haystaa  
Iyo dayday tababbaran,  
Dakhli baa ka soo gala  
Deriskana wax kuma falo.

Dhego ma leh war kama dego  
Indho ma leh wax lagu dayo  
Nabaddana dan kama laha.

Maydna way dul yaallaa  
Aan duug is leeyahay;  
Inuu igu dilaacana  
Haddaan daaho la arkee.

Cudurkuna ka doco weyn  
Dallacaad la bixiyiyo



Halka laga dayaayoo,  
Dufan-jecel la koriyoo  
Ka da' weyn dhibaataadu  
Duro iyo Dhegdheer iyo  
Diin baa god goray galay  
Goray baa god diin galay  
Iska daba wareeggiyo  
Hebello isu duur-xula.

Dulucdeedu waxay tahay;  
Nin dawee la leeyahay  
Denbi uu badh leeyahay,  
Xalka doon la leeyahay  
Isaguu u daran yoo,  
Inuu daaro ma oggola  
Daarraanta mililka leh,  
Anna dayso ma oggoli  
Deebaaqda igu mudan.

Talaa maanta ii daran  
Talo duug ka hadhi karo  
Oo dalabta lagu saxo.  
Talo aan la duri karin  
Talo aan dib loo arag  
Hebella isu dooddiya  
Oo shicibka dala'sada.

Waxaa maanta ii daran  
Horta Nabadda doocaan  
Nabad loo diyaar yahay;  
Nabad diradiraaliyo

Nin dan lihi ku quustaan;  
Nabad weysla daallee  
Degganaansho lagu helo.

Waxa maanta ii daran  
Inaan daaro ololkii  
Ragga iga danbeeyaa  
Ninba dogob kor dhigi laa.

Waxa maanta ii daran  
Qaran haga dadweynaha;  
Qaran damal sidiisii  
Noo dallaalimeeyoo  
Soo taabta darafyada;  
Qaran aan dir-sooc jirin  
Qaran aan ahayn dulin  
Nabad-doonka beeshiyo.  
Raacatada dulsaar ku ah;  
Qaran aan dirsada oo  
Anigaysku kay dirin;  
Qaran iigu soo dara  
Aan iiga sii darin;  
Qaran gudaha daafaca  
Dibeddana aqoonsi leh.

Isku soo dabaal oo  
Waxaan doonayaa qaran  
Qaran dhaama kii dumay.  
Dulucdeedu waxay tahay;  
Diiri waa matoorkii  
Dabka laga filaayee

Doorkan waxaan hubsanayaa,  
Inuu leeyay daynabo.

Afartaa dheh, “Deelleey!”  
Dig siiyee ku soo noqo  
Ragga doorashada raba.

Ninka deyrtan maanta ah  
U darraystay madaxnimo  
Uba diidi maynnee,  
Horta mee dadkii iyo  
Dalkii uu xukumi laa?

Nin la yidhi na daadihi  
Haddii layska dabo galo  
Oon doohba cidi odhan  
Damac waayi maayee,  
Maxaa ii dammaanad ah  
Haddaan Dahabo bixiyaba,  
Inaan lagu durdurinayn?

Maxaa ii dammaanad ah  
Damman wayska huruddaa  
Xeerkii loo dejinayyo  
Inaan qalinka lagu dagin?

Maxaa ii dammaanad ah  
In dastuurka qiil jiro  
Markay damacdo lagu furo?

Maxaa ii dammaanad ah  
Nin doonaa ha mehershee  
Inuu daacad yahayoo

Ajeenda u dahsoonayn?

Maxaa ii dammaanad ah  
Qaran dumay inuu yahay  
Nin daluun ka bixin kara?

Maxaa ii dammaanad ah  
Dabka inuu ka dhigi karo  
Dabatadu ka siman tahay?

Ma deggena badweyntuye,  
Maxaa ii dammaanad ah  
Duufaan hadduu kaco  
Inuu doonni noqon karo,  
Seebab lagu dabaasho leh?

Calankaan dorraad helay  
Dafo igala booddaa  
Kula maqan Dagaara e  
Ninka doobta ridayaa  
Sida haad ma duulaa?

Dulucdeedu waxay tahay;  
Midho daray haddaan beri  
Duudduub ku liqi jirey  
Doorkan waxaan habsanayaa  
Dirxi inuu ku hoos jiro.

Afartaa dheh, “Deelleey!”  
Dig siiyee ku soo noqo  
Digniintaan ku siin jirey.

Dayo iyo sabeennaha  
Daawo kama dhexaysee,

Haddii loogu daw-galay  
Inaan dacawga weeraro  
Malaa waxa ka door roon  
Inaan doqonka eersado  
Duunyada ku aamminay.

Ninka daabaddiisii  
Duur-joogta aan geyin  
U maxlalay dan kama lihi;  
Waxsaan dood ka leeyahay,  
Dhashooduu dafirayee,  
Waxba yuu dirkood-ba'a  
Dameeraha ku hiifine,  
Geenyaduu ku daray baa  
Dihatee ha eersado  
Darmaantiisa hebedka ah,  
Een daayin abidkeed  
Baqal dugul madow oo  
Daba-keena mooyee  
Da'na aan wax khayr qaba  
Hoosteeda laga deyin.

Dulucdeedu waxay tahay;  
Ha ka uriso meel daran  
Hal diiddani maqaarkee,  
Dacarow, waxaa run ah  
Hadday riya dub leedahay  
Dabaday ku qarin layd  
Dadna barasho uma hadhin!

Maantana deyaankiyo

Ha ka doonnin meel dheer  
Digta kuu baxaysee,  
Kala-daadsanaantiyo  
Habkii duunyo dhaqatada  
Iyo kala-dambayntii  
Lagu dayan lahaabaa  
Isku kay dul haystoo  
Jeer oo dad aan helo  
Dawladnimada hanan kara,  
Daw baan u leeyahay  
Inaan dabada giijee,  
Kuumaan dardaarwerin  
Kuuna dayrin maayee  
Wuxuun baan ka digayaa  
Inaanu u daruurayn  
Cirka aad inuu da'o  
Ku ducee i leedahay.

## 2.15 Sidaasaa La Ahaa (28/10/1979)

Waa dabbaaldeggii sannadguuradii tobnaad kolkii saraakiil ka tirsan ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed, 21.10.1969, xukunkii iyo awooddii waddanka gacmaha ku dhigeen oo la wareegeen. Talisku waa u ‘damaashaadkii guulaha Oktoobar’, dalkuse waxaa soo wajahay marxalad cusub oo culus iyo bilowgii burburka iyo dagaallada sokeeye. Geeraarku sawir cad ayay ka bixinaysaa xaaladdii uu xilligaas qaranku ku jirey, ha noqoto xag bulsho, dhaqaale iyo siyaasad intaba.

Xalay baan saqbadhkii  
Dadkoo geeddi ku soogan  
Sardhadii ku riyooday.

Nin baa siidhi tumaayay,  
Suuldhabaale horseed iyo  
“Soo kacaay!” iyo hiif iyo  
Canaan baa soconaysay.

Dumar baa sawaxmaayay,  
Sulub baa ololaysay,  
Awr la saaray rarkii baa  
Sannaadhkoodu baxaayay,  
Ubad baa seelaayay,  
Soobir baa qarqaraayay,  
Dabayl baa sanqadhaysay.

Dadku waa sillanaa  
Sakatay ku jireen  
Gaadiid-qaad lama siin

Safrad baa lala toosay,  
Surmi baa la ahaa  
So'du way ka fogeyd,  
Socodkaa ku adkaa  
Safan baa cedhibgooysey.

Suudi wuu jirranaa,  
Siraad way arradnayd,  
Garayskay isku soohday  
Siddahaa u go'aayay,  
Waxna way saninaysay  
Geyaankay ka sasaysay  
Horaadkay sasabaysay  
Sidii wiil yar sabaysay,  
"Seexo!" ay ku lahayd,  
Isna saakimiwaa  
Sir hoosaanu lahayne  
Hadba wuu sanqanaayay  
Maradaa ka siqaysay.

Sidaasaa la ahaa,  
Beeshu waa sunsumaysay  
Sengaa qaar eryayeen,  
Qaarna way siqayeen  
Siigaday ku hafteen.

Nin baa saan u tumaayay  
Sabo uu ku furaayo,  
Halkuu saacu ku yaallo  
In qaniin ka sokeeyo  
Midna muu sixihayn,



2.15. SIDAASAA LA AHAA (28/10/1979)

113

Seetaduu iska goostay.  
Su'aal muu oggolayn  
Sumal baa hor ordaayay  
Baadisoo ci ku ool  
Hadba soof u gelaayay.

Dadkii baa ku sulaaqmay,  
Dhashii baa surbacaadday,  
Salkaa loo dhigiwaayay  
Sahankaa ka xumaaday,  
Sacadkay barkadeen,  
Samir bay cuskadeen.

Alle sawrac xumaa  
Silloonnaa kasmadoodu,  
Mar uun may siqsiqaan,  
Saamigaaga la boobay  
Haddaan soodh la adeegsan,  
Baryo yaa isku siiya?

Jeeroo siigga cadhaysan  
Laga saaro ugaadha  
Ama beesha sadhaysan  
Sahankeedi yimaado,  
Hashu wayska siddaaye,  
Maxaa loo sidkayaa?

## Cutub 3

### Guluf

Siddeed tixood oo ka faalloonaaya halgankii hubaysnaa ee lagala hortagay taliskii naxariista darraa ee Siyaad Barre.

### 3.1 Keena-diid (7/9/1989)

Xabbaddii Waqooyiga ka bilaabantay 1988 ayaa gobollada oo dhan ku baahday 1989. Waxa laga kacay gobollada dhexe, Jubbada Hoose, Muqdisho iyo meelo kale. Ummaddii la iska hor-keeni jirey ayaa garbo-siman noqotay. Dabkii baa carriga wada gaadhay. Kolkaas buu keligii-taliyihii go'aansaday inuu mucaaridka hadal u furo. Adduun! Hadda waa nimankii uu "afarta injirta leh" odhan jirey. Maansadan *Keena-diid* waxa dulucdeedu tahay inaan wax wada-hadal ah ama dib-u-heshiisiin ah oo suurto-gelayaa jirin. Waxay dalbanaysaa in laba mid la soo galo: in xukunka la iska dhiibo iyo dirirtu sii socoto.

Maansada dab baa laga helaa, duraha jiilaale  
Dareenkiyo waxaa lagu shidaa, daacaddoo qudha'e;  
Niman baa dubaalado macmaca, olol dugsoonayne  
Mar haddaanay daynabo lahayn, diirsimaad  
ma lehe.

Baqal waa dameer waana faras, daawashada guude  
Isagoo dirkaba shaabbahuu, dooca gaar yahaye;  
Geenyada nin doonaaba koray, looma awr-dayine.

Daridiyo Hadraawoow naxwaha, laaxinkaa dila'e  
Kuma daro ninkii fara yaqaan, ararta deel-qaafe  
Dhegtaa diidda meeshay xarfuhu, dalab ku  
yeeshaane.

Ragga laga dambeeyee murtida, daajiyaan ahaye  
Dadku waa u weysaysan jirey, Deelleysaan furaye;  
An daleeyo caawana miday, hadal ku daayaane  
Dawi Ina Gurraasoow safruhu, Dubay ha geeyeene.

\* \* \*

Kuwa samaha inay doonayaan, dunida gaadhsiiyey  
 Dar kaloon aqoon bay wiglada, ula dan leeyiine  
 Mindhaa Daado iigama fadhiyin, dib-u-heshiisiine;  
 Hadday nabadi doocaan ahayd, laysu dacareeye.

Waxa lala dardaarmaa qofkii, wax u dambeeyaane  
 Wuxu dayso leeyahay ma garan, Deex wedkii helaye.  
 Israa'iilna waa loo dalbaday, dabar-go'aygiye  
 Mar haddaan doc ii nooli jirin, wawga darayaaye  
 Iyagaa dardaar-werin jiree, yaanay dacaroone.

Dab wax guba dabbaabad iyo jiib, doobta ka  
 higgooda

Inta dawlad taagteedu tahay, waa la ii dumaye;  
 Wixiiyoo dayuurado onkoda, nala dul gawdiidshay  
 Dhulka cidi ma daaqdeen siday, damacsanaayeene  
 Rabbi doobirtii iyo rag baa, lagaga doogaaye.

Sidii duur la gubay bay carrada, qaraf ku daareene  
 Lama-dego waxaa Herer ka dhigay, dil iyo laystaane;  
 Dabayl baa ka foodhiday Tog-dheer, degelladeediye  
 Dummaddooda weeyaan wixii, moora-duug  
 dhacaye.

Iyagaa khalqiga dayriyee, yaan la daydayine  
 Raggii calanka deyrka u ahaa, dide Cubeeshoowe  
 Kolkii loo dub-nixi waayey bay, dabarka goosteene.  
 Dubur iyo wuxuu Hawd ka galay, shicibku Daadayse  
 Dul-cad baa xeryaha looga dhigay, duluglahoodiye.  
 Haddaanaan dagaalamin nafluhu, nama daneeyeene

3.1. KEENA-DIID (7/9/1989)

117

Darmo lay fidshaa kama horrayn,  
dooraddaan dhigaye.

Dawo laguma raadsheen raggii, loo darraan jireye;  
Dubbahaygi weeyaan hadduu, dumay gidaarkiiye  
Intii baan dad ii soo shiriyo, daanya-qaad helaye  
Intii baan dul-saarkii ka baxay, laygu duudsiyaye  
Intii baa sidii dawladeed, lay dabbaal-degaye;  
Digta kaaraheey geelayaga, doolay mahadsheene  
Ducana nooma kicin jeer warmaha, laysku  
deeddamaye.

Dhibta waw dul leeyahay hadduu, ruux dan  
leeyahaye

Annakana diraacdiyo colkii, noogamay darine;  
Ninna danabyadiisii ma tebin, haadku daaligaye  
Daar iyo wixii maal burburay, duudsi baan qoraye.  
Wixii daranba Geneyoow wax baa, kaaga sii darane  
Intay daabka haystaan mindida, nololi waa diufe  
Waxan duunyadaydii u hurey, mar ad is-daysaane.

Intaan nabadda daafacay haddaaan, col u  
daruureeyo

Mar horaan danteey gaadhi laa, Cali-durraanoowe;  
Wakaa fooshay daalacan xaqeey, dedan ku sheeleene  
Waxa deeqay warankii dhegtii, diidday waanada'e;  
Goortii duduuciyo "kir" tii, lagala soo daalay  
Loo gurey dameeruhu usheey, dabac-yaqaaneene.

Imminkay la deedaabayaan, dakharradaydiye  
Waa dabatadoodii waxaa, daadsan kaymuhuye;  
Sidii deero lagu yeedhay bay, dabada jeedsheene

Dulucii islaamaha la eed, Ina Ducaaloowe.

Iyagoo “dig”teedii Tog-dheer, weli dedoonaaya  
 Oo doogihii Herer qabaan, Saylac soo dagaye.  
 Ummulaha kuwii dooxan jirey, Daalo laga saarye  
 Warku durug Kismaayana siday, ugu dalaabeene  
 Ka dabbaalan maayaan bad bay, dalaq  
 yidhaahdeene.

Malmalkiyo dab-qaadkii sidii, laysu daba-qaaday  
 Waagii dillaacaba naxdinno, dihin ma waayaane;  
 Ma dambayso maantana hadday, Xamar ka  
 daysheene  
 Intii horeba daaweey lahayd, daannadaan dhigaye,  
 Allaylehe haddaan doonnidii, qoomay dakhalkiye.

Nin kastoo dambeedsadayba waa, laga  
 dambeeyaaye;  
 Rag hadduu Dayuuroow laftiyo, duunka ka colloobo  
 Mid uun baa hadday deedamaan, “dugay” ka  
 raacdaaye,

Iyagoo dureertada ka jaban, dani hadday keentay  
 Waa guul Ilaah nala damcoo, loo dadaal-galaye.

Kolkaan shalay inoo daaya laa, nabaddan loo  
 daabtay

Dannigooda may gelin mar baa, loo darsanayaaye;  
 Imminkay sidii doollar kacay, dahab ku raadsheene  
 Anna waxan dalluuntawgu riday, rag is-dareensiye  
 Jeeroo dabkaygii wax gubay, layma soo dayine.

Daw baan u leeyahay haddii, doorkan lay tebeye

3.1. KEENA-DIID (7/9/1989)

119

Waxaan degemsanaadaba markaan, diiray lay  
baraye  
Inaan duulin karo layla arag, samahay diideene;  
Goortaan ku daadduumiyey, “dala” yidhaahdeene  
Waa dulin suntiisii la helay, maanta dabadeede.  
Noomaysan daaheen hadday, duuli karayaane  
Waxay dib u fadhiisteen kolkaan, “deeliyaa” idhiye;  
Alla-doori tiigtiiqsigii, door umuu dhaline  
Gabbalkooda dumay waa shacbiga, waa u daalacaye  
Anna wawga darayaa hadday, maanta dagan yiine.  
Nimay noloshu deel-qaaf ku tahay, iima duur-xulo’e  
Dhego waxay daloolen intaan, dakharku weynaane;  
Waa taan dubaaq loo lahayn, dela-wadhkaygiye  
Imminkana dillaacaan lahayn, meel dawaar maro’e.  
Amba dhiig ma daadsheen haddii, daawo  
nooshahaye  
Badh-daloolka iyagaa ka dhigay, diin la aammino e  
Waxan dirir guddoonsaday markaan, waayey  
daw kala’e.  
Dacalkaa Ilaah noogu xidhay, duul habaar qaba’e  
Waa waxa dusuuddii guryaha, geystay meel darane.  
Wuxuun baa hadday dawlad yiin, laysla dayi laaye  
Ma oggola dad-weynuhu wixii, goostay daahyada’e.  
Shilna wayna daan-weyn intay, duubka xidhan yiine  
Dabaday ku qarin layd hadday, riya dub leedaaye  
Waxba yaan gal soodhkii dafiray, lagu ma-diidayne.

Wax dhaaxaan durraansaday Rabbigay, daraygay  
yaalline  
Dillo ma leh haddooy ii jabeen, naqas ka sii daaye  
Dihan maayo caawana hadday, duco yidhaahdeene.  
Iyagoo dareeriyo inay, dunidu ceeryoonto  
Inoo doora labadaa mid dhaha, hadalki oo duuban.

@SOMALIBOOKS



## 3.2 Waaya-arag (1/1/1983)

Markaannu halganka hubaysan ku biirray, waxaannu billownay inaannu indha-indhayno siyaasadaha jabhadaha lagu hagayo. Durba waxaannu dareennay qabyaalad iyo wax-kala-riixasho aan loo fadhiyin. Waxaannu aragnay madaxdii qaarkood oo aan garaadkoodu dhaafsiisnayn, taliska Siyaad oo ay ridaan oo iyagu halkiisa galaan. Markay halkaas wax marayeen ayaannu, aniga iyo Hadraawi, go'aansannay inaannu dadka u warranno. Markay taariikdu ahayd 1/1/1983 ayaannu duubnay cajalad baaq ah, oo xog-warran ah, iyo laba maanso: *Dallaalimo* (Hadraawi) iyo *Waaya-arag* (Gaarriye).

Maansadan *Waaya-arag* waxay ka faallootay hoggaankii S.S.D.F.<sup>1</sup> oo ay Waa-suge u bixisay iyo hoggaankii S.N.M.<sup>2</sup> oo ay Waa-dhawr u bixisay. Waa-suge habeen buu intuu seexday ku riyooday, isaga oo xilli barwaaqo ah Villa Soomaaliya<sup>3</sup> ku jira, oo lagu dhex waardiyeynayo. Wuxuu nimcadaas ku jiraba kolkii waagu baryey ayuu is-arkay isaga oo gawaan cidla' ah jiifa. Wuu u qaadan waayey. Markaas buu maradii haab-haabtay oo gaadhi halkan jooga shidhka u galay, si uu riyadiisii u rumeeyo oo uu Villa Soomaaliya uga soo dhex tooso. Hase ahaatee isaga oo aan meeshii gaadhin buu jar kala dhacay. Waa-dhawrna kitaab aanuu rumaysnayn iyo wardi been ah buu dadkii horqaa-day. Mase ku guulaysan inuu taageerayaashiisa isku wato si uu dantiisa u gaadho. Waa tan maansadii:

---

<sup>1</sup>Somali Salvation Democratic Front, Jabhadda Badbaadinta Dimuqraadiga Soomaaliyeed.

<sup>2</sup>Somali National Movement, Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed.

<sup>3</sup>Villa Soomaaliya waa rugta madaxtooyada Soomaaliya.

Haa, waa wadhiisii  
Sardhadii walaqnayd,  
Wiswiskiyo waswaaskii  
Wiishkii la tegi jirey  
Hurdadii la wici jirey,  
Ee damaca waalani  
Keenada ku wadi jirey.

Caawana la weesaaq  
La wandaafiyoo duul  
Lana soo walaanwali.  
Wuxu sheed ka halacsaday  
Ummad weer ka wada siman  
Oo waabab hoos tuban  
Iyo guri wacdaro qaba  
Oo meel barwaaqo ah  
Gunta waadi kula jira.

Oo wiil badraaniyo  
Wiilwaal garoomo leh,  
Lagu waardiyeeyoo  
Deyrku waayir leeyahay.

Ooy godolki waa-beri  
Shimbiraha wishiirriyey  
Heeso aad u wacan iyo  
Waay-waayo saareen;  
Webiguna dhegaha nabay.

Oo xareedda wadhan iyo  
Waqallada ransanayaa

3.2. WAAYA-ARAG (1/1/1983)

123

Warka hoos u dhigayaan.

Oo weedhka karantiyo

Warihiyo jidhaamaha

Onkodkii ku wayraxay;

Danabkuna wisiisiyey.

Oo seer-ma-waydadu,

Waraqyada baldhiidhiyey

Ku dul-weehanaysoo;

Intay dhigatay wiiqii

Wax xillaysku dhigayaan

Qorraxduna 'wac' soo tidhi.

\* \* \*

Riyo been ah weeyee,

Isagoo wilwiladiyo

Wigladaas ku jira buu

Waa-suge baraarugay.

Mise wuxu kor yaallaa

Wambarkiisi gaabnaa!

Wajaqyoo maraanmaray;

Weeqaaq hareeraha;

Waylaalistii ma leh.

Waaheelku sahansaday

Ku wareer hummaaggii;

Werwer baa ku kowsaday;

Weerar buu u halabsaday;

Waagiina maba sugin.

Weli waa allayl dam ah;

Habeen waaxi nooshahay  
Mugdi gaasha-weyne ah.  
Gaadhiga warraahana  
Waalashiyo waxaa go'an  
Waayirrada indhaha shida.  
Isna waa wadwaad falan  
La-wajaaf habeen leh.

Laga waani biimaha;  
“Waar aayar!” lagu yidhi,  
Soo joogso laga waa;  
Waayeelki loo direy,  
“Walag” way ka quusteen.

Wax kalaa ka salag lehe;  
Wiyil qooqan heensee,  
Baabuurki weetee.

Si aanuu waqti u lumin  
Wade kalena loo helin,  
Waddadii taraarsii  
Wabadaran afka u saar;  
Qarda-jeex waraaraha  
Waalalowte kala dhacan.

Weeraarta ximanka leh  
Wabataqanta oo idil,  
Waaxyaha rakaabkiyo  
Ragga uu wasaashaday  
Ku waydaaray buuraha.

Waarwaarri oo luud;

3.2. WAAYA-ARAG (1/1/1983)

125

Dalcadaha waddaranka ah  
Dib u soo walaandee;  
Hadba wiil ku taakee  
Una loog waraabaha.

Wuxuu 'wadhadhac' leeyoo  
Wirdi maalin oo layl  
Hadba doc isku waababa;  
Wuxuu qaw ka weecdaba;  
Wax la yidhi, Hadraawoow!  
Maantaa war joogaa;  
Wiriq oodan buu galay,  
Shilna wayna Daan-weyn.

Xaggu gebi wed baa yaal  
Wadhfiyoo ka soo noqoy,  
Mise weger, xagguna gebi  
Guntu 'walac' isugu timid.

Imminkay war-geysyada  
Bogga hore far waaweyn  
Si wanaagsan ugu taal:  
'Wax la waayey, Geelloow,  
Ninkii waalan baw duda!'

Laye weedadawgii  
Ka wareegtay xee gadu.

Waxse laga werwerayaa  
Doc-wareemadkuu dhigay  
Ubaxuu wadnaha jaray;  
Soo-ma-waabtayaashii

Badi haadka loo wadhay.

Inta wiil yar naafo ah

Inta hooyo weer xidhan,

Waayeelka debed-baxay,

Waxa jaah-wareer dhacay,

Bal Il-giirba weyddii!

Aaway walacsankii Mudug?

Warandaci Nugaaleed;

Aaway warasadoodii?

Nugulkiyo hor-weyntii

Warihii biyeysnaa.

Aaway wacanayaashii,

Dhiiggooda waqafka ah,

Baabuurka lagu waday?

Cakuyeey wah iyo ciil!

Khalqiguu wakala-rogay

Qaar baan war laga hayn.

War-dadabiyo been iyo

Waxna waad xujoowdiyo

Wanjil bay ku xidhan yiin.

Waranweerki qaarkood

Waddankay ku laabteen.

Badhna way waqaafeen

Debeddeey wareegaan.

Badhna waranka loo daab

Badhna loo dardaar-weri;

Badhna waabay waasheen.

Inta waadhka jiiftaa

3.2. WAAYA-ARAG (1/1/1983)

127

Iyaguna wacaal ma leh.

Waxsay wadhi ka joogtaa,

Wajar iyo Hadraawoow!

Waxoogaygi soo hadhay;

Waqtigiina diga-rogay.

Wacdarihi Dheg-dheer iyo

Waa baa waxaa jirey

Canuggii ka weynaa;

Suul cayn ka waantoow

Ragna waa is-wajahay.

Waabeeyo-qooshkii

Woohoowdi lagu garay.

Nabad-doon qabiil wada

Badhi-wale xisaab sida,

Habar-wacashadii iyo

‘Way’diyo ‘tolla’ay’dii

Ka soo waadday sheekadu.

Arrintuna ka weel-godan;

Waaga aynnu eegniyo,

Aabbaa wax soo sida,

Naas-weyn-ba-dihintii.

Wax la wadaba xaajada

Garay weyd inuu yahay,

Waddo halaq-mareen iyo

Waxaraha in lagu qalo

Shilal meesha ugu wadhan.

Nin la liiday wala-arag;

Jabhadkiyo waddanigii  
 Welwelkii ku sii korodh.  
 Wiigba wiig u sii dhiib  
 Dirirtii ka waran-jiid;  
 Cadawgana wax yeellee  
 Misna wiiqi kari waa;  
 Kelidii waddari waa  
 Walaalkiina lama jiro;  
 Garo oo wax baa si ah.  
 Waxay talo ka joogtaa;  
 Hashaydii wed baa dilay,  
 Waxna waa u wehesheen.

\* \* \*

Waa-dhawrna talo ma leh  
 Wax ma dhaamo Waa-suge;  
 Wuxu weliba dheer yahay  
 Wardi xeeli daba taal.  
 Waa horuu Islaamkii  
 Kun wadiiqo kala baxay.  
 Weriseey judhuu yimi  
 Wuxu yidhi: “Waqooyiga  
 Dadka kale wadeecada  
 In kastooy wadaagaan  
 Walaxaase yara jira.”  
 ‘Weger iyo ka waasacan!’  
 Oo show wadaadkoow,  
 Baroortaadu weyshiyo  
 Orgigaba ka waaweyn!



3.2. WAAYA-ARAG (1/1/1983)

129

Wuxu yidhi: “Waqooyigu  
Wax gaaruu tirsanayaa;  
Hadday tahay wakaalado  
Haddii ay warshado tahay  
Hadday tahay wasiirrada,  
Waa laga sed weyn yahay.”

Wuxu yidhi: “Waqooyigu  
Meesha iyo waagii  
Waddankooda fiicani  
‘Wallo-weyn’ u gacan-galay  
Calankana wareejeen  
Waa dhaxal-wareeggii.”

“Weeye” baa la wada yidhi,  
“Hadda noo wad sheekada”.

Loo guux warkiisii  
Wanankiina loo loog;  
Wabaxyoo durduurtii  
Nimankii isaga wacay,  
Ee weelka buuxiyo  
Waalada u wada dhigay;

Nimankii si wada-jir ah  
Iyagoon wax weyddiin  
Gadh-wadeenka uga dhigay  
Kuna waabay sharaftida;

Nimankii yar iyo weyn,  
Sida walad xalaaleed,  
“Waa yahay” ku wada yidhi

Una qaaday weesada.  
Iyagoo walaalo ah  
Nimankii warkaw direy  
Cududdoodi kala wiiq.  
Durba weli siraatiyo  
Wacad-qabe u kala saar;  
Qolo qolo u waageer  
Edegyana u kala waab;  
Wacyigooda naafee  
Iyagaysku wayrxi  
Kana saalax-waatee.  
Waxaan loo fadhin iyo  
Ku wareeg abaar-dhawr  
Kana weecay dawgii.  
Waxa taas ka sii daran  
Diinkuu ku yidhi waa,  
“Orod oo doc-wadhatada  
Waaleed dab uga keen!”  
Weli waa la sugayaa.  
Wixii uu waraaq direy  
Cidi weeye may odhan  
Ka naf-waa adduunkii.  
Waaqlina halkeedii  
Wayliina ood ma leh;  
Waadaashi lama helin  
Weerihina kama hadhin.  
Waayeelna hiir-daa  
Waydaarte xoolii;

3.2. WAAYA-ARAG (1/1/1983)

131

Misna waqaqadiisii  
Dhal waraabe kuma korin.  
Wahabkiina sii baah  
Waa-dhawrna sharaf-dhaca  
Isagaa isugu wacan.  
Meeshiyo Wajaaliyo  
Ilaa Wooble iyo Surad,  
Dadka alif-wax-maaliyo  
Wax buu leeyey labadaba  
Isagaa ku wada yidhi.  
Hadduu beri war weynaa  
Arag weyd ah baw xigay.  
Docda kale dad-weynii;  
Waleecaadki kama bixin  
Waaya-aragna waa yahay.  
Waxa meeshan yaalliyo  
Waalaloowga beenta ah  
Horreey uga war-keeneen.  
Welef iyo xajiin iyo  
Anaa kaa wakiil iyo  
Qabiil lala waqdhoochiyo  
Iyo filimkan wiirsiga,  
Nin kalaa San-weynow!  
Waa hore u wada jilay  
Wafana ugu sii daray  
Iyo weliba dhii-dhii.  
Waxay talo ku goosteen  
Ninkaan taada weynayn

Adna tiisa weydee.

\* \* \*

Dunidiina wool iyo  
Wasalaalaq baa jira;  
Nacab baa hubkays wada  
Ku waddaray dhammaanteed;  
Xasillooni lays waa.

Geeskana bad iyo webi  
Waayir baa ku wada xidhan  
Weli nabadi kama dhalan.

Afraxoowse weligeey  
Yididdiilo kama webin;  
Maxaa wacay ayaamuhu  
Waa falal is-wada tara;  
Taariikhdu wecel ma leh.

Wakintiyo dekaankiyo,  
Wayraxa dan haw gelin!  
Sar-wejida kadoodiyo  
Ha ku dagan wisiisiga,  
Wacwacdeeda haw bixin!

Kolkay sayga waydaba  
Sidaasay u wahantaa  
Una waalalowdaa;  
Dadka qaar waswaas iyo  
Wahan ugu abuurtaa  
Washna uga tidhaahdaa.

Iyagoo tar-wadhayoo

3.2. WAAYA-ARAG (1/1/1983)

133

Talo cayn-wareeg tahay,  
Ayey “way” da dhiillada  
Waqal roob sidiisii,  
Durba fool-waliil iyo  
Rajo heenso wadatiyo  
Wallac ugu af-goysaa.

Weligeedna waa ugub  
Wageed waa u diga-rogad  
Xil-wareejin joogta ah.

Haddii dogob wajaaf rido  
Sidaa kuma wasiir go’o;  
Walcan baa ka daba kora  
Wisin hawlihiisii,  
Iyagoo wax lagu daray  
Gur-ma-go’an u sii wada.

Hadday wiriftay caawana  
Waa laba-wajiilalay  
“Ha samaato!” wada dhaha.

Kulka Waa-bariis iyo  
Waxa shiday Warfaa iyo  
Minka xalay Wansiix galay,  
Warasoow, tus baa jira!

Is-wadhaanwadhkeediyo  
Waqaaqanka muuqdaa  
“Wadhlo” waa geddeedii!

Wahankii gilgili jirey  
Waddacaadda goorteey,

Habeen ‘wii’da loo riday  
 Waddadaw banneysee,  
 Waashmaan sidiisii,  
 Waa-beri ku daba jira  
 Waydaaro leedahay.

Waa waayadeedii;  
 Wacays bay siddaa iyo  
 Waa wiil la odhan jirey.

Dad-weynoow, u magac-bixi!  
 U wan-qalo, saboolow!  
 Dan-yareey, u weel-tolo!  
 Walamsade, ka daydayo!  
 Yaahuu, wax-daran-liqe!

\* \* \*

Waxan uga dan leeyahay  
 Hadduu ceelki wada dumay,  
 Ilaa tan iyo waagii  
 Waadaanta lagu waday;

Maalkuna wiyiirtiyo  
 Wasakhda iyo biirtii  
 Ka wayiigay oo nacay;

Anna waanadaydiyo  
 Taladiyo wax-sheeggii  
 Wadhi aan ka taransaday;

Waddankiina halis iyo  
 Waranweer ku sugan yahay  
 Wadhan yahay dirkaygii;

3.2. WAAYA-ARAG (1/1/1983)

135

Waxa igu wallaahi ah,  
Doc aan uga wareegaba  
Colkaan wadhaf ku dayayaa.

Wadno-qabadkan lagu furay  
Dadka waan ka wadayaa;  
Wahdi baan u rarayaa  
Kob wanaagsan oo ugub.

Kolla waarimaayee,  
Bal inuu war iga hadho  
Haddaan waayo sii jiro,  
Wahsanmaayo Yaasiin.

Wagan baan ku taag nahay  
Wajib baanan leeyahay,  
Wax-ma-haystayaashiyo  
Dulmanuhu wadaagaan.

Wax-yaqaanna waan ahay;  
Nacabkayna weligeey  
Wehelkayga lama simin;  
Waqtigana anayska leh.

Dhegtaan weedhu geli karin  
Waran baan ku furayaa;  
“Wir!” ninkii is-bidayoow.

Waanwaanse kama tegin;  
Waxa aan u taag nahay,  
Jabhad lagu walaal yahay  
Waxdad aan ninnaba milin  
Wacad lagu heshiis yahay

Weerarkeeda oo mid ah  
Waddadiisa oo sugan  
Wadartoo go'aanka leh  
Nabad waarta Geeskiyo  
Hanashada dad-weynaha,  
Sidaa iyo war yaridaa,  
Wax-weyddiin ogaalkeey.

@SOMALIBOOKS



### 3.3 Gar-naqsi (25/4/1983)

Muddo ka dib, kolkaannu halganka hubaysan ku biirray ayaannu af-garan waynay halka wax loo wado. Waxaa noo soo baxday inaan Af-weyne ridistiisu mushkilad weyn ahayn, ee ay su'aasha ugu darani tahay: maxaa lagu beddelayaa? Hoggaankii siyaasadeed wuxuu ku guul-darraystay inuu soo ban-dhigo bar-naamij cad oo qeexaya marxaladda ka dambaysa taliska macan-gagga ah. Markaannu ku dhaliilnayna annakii bay dagaal nagu qaadeen, siiba kolkaannu soo saarray baaqa aan kor soo sheegay. Waxay dunida noo mariyeen inaannu nahay “calan-cas” dadka gaalaysiinaysa. Maansadan iyada ah arrintaas baan kaga gar-naqsanayey. Dadka ayaanay u taallaa inay xukunkooda ciddii qaldanayd ku ridaan.

‘Gug’ baa laysku yidhi  
Gibin baa la naxay.  
Geesaha la deyey  
Qaddar gaaban baa,  
Qorraxdiyo geyiga  
Dayax shaw dhex galay.  
Misna goojo-been  
Wax yar gaadmadii  
Minu noo gabbaday  
“Gudub!” baannu nidhi.  
Maantana ged kale  
Iyo gole-ka-fuul  
Guubaabin ugub;  
Gabay laysku shaxay

Goob iyo far-daar,  
Iyo gaaraguuf  
Jare iyo af-guran  
Kanna waa gudbane  
Gunud Abu-Hadroow.

Diiwaanna geli  
Geeraar nin weyn,  
Murti gaaxsanayd  
Gabay shalayto jirey  
Oo galabta nool;  
Ahna gogol-dhiggii  
Berri guul ku maqan.

Boqollaal kun goor  
Gabay laysku dayey  
Oo aan naf-gu'in.

Gabay gabay ku taxan  
Iyo gabay haddii  
Sida geed la jaro,  
Gur-ma-go'an u baxa.  
Jabhad goohay ciil  
Gabay qaylo-dhaan  
Ugu soo gurmaday.

Waa gabay hadduu  
Nin gaboobay naco  
Gabankiisa suga.

Gabay say la tahay  
Waa lagu gurruci,

3.3. GAR-NAQSI (25/4/1983)

139

Ama waad ku guban  
Uga gaabsanayn.

Waa gabay shirkii  
Isagiyo Garruun,  
Af-garooci nabay  
Markii loo gar-naqay,  
Golihii ka yidhi:

“Waxaan garanayaa  
Haddii ay gef tahay  
Galab aan fogayn,  
Inaan meel garbo ah  
Laan gebi ku taal  
Geelawga digay.”

“Waxaan garanayaa  
Haddii ay gef tahay  
Galab aan fogayn,  
Duddun bahal-galeen  
Sir-ma-qabe hadh galay  
Oo gama’ ku jira,  
Halaq gaadayiyo  
Inaan good ka hirey.”

“Waxaan garanayaa  
Haddii ay gef tahay  
Galab aan fogayn,  
Inaan Geed-canjeel  
Taladii Gurdumi  
Tii lagu goblamay  
Gacalkawga digay.”

“Waxaan garanayaa  
Haddii ay gef tahay  
Galab aan fogayn,  
Nin gadaangadkii  
Wax markuu gurracay  
Dadka giigay yidhi:  
‘Iyagaa i gabay!’  
Inaan beenta gudhan  
Ciddu kama geydee,  
Ha ku goosan! idhi.”

“Waxaan garanayaa  
Haddii ay gef tahay  
Galab aan fogayn,  
Inaan geeshi idhi:  
‘Gole lagu hirdamay  
Haddaan dirir-gobeed  
Geesiga xaq leh  
Dadku geeso qaban,  
Inaan goob dagaal  
Guul lagala hoyan.’”

“Waxaan garanayaa  
Haddii ay gef tahay  
Galab aan fogayn,  
Nidar inan ku galay  
Nin damboo giblada  
Sidii Guul-wadii  
‘Hay-hay’ la guro,  
Inaan gooddi iyo

3.3. GAR-NAQSI (25/4/1983)

141

Dib gafuur-xidh kale  
Ugu suurto-gelin.”

“Waxaan garanayaa  
Haddii ay gef tahay  
Galab aan fogayn,  
Arday guunki hee;  
Kala-geynta baray,  
Kala-gurid qabiil  
Kula galay dagaal,  
Inaan gari Allee  
Kuma gaadhid! idhi.”

\* \* \*

Gulufkiyo dabrada  
Goolaftankiyo  
Galawgaysu ciyey,  
Halgankeenna guud  
Inu yahay gadood  
Gaashaan-dhig iyo  
Gobannimo-u-dirir,  
La garwaaqsay taa.  
Ma danbaanse galay?  
Haddaan gole ka idhi:  
“Gudhubaa-gadhaa  
Afan wada gurracan,  
Aar-goosigiyo  
Aragtida ‘geb’ta ah  
Kuma badiso garo.”  
Guban iyo Nugaal

Gaaroodi iyo  
Godankii Saraar,  
Geyigaan ku koray  
Gacalkayga dega  
Inaan gooyey daa.  
Waxse aan gensaday  
Inaan guul-darrada  
Kaga gooni-dhigo;  
Tiiyoo Gediyo  
Dadka Gaalkacyiyo  
Geel-jiraha Af-madaw,  
Gabayooxa iyo  
Gasariirku simay.

Goonyaha Tog-dheer  
Meeshiyo galbeed  
Ilaa buurta Golis,  
Dadka gu' iyo deyr  
Gamashiga ku nool,  
Godobtooda maqan  
Xaasha'e ma gadin.  
Waxsaan layla garan  
Iyagiyo Gal-dogob  
Haddaan laysu geyn,  
Sidaan labada gaan  
Midna gaar ahaan  
Guuli ugu dhawayn.

Guud-caddaadigiyo  
Gadh-castaysu timi

3.3. GAR-NAQSI (25/4/1983)

143

Guurtida la wacay,  
Xaajadeenna gabal  
Inay goyn karaan  
Way gacan iyana.  
Ma danbaanse galay?  
Haddaan gole ka digay  
Xilligays geddiyey;  
Xiddigaha gudiyo  
Dayaxii gar-dhalad  
Inuu tooman galay  
Oo tiro-gedmaday.

Hasheennii Galoof  
Gabnadii Cadhool,  
Gaban-xooradii  
Gabtay wiilashii  
Gaawaha u siday;  
Afartii gudhnaa  
Markii loo guntaday  
Inay giijsmeen  
Anigoon gadayn,  
Ma gef baa haddaan  
Nin markuu u galay  
Gol-qaniinid iyo  
Guja-maal ku dayey,  
'Godlanmayso!' idhi.

Adduun gaabtay iyo  
Gu' xumaadka dhacay,  
Ninka ceel gun dheer

Gundhadiisa jaray,  
Culustana u galay  
Inu garangartiyo  
Guunyada u shubo;  
Ee aanse garan  
Foostada gunta la'  
Horta sii gufee  
Intaan geelu iman.  
Ee gorof biya ah  
Giddi maalin-layl,  
Hore iyo gadaal  
Hadba gees u wada,  
Far haddaan ku goday,  
Ma dambaan ka galay?

Gole-joog-wanaag  
Geenyada shirraban,  
Iyo gaariyeey  
Gabadhii tiraba,  
Laba iyo hal goor  
Guurba guurki xigay  
Meel baas gashee,  
Hooyadeey gacalo  
Iyadoo gambo leh  
U garaadsatee,  
Marna gaalku qabay  
Marna boygi Giib  
Iyo gaadh-hayihi,  
Midba gaar ahaan



3.3. GAR-NAQSI (25/4/1983)

145

Ganacdeeda dilay.

Maanta ooy Gobaad

Intay guri lahayd,

Sannad-guuradii

Boqol gaw ah tahay,

Ninka guud-haldhaa

Gayaxeeda raba

Galabtana mar kale,

Inuu gaabsi iyo

Gogol-dhaaf ku furo,

Go' haddaan u riday

Ma dambaan ka galay?

Markii guun furaba

Haddii godadle kale

Geed-fadhiisi yahay,

Garba-duub horriyo

Gensina iska jirey,

Aniguna gabyaa

Xil gubaayo ahay,

Oo aan Gobaad

Wixii kula gudboon

“Tasho gooshkan!” idhi,

Ma ii gaalnimaa?

Haddaan kuu gabyaba;

Kuu godob miyaa?

Ma ka aar-gudaa?

Ma go'doomi baa?

Ma gondaha jar baa?

Ma ha gaagaxaa?  
 Ma guhaadiyoo  
 Ha ku gaabsadaa?  
 Ma ha guuxin baa?  
 Ma inaan gudhaa?  
 Hadal waa gunnee,  
 Ma gar-diidnimaa?

\* \* \*

Afartaa ka gudub.  
 Aan gunaanadee  
 Ninka gelengeshiyo  
 Giriyaad cid-la' ah  
 Gabbalku ugu dumay,  
 Ee gegi bannaan  
 Gibilkiisa oon  
 Waxba guud xigin,  
 Gocashada naftiyo  
 Gocondhada barkaday;  
 Ee galaha iyo  
 Gawraha huwaday;  
 Ciilkana gogladay.

Gureyoow waxaad  
 Ku tidhaa Gandood:  
 "Ma goblamin xilligu  
 Galshadii ma madhan;  
 Gurgurkiina weli  
 Gibishii ma furin;  
 Geeddiga hakaday

3.3. GAR-NAQSI (25/4/1983)

147

Wuu gaabiyee  
Uma noqon gadaal.”

“Hayska gaabiyee  
Wuxu gaadhayaa,  
Kollay guri ka roon  
Gubadkaad ka timi  
Kana geedo badan.”

“Gubuxsiga waqtiga  
Ninka gedo-yaqaan  
Gedgeddoonka hee  
Gorodda uma lulo.  
Gol-dalooladiyo  
Gebi-dhaca yarkii  
Ma gilgilo nin weyn.”

Giir iyo hadduu  
Cirku gedef madoow  
Isku soo gambiyo,  
Gudcurkiyo mugdiga  
Kama gaws-qabsado.  
Waxaan garanayaa  
In habeen galaba  
Waa ‘galac’ leh iyo  
Hadh gadiitay xigo.

\* \* \*

Dunidana ka gees  
Bari iyo Galbeed  
Giddi uumiyaa  
Gaal iyo Islaan

Gacal baannu nahay.  
Mana kala godbiyo  
Gar-darriyo ciddaan  
Godob ii lahayn  
Ee nabad-gelyo leh.

Wax-tarkii gunno ah  
Nin kastoo gargaar  
Ii geysan kara  
Annakoo gudboon,  
Isagana guddoon.

Nin i gaasiriyo  
Intaan guulka ahay,  
Nin i garab-qabtaba  
Wixii lay gashado,  
Nidar waxan ku galay  
Ka gadaal markaan  
Guryo-samo ku furo,  
Ninba gumaradii  
Siday gobi ahayd  
Inaan ugu gudaa.

‘Waraabana nin ganay  
Iyo kii galladay  
Kala garay’ layee.

### 3.4 Saxansaxo (17/10/1987)

Sannadkii 1987 ayaa hoggaanka S.N.M. iska hor-yimi. Golihii Dhexe ayaa laba u kala jabay. Wax go'aan ah ayaa la qaadan kari waayey. Waxaan u malaynayaa in khilaafkii waagaas ururka dhex yiillay, uu ka mid ahaa sababihii Itoobiya ku qanciyeey inay taliskii Siyaad la saxeexato "heshiiskii" 1988; waxaad ku darsataa inay nimankii hoggaaminayey S.S.D.F. iyagana hore uga caal-waayeen.

Maansadan waxaan ka hor-akhriyey shirar ay magaalada Herer ku lahaayeen golayaashii dhexe ee S.N.M. iyo S.S.D.F. Waxaan ku nuuxnuuxsaday wixii laga sugayey iyo waxay ku sugnaayeen siday u kala fogaayeen. Aniga oo xusuusinaya dhibaatoyinkii waqtigaas dalka ka taagnaa ee muranka dhexdooda ihi illowsiiyey.

In dhawaydba suugaanti gabay, maan siyaakhadine;  
Ma sar-goynnin bayluulidaan, siinadayn jiraye;  
Saxansaxo kamaan tolin tixdiyo, heesta saxar-qaade;  
Intaan suursanaa baa inaan, seexday lay filaye;  
Saskii Deelley buu mooganyeey, nin i saluugaaye;  
Shamacyadi siraadnaa ayaan, Siinlaydi ahaye;  
Soke shiishka loo dhigo ayaan, sare u qaadaaye;  
Suud iyo Waqooyaan ihiyo, qaranka Soomaale.

Waxa lagu saleeyaa murtida, socodka waayaaye;  
Waxba kuma leh saynsaab-wanaag, duciyo saadaale;  
Haddaan danab sanqadhin Gaarriyaan,

soohin maansada'e;

Ma sunnaynnin weligay anoon, kicinnin sayruuqe

Mar haddaan suntado waa inay, siigo ligantaaye.

Tabta seer-ma-waydada ayaa, lay sid-tiriyaaye;  
 Sibiq ereygu iigama dhacee, waan u sahanshaaye;  
 Kolkaan meel u sibir-saarayaan, selefka taabtaaye;  
 So'da waxan abbaaraa kolkaan, saanta bixiyaaye;  
 Kolkaan saafi karayaan naxwaha, "sara" idhaadaaye;  
 Sabool baa ducdee luuqda waan, igadh-salaaxaaye.

Saakana Hadraawoow murtidu, saayiraad ma lehe  
*Haye-cala-salaa* iyo *haddeer*, ereyba waa saace  
 Soddonkiinan iyo maamulkaan, suul ku godayaaye.  
 Sacab ciid ka maydh yidhi dundumo,

suulashaa baxa'e

Solimayso waanadu dheg aan, uba samaysnayne  
 Maantana sursuurtaan ka digay, gelise saantiye.

Shir aan guul ka sugayaa ma jiro, Ina San-weynoowe  
 Onkod samalaheed igaga daran, saac-ma-bixiyaane  
 Sagaalkaad murmayseenba waa, saymo-lagu-reebye.

Surduwada dhexdeeda ah hadday, saarto nacabkeeda  
 Mar horaan siraadkii ka damay, daari laa Surade  
 Nin bahdiisu suuqaw gashaan, saajac noqonayne;

Ilaah baa dabkoodii sandahay, soocankaan diraye  
 Saddal-caaligii loo fadhiyey, suurta-geli waaye;

*Inta hebelba Ina Saalaxoow, hebel sadhaynaayo*  
*Een laga sal-gaadhayn mar qudh ah,*

*dooddu waa sino'e.*

3.4. SAXANSAXO (17/10/1987)

151

Anna samihi aan waday badh baw,  
qaatay sada-doone  
Badhna inan suntaba qaybiyeey, ii suxlinayaane  
Sidaan laysu baran bay u tahay, Saydiyoow marage;  
Anigoo safkaygii ah weli, kana sal-guuraynnin  
Lama qabo suldaarada ninnaba,  
shaadh-ka-siibka ahe.

*Afartaa sedkii Aadan Sheekh, sahaydi Koosaar dheh  
Waa iga salaam Awrrayaal, aan ku soo simaye;  
Intaan suursanaa baa inaan, seexday lay filaye  
Cirka dhiillo-saareenku waa, sahansahaygiye  
Goortaan salkaadhiyey wataa, seleshay fiintiye  
Afar kale waxaan uga socdaa, wayga sixitaane.*

Boqol sano ka badan bay maqnayd,  
sidigta Maandeeqe

Hadba gobol ha saareen inuu, gaawahaw sido'e,  
Subax keliya igamay qaldamin, sibir-udgoonleeye;  
Intii sacab ku maashoo dhan baan, sax u aqaanaaye.

Waxba yaan laftuu yahay Sursuur, seefta loo ramine  
Cidna kuma samayn tuu ku falay, Saalaxoow Gedo'e  
Ifka seeji aakhirona wuu sahayday qaarkoode.

Qajeeluu dab-saar inu ka dhigo,  
suubshay falawgeede

Goortuu sokeeyiyo tol iyo, seeddi kala geeyey  
Anna aan ku saaqiday inaan, sawdka garansiyo,  
Ee dani u seetaysay bay, daba saqleeyeene.

Laxawsiga haddaan siri ku jirin, Sedeha uu waalay

Yamyamoow Siraad Yuusuf baan, silic-

maryaaddeene;

Sariirtay habeen nool ninkii, qabay su'aashaaye  
Iyadaba sidaa looma dayin, sacab-wadhkeediiye.

Cumarkuu sarreeyaha ka dhigay, dib u suldaareeye  
Waa tuu surwaalkii ka furay, Sulubki gaabnaaye,  
Isagiyo Suxuurkuu wataa, waa u siman yiine  
Mar hadduu suldaanku isu baqo, saydhi caanaha'e.  
Ma yaqaan siddiiq iyo tol iyo, Jodobaw saaxiibe  
Wuxu Samatar eersaday kursiga, maalintuu sigaye  
Taftii Suubban baa lagu gilgilay, Ina Saleebaane.

Shilkii soonki dhacay baa u digay, qoyski Salasaare  
Maslax wuxu saddiqay waanaday, siisay maamadu'e  
Waa kaa sallaankii qabsaday, Aal-sacuudiga'e.

*Inta hebelba hebel saaranyee, dhiriq ku saydhaayo*  
*Iyaba waa su'aal idin hor taal, sidad ka yeeshaane.*

San-dulluu ku keenaa kuwuu, soohdimaa dhigaye  
Dhallin-yaro silsiladaysan, buu simay xuduudaaye;  
Iyagoo safradi waa shiddee, sabar ka liicaaya  
Oo sirinsirqa ah bays helaan, soo-ma-waabtaha'e.  
Anna salabka wiil raaf ku yimi, uma saliidayne  
Soodh aan la rabay baa cuskaday, saaruqdii Xamare.  
"Sin u baydh" kumaan odhan hadduu,

seedka bixin laaye

Goortaan ku saaqiday inaan, sawdka garansiyo  
Isna haad i siin waayey baa, suuga loo nacaye.

*Inta hebelba hebel saaranyee, dhiriq ku saydhaayo*



3.4. SAXANSAXO (17/10/1987)

153

*Iyana waa su'aal idin hor taal, sidad ka yeeshaaane.*

Gumuciyo colaadaha sanqadhay, sabada qiiqaabtay  
Cadawgaa saraayaha lalaban, saara guutada'e;  
Waxa sadhada loo beerayaad, sahashanaysaane  
Sabbaynmayso doonnidu haddaan, dhiig  
sunsumahayne;

Surinkaad ka meertaba miyiga, soobir baa wadhane  
Waana dhagax sintiisii ka baxay, seeska kayga ahe;  
Hashuu gurey sarwaanshaan ahiyo,  
gees-kastaba-seege  
Haddaan saac kalaw bixin qorshaha,  
Sudhato doonayso

Wax ka sayrimaayaan shaabigan, saaran daawaha'e.

Nin siyaasad liitaaba waa, suu ahaan jiraye  
Anaa mariyey soofaha magliga, rag igu saafeene.  
Kuwaan saamahaw riday ayaa, qoorta lay sudhaye  
Sagag bay ku le'edeen colkii, Saylac furan laaye;  
Raggii qodaxda ila siibi laa, haadka lagu soorye  
Hadba waxan saliilyoonayaa seedahay mudane.

*Inta hebelba hebel saaranyee, dhiriq ku saydhaayo*  
*Iyana waa su'aal idin hor taal, sidad ka yeeshaaane.*

Lix gu' baan Safeeriya fadhiyey, Sool anoo rabaye  
Lix gu' baan ku sii soco ku jirey, oo ka soo soco'e;  
Subulaha galbeed iyo lix baan, Sibidhlay taagnaaye;  
Saax-dheertan taakada jirtiyo, Saawba waan gabaye  
Siyaabliyo iniintaan ku riday, Suuftu may bixine.

Oohow kuma sal-dhigo geel haddaan,

*Inta hebelba hebel saaranyee, dhirig ku saydhaayo*

*Iyana waa su'aal idin hor taal, sidad ka yeeshaane.*

Sooryada badhkeed waa cuwaaf, laysku sabayaaye;  
Sargafyada xajiimaysan iyo, solayga qaamaysan  
Waxay sama-fal ugu sheegayaan, siinta godobaysan  
Geed-saar ku maran bay rabaan, inay samaystaane;  
Waana sababihii aawadood, Saaxil loo gadaye.

Sal-dhigyada ciyaar looma fidin, taniyo Saysheele  
Samariinku waa baadi-goob, moolka siqayaaye;  
Meeshiyo Suweys ways hayaa, siliggu Booboowe  
Cirka qamar-sanaacigu dushuu, kaa sawirayaaye.

*Inta hebelba hebel saaranyee, dhiriq ku saydhaayo*  
*Iyana waa su'aal idin hor taal, sidad ka yeeshaane.*

Damba-same ha naawilo fulaha, dhigay sulaaxiye  
Gobannimo haddaan loo sardamin,

saani lagu waaye;

Sakal bay dhex taallaa xornimo, surin cidhiidhyoone  
Soodh baa ballaysima dhegtaan, sawdku gelihayne.

Sanca waxa Imaamkii qallibay, soobirkuu dhacaye  
Waa tii salaad lagu kallahay, Jananki Soodaane  
Kuma seexan Fayruuq rag baa, seeska kuu qodiye.  
Keenada kuwuu sudhay ayaa, sababay Shaahiiye  
Isagiyo Safaaggiisi bay, sun u walaaqeene.

Hitlarkii ku saabulay wuxuu, saadsaduu helaye  
Muu mahadin Saadaat markuu, bixiyey Siinaaye  
Samowsana wuxuu eersadaa, Saandaniistaha'e.

Sir-ma-qabe ka sheekee ninkii, boqonta seeraaye  
Innagana siqiir-gawracyadu, waa sidoo kale'e;

Safxadaha haddaad kala furtaan, bogagga sooyaalka  
Sadarrada ku yaal waa tibaax, dhabanka Saygoone.

*Inta hebelba hebel saaranyee, dhirig ku saydhaayo  
Iyana waa su'aal idin hor taal, sidad ka yeeshaane.*

*Afartaa sedkii Aadan Sheekh, sahaydi Koosaar dheh  
Waa iga salaan Awrrayaal, aan ku soo simaye;  
Intaan suursanaa baa inaan, seexday lay filaye  
Cirka dhiillo-saareenku waa, sahansahaygiye;  
Goortaan salkaadhiyey wataa, seleshay fintiye  
Afar kale waxaan uga socdaa, wayga siritaane.*

Saxariirka keliday ma qabo, simay dad-weynaaye  
Surbacaadka bari Aadanoow, bogoxna saameeye;  
Soomaali oo idil ma jiro, samo nin sheegtaaye  
Laf siniinta oo aan dab gelin, siinka laga waaye.

So'dii Caynabood looma shubo, saakin Cumaroowe  
Dal-sankii nabaad-guur dhulkay, Sigad  
ku beerrayde;

Suubaanta ciiddii ahayd, kuma siyaabtaane  
Kama sofo geelii hor-weyn, Sud iyo Hiiraane  
Soolashuu ku dalandooli jirey, suudi baa maraye.

Goortuu salool waayey ee, subaxba reer maalay  
Ee irmaanka lagu saafay buu, siinad-doorsamaye  
Saddexdii marraa iyo ma laha, suudhi udugayde

Dhulka geed-saraadkii ka madhay, saacna la is-daaye  
Sumalkii idaa laguma daro, saaran jirey waaye;  
Way seben-xumaysteen lo'duu, seejay dirirkiye  
Iyadaa siqiirka u ahayd, sed ay ku ooyaane

3.4. SAXANSAXO (17/10/1987)

157

Kolkii samadu iba-beeshay bay, socotay geesleeye.

Wuxu saniyey mooyee carriga, siiggi ka idlaaye

Maroodiga Siyalaw Hawd ka galay,

way sindhidhiyeene

Subag lagama lulo Biixiyoow, seenyo iyo ciide

Sengihii Nugaaleed Taleex, kuma fan-saaraane

Caraboow Sanaag maydigii, waa ku saranseere.

Sammad baa Shabeellooyinkii, looga suudalaye

Sisin kuma tabcaan beer-waluhu, Juubadii Sare'e

Kolkii webiga laga seertay bay, saraci dhaafeene.

*Farraar Yeed ku sugan buu ku yaal,*

*Surad gadhkiisiye*

*Intaan samayda Beled-weyne taal,*

*salay ka baadhaayo*

*Inuu saawir yahay waan hubaa, waranka Sooyaane.*

*Haddii seerahaygii la galay, waan ku soo simaye*

*Kolkii aan siqsiqi-waayey baa, keeno lay sudhaye*

*Sacu dibiga Quulloow kolkaan, seerday buu dhalaye.*

Wax dhan buu Sabciinkii ahaa, saaq-dhegooluhuye

Imminkana siraad laguma helo, saanjad rooti ahe

Sed kaleeto daayoo ma jaro, shilinku saabbuune.

Qashin-saydh ayaan ahay u wadhan,

sayladaa Yurube

Qabyaduna wax-soo-saarka dhacay,

bay ka socotaaye.

Adhigii sawaaqiga ahaa, saadir geli waaye

Baydhaba safrihi uma kacaan, soofka geyn jiraye.

Sogsoglaydi Boorama cuntadu, waa ku suququule  
Garow sixin leh waayadan martida, laguma soorayne  
Salaadoow canbuuliyo la waa, muufo suugo lehe.

Sonkortii la miisaami jirey, suubbiskii ma lehe  
Laas-qoray tuniyo saaraddiin, saafan la is-daaye;  
Barnidii saraayaha baddee, soogan baa xidhaye  
Sidii murug Khaliijkii u galay, sebigi loo waaye.  
Qarafkaayo sigaarkii ayey, sicirki laaleene  
Haddaan lagula saayirin qaxwaha,  
toban ma siiyaane.

Saddexdii dhadhaar buu ka degay, dherigi saarraaye  
In dhawayd sambiiil lala ma gelin, meel sariibad ahe;  
Eeyguna siniintii ka waa, suuqi hilib-laaye  
Bisadaha sidaasaa ka dhab ah, siqaya kaymaaye.

Cashuuraha siddeed-laabmay waa, saaca waayaha'e;  
Bankiyada dul-saarkii kolkuu, saqafka soo taabtay  
Sarrif eegga kuma kaydsadaan, saalax-waatuhaye;  
Kolkii jeeggi socon waayey bay, god u samaysteene.

Safrad iyo shaqaalii wataa, suuqday gaajaduye  
Waxa yarey saxeexaana waa, saymo-lagu-reebye;  
Sacab iyo af kama soo hadhaan, silicay qaataane  
Xasanoow Allaa Saatiree, dhimay saboolkiye.

Haddii samada roob lagu og yahay, waa la sugi laaye  
Sibiq baa carriga looga baxay, Cumar Salaadoowe;  
Raggii calanka seeska u ahaa, seetaduu jaraye  
Kolkii saan la daba jiiday buu, soocankii baxaye;  
Suwayd iyo waxay daadsan yiin, tan iyo Sayloone

3.4. SAXANSAXO (17/10/1987)

159

Qaar baa saqaafii ku galay, Soofiyeetiga'e  
Wax Sawaaxil lagu sheegayaa, duul "sujuuwiya'e".

Berri-carab Sablaalihi iyana, samo ma sheegtaane  
Sunuudday u rogayeen la waa, beri sabeenaaye;  
Batroolkii Sacuudiga sidii, dhagaxa loo saaray  
Dadku sooryo uma raadsadaan, xaaji sida maale.

*Farraar Yeed ku sogan buu ku yaal,*

*Surad gadhkiisiye*

*Intaan samayda Beled-weyne taal,*

*Salay ka baadhaayo*

*Inuu saawir yahay waan hubaa, waranka Sooyaaane;  
Haddii seerahaygii la galay, waan ku soo simaye  
Kolkii aan siqsiqi waayey baa, keeno lay sudhaye  
Sacu dibiga Quulloow kolkaan, seeday buu dhalaye.*

Sannadkii xumaadaba dar baa, sahayda naanayse;  
Ragga siinka bawdada marsaday, way sajiilan yiine.  
Kolkii dunidu siriq-roortay buu, suulay dhaqankiye  
Ninba sidu u noolaan lahaa, suubbi falawgeede;  
Sinadiyo dhac iyo beentu waa, saaca waayaha'e.

Jahli lagu salliday baa shacbigan, saaray heeryada'e  
Kolkii taajka loo sudhay ayuu, simay dad-weynaaye;  
Sagaaluhu fas weeyaan kolkaan, yeeke soconayne  
Janjan baa subbeehiga 'cidda' ah, lagu salaamaaye;  
Cilmigaan tacsiyad siinayaa, Muuse Saxarowe.

Dhallinyarada seegseeggu waa, saaca waayaha'e  
Kolkii camal la siin waayey bay, suuqa tuban yiine  
Dumarkuna sinnaan waa la'yiin, suginamaayaane.

Sebiyada gidaarrada hurdaa, waa sabuul dhadhayee  
 Saglan waaye loomana oggola, inay saqiiraane;  
 Iyagoon lix sano gaadhin bay, wada sakhraameene  
 Waxay xabagta ugu soogan yiin, waxay saluugeene.

Nin safaarad Eebbahay ka galay, sananka meeraaya  
 Oo sujuudda lagu gawracaa, sebenkan waa koowe.  
 Kafadaha cadligu saaran yahay, abid ma soormaane  
 Saddexdiiba waa talis ku furay, Sulubaw xeerkiiey  
 Isagays ka saamaxay sharciga, suuxdimaa qaba'e.

Sakaaraba iddeed aas is-tidhi, saalo gegi taale  
 Dhaqaalaha sabbeeyee og-yiin, inay suldaareene.  
 Suuf baa dadkana loogu gurey, dhegaha Suudoowe  
 Suugaanta waxa loo bah-dilay, boogta yeey sarine;  
 "Sorgogobi" Amxaarkaw yaqaan, Soobbe oo kala'e  
 Ganacsiga silloonkii rag buu, saaray heegada'e;  
 Dar aan subax kallihin baa durtaba, seertay  
 dundiye

Ina Xoosh hadduu salaqsan jirey, wuu siyaadsadayee  
 "Socda" baa la yidhi waydin kaa, suxullo-gaabtiye.

Cunta-sixirtay waa diir hudhmada,  
 aan ku saxanayne

Ma saruurad-gooyaan waxay, siibayaan muruqe  
 Salkii xeedhadoo muuqda bay, suunka sii furiye.

Dabaylaha waxaa loo sakhirey, Nebi Saleebaane  
 Waa niman samayn kara milyaar, saacad gudaheede  
 Wax kastaba markii loo sahleey, sare u kaad-jeene.

Samadana kameey iman waxaa, rag isa siiyeene



Iyagaa saqiirkayga baday, suufta gaajada'e  
Saamigaygi baa laga tabcaday, sarahan dhaadheere.  
Samirkuna Hadraawoow wanaag, iima soo sido'e.

*Farraar Yeed ku sogan buu ku yaal, Surad gadhkiisi-  
iye*

*Intaan samayda Beled-weyne taal, Salay ka baad-  
haayo*

*Inuu saawir yahay waan hubaa, waranka Sooyaane;  
Haddii seerahaygii la galay, waan ku soo simaye  
Kolkii aan siqsiqi waayey baa, keeno lay sudhaye  
Sacu dibiga Quulloow kolkaan, seerday buu dhalaye.*

Dadku uur-samaantii ma laha, la isku soohnaaye  
Sin-bannaadii baa luntiyo, saafinnimadiiye  
Saaxiibka labadii ahaa war is-ma siiyaane;  
Sanqashiyo waxaa door la biday, suul-dhabaalaha'e  
Sankaa laysku tooydaa ransiga, sida ma-yeedhaane  
Salaaddaan xitaa laysku xidhan, subaxda iideede.

Tusbax go'ay sidiisii kolkii, uunku kala saydhmay  
Xeegada ninkii loo sallaxay, saani ugu laadye.

Markuu shalay Sandheeroow dabrada, Mudug  
ku saaraayey

Sahankuu ka meersaday inaan, hiil u soo socone;  
Sahal uma xasuuqeen haddii, garab la siin laaye  
Waxa loogu saasbulay iyaba, sagan-ku-daaqiye.

Maantana sarraafkii wuxuu, seemayaa Golise  
Salabaha Hargeysiyo Burcaba, waa ka siman yiine;  
Saddexdaa irdaha loo xidhaa, suuqa galabtiiye  
Inta siidhi loo tumo ayey, tiro ku seexdaane.

Sinji-xumada hoosaa ka daran, waxay

ku suubshaane

Inta laga salooshoo dhan baa, lagu sameeyaaye;

Soomaali waw koow da'deey, silic-dilyeeyaane

Sar-wejiga dad nool baa ableey, lagaga siibaaye

Surka daamur waxa loo gashaa, sulubyadoodiye.

Nin xishoonayaa oday sirqo ah, gacan ma saareene

Soddohaha raggoodii uu xidhay, kama sinaysteene

Saqajaanku ceebaha xilka leh, kama sarriigtaane.

Sentiyada habraha laga furtay, sado u haystaane

Saq-badhkaa irdaha lagu tumaa, reer sagaal qadaye

Duluciyo waxaa lagu socdaa, siliska naagaaye.

Ragga sibiqda loo laayey ee, yeeyda lagu sooray

Eey waranka siiyeen ka badan, saaca geedaha'e.

Waraabaha sirjiga meerayee, soofka didin waayey

Sararaha rag waaweyn kolkii, hadiyad loo siiyey

Ee uu sin-dheertii cunuu, daylo saamaxaye.

Cirka haadka seeraarku waa, suxul-mariiqoowe.

Soddoggii waraaqduu u direy, Moorgan socodsiye

Sidaamiyo Abboow buu ku furey, suuqyadii Herere

Sabbanoow nimaad tahay u dhimo,

waa Sahyuuniyade.

Sirtaa laga ilaashaa qofkii, sawd Waqooyi lehe

Xilka qaranka loo wada sidaa, laga sifeeyaaye;

Iska daa sareedada dhulkooy, ula sinnaadaane

Xitaa Siingasiinguhu intuu, helo ma siiyaane.

3.4. SAXANSAXO (17/10/1987)

163

*Farraar Yeed ku sugan buu ku yaal,  
Surad gadhkiisiye  
Intaan samayda Beled-weyne taal,  
Salay ka baadhaayo  
Inuu saawir yahay waan hubaa, waranka Sooyaane;  
Haddii seerahaygii la galay, waan ku soo simaye  
Kolkii aan siqsiqi waayey baa, keeno lay sudhaye  
Sacu dibiga Quulloow kolkaan, seexday buu dhalaye.*

*Salka xaajadaan laga unkini, ma laha saan-qaade  
Mar horaa sallaankii u jabay, "Maxay Saleebaane"  
Dan baa tidhi sacii Faarso nacay, keli saloognoowe  
Saadada raggii sheegan jirey, waa sukii weliye.*

*Maantana Samaalaha rag wado, "Sooray"  
baan idhiye  
Ninkii 'Dawladdii Sacad' raboow, iima seemanide  
Saambuusihiis laga addimay, waa sidaad tahaye;  
Soddohdaa ayaa kuu darrayd, say u eeg tahaye  
Sasar iyo mindhaa awlal way, kugu samaayeene  
Dhidar seel ku kacayoow hortaa, jireba siigeeye.*

*Afartaa sedkii Aadan Sheekh, sahaydi Koosaar dheh  
Waa iga salaan Aurrayaal, aan ku soo simaye  
Intaan suursanaa baa inaan, seexday lay filaye;  
Cirka dhiillo-saareenku waa, sahaansahaygiye  
Goortaan salkaadhiyey wataa, seleshay fintiiye  
Afar kale waxaan uga socdaa, wayga sixitaane.*

\* \* \*

Saddex laba u gee, laba ka goo, saxar ma doorshaane

Toban iyo siddeed iyo sagaal, saayid iyo naaqis  
 Senti keliya labadiisa dhinac, hay suluuluxine;  
 Sheekadu ka weyn saajinkiyo, gaalka saynta lehe  
 Halkan bay sunsumayaan dar aad, sudhato  
 mooddaaye.

Waxba yaan rag ii kala sarrifin, sawrac waaxid ahe  
 Shaadh kastuu sitaba waysku jaad, laba-ku-  
 seebshuuye;

Soddon baan tirsanayaa intuu, sahanku laalaaye  
 Weli Saan-cadkii igama tegin, aan sagootiyaye  
 Magligii Salaax lagu dilaa, qoorta ii sudhane.  
 Lixdankii siddii ii ekayd, layma solinsiine  
 Gabadhii sitiin een ka furay, saaxirkiyo tuugga  
 Dumaasheeda waw wada sinnayn, aniyo Suul-cayne;  
 Hadduu seed dhanaan igu og yahay,

kama sinaysteene  
 Imminkaa salkiisii hirdiyey, sahashigaygiye.

Buluuglaha sudh mooyee maxaa, hadhay  
 ma suurayne

Inaan sigib-tiraa layga dhigay, socodki dheeraaye;  
 Geeddiga rag baa ii sakhirey, soomalhaadka ahe  
 Kolkii suulka lay goday ayaan, dhigay sulaaxiye  
 Niyad-samidi waagaa jirtaan, wax iska saaraaye.

Nin sahiyey ku noqo baa u furan, laba sujuudoode  
 Imminkaan qallihi soomayaa, sula habboonaaye  
 Dib baa siigadii looga tumay, soodhadh baalidaye.

Dadka qaar salleeluu la yahay, sawdka baxayaaye  
 Saska waxa cadaawaha ku riday, soo-ma-waabtaha'e

3.4. SAXANSAXO (17/10/1987)

165

Shaxshaxoow dagaallada socdaa, waa  
sed aan qabo'e;  
Sanqadhuu ku nool yahay shacbigan,  
saaran daawuhuye  
Kuwa nacabku salabaynayaa, sahayda guulaaye;  
Sakaraadka waw baan kurbada, lagaga siibaaye  
Xabsiyada sumuucdiyo warkaa, loo sid-tiriyaaye;  
“Qac”da seeftu aabbaha goblamay, waa u samirsiise  
Shahiidkaan dabkaan sido qabriga, ugu siraadaaye.

\* \* \*

Ku darsoo intaan sigay intaan, talada saameelay  
Waxa badan intaan sugay intaan, seegayoo badane.  
Sacna raaf dambuu igu hayaa, saacna waa weliye;  
Ha yeeshee Siciidoow ishaan, saaka ku arkaayo  
Ma sahlana ammuuruhu haddaan,  
saafay moorada'e.

Maantana sidii waagi bay, leexo sidataaye  
Sinta waxay ku haysaa mar kale, siiqyo foorara'e,  
Sibqataye ninkii daadiyoow, kaama saamixine  
Ninkii xadhig-suryeeyoow waxaa, socota taariikhe.

Wax-wax baan safaad gelin haddii, lays xiniin-saro'e  
Siddaha xuubka caarada wakaa, aayihii sudhane;  
Soddonkiinan bay tahay inaad, suubbisaan talo'e  
Saqaf baad tihiin Kaahinoow, seesku dhiig yahaye  
Sahan-yahaw maqnaa beelihii, waydin sugayaane;  
Ninna sawd ma yeesheen haddaan, saynta loo buline  
Salka geed ka hurayaad tihiin, saar ka guud baxaye  
Hayin aynnu wada saarannahay, baa hor socotaane

Surraddiisa idinkaa u xidhan, saab hadduu jabo'e.

Surma-seegtadaydii horiyo, sogordahaan eeday

Laga yimi sinsaarooyinkiyo, saymahaan galaye

Maantaba sisibi waa jirtaa, yaan sibiibixane.

@SOMALIBOOKS

### 3.5 Hagarlaawe (1984)

Waxa isa soo taray weerarradii mucaaridkii hubaysnaa ku hayeen Siyaad Barre sannadihii 1983 iyo 1984. Sidaa aawadeed, wuxuu xoog uga dagaalamay inaan Soomaalidu u midoobin. Wuxuu bilaabay inuu iska hor-geeyo labadii qabiil ee ood wadaagtaba, isaga oo ka faa'iidayshanaya goldoloolooyinkii jabhadaha. Waana sababihii huriyey colaadihii sokeeye ee berigaa carriga Soomaaliyeed ku baahay. Arrintaas ayey tixdanuna ka dhalatay.

Hal madow araar iyo maanso  
Harawaati roob iyo mawjad  
Murti iyo higgaad nabad-doon ah,  
Waayahan haddeer ku salaysan  
Ahna diirad keebka hagaysa  
Berritana nin nool u hal-hays ah,  
'Haye cala salaa' mar kaleeto  
Dhoodaanna heestu ha gaadho.

Ma og tahay Hadraawi ma kuu war?  
Ma og tahay habaaska dalluumay?  
Ma og tahay hor-weynta la qaaday?  
Ma og tahay in Hawd laga guurey?  
Ma og tahay gabdhaha wada heermay?  
Ma og tahay rasaasta habawday?  
Ma og tahay hoggaanka la eeday?  
Ma og tahay Hadraawi ma kuu war?  
Ma og tahay "hiraay" da "wiraay" da?  
Hadhaciyo bardaha laga caagay;

Haradiyo biyaha godobaysan;  
 Naylaha haraaryadu laysay;  
 Shimbiraha dhirtii hadhsan waayey;  
 “Hiih!” diyo “hayaay!” da baxaysa.

Ma og tahay Hadraawi ma kuu war?  
 Ma og tahay nacaybka la huurshay?  
 Ooryaha asayda hagoogtay;  
 Hooyada baroorta naf moodday;  
 Aanada ilmaha ku hadaaqay;  
 Dhalashiyo hablaha dhaxdin seegay.

Ma og tahay Hadraawi ma kuu war?  
 Ma og tahay habaarka dhisaalan?  
 Halasaha dagaalka sokeeye  
 Dhallintiyo halyeeyada le’eday;  
 Gacalkiyo hilibaha is-xasunqay.

\* \* \*

Wadhi wadhi hoheey cakuyeey hoh!  
 Habbisada dadkayga la saaray  
 Haan-haanta loo kala soocay  
 Ma-huraanka laysku lisaayo,  
 Hurdankiyo gabaaro-gurdayska  
 Halaq baa ku raad-gadanaaya.

Isagaa hubkaysugu dhiiba;  
 Hanadada sidaa ku shidhaysta;  
 Dabadeed hamuunta ku reeba.  
 Isagaa habeen iyo maalin  
 Godobtiisa reer huwinaaya;



3.5. HAGARLAAWE (1984)

169

Hadba shaadh qabiil u tolaaya.  
Hindhisyaana saa qasab weeye  
Dadku waa inuu hargab qaado,

Wadhi wadhi hoheey cukuyeey hoh!  
Qoriyahaw hupsiino-la'aanta,  
Qoriyahaw hawaawi-dhacaaga,  
Qoriyahaw hinaase-la-boodku,  
Jugtu waa waxaan la hagaasay.

Meeshiyo Hargeysiyo Juubba  
Qoriyahaw halkaad cuskataaba,  
Waa haar korkayga ku taalla;  
Waa meel jidhkayga habaysa;  
Dhaawaca anaa u hafeefta;  
Giddi waa halboowle i qooman.

Wadhi wadhi hoheey cakuyeey hoh!  
Umalkiyo naftayda hadraysa,  
Hammigiyo sidaan u tol beelay,  
“Hiq”du waa anoo ladi waayey.

Haybtaydi baa is-cuneeysa;  
Garabkaygi bays wada heeray;  
Maradaydi baygu huraysa.

Kugu-dhimayo-kaa-dhimay waa huq;  
Rati heeryadiisa cunaaya  
Hungo waa sidaan ahay maanta;  
Dhanna hee dheh iima fayoooba.

Anigaa colaadda ku hoobtay  
Wiil iyo walaalba ka hoogay;

Anigaa hugaygu i diiday.

Imminkana haddaan la heshiinnin

Hibashada haddaan la dawaynnin

Hebel-yaa-lahaa la illaawin,

Himilooy wallee gabbalkaa dhac;

Talo-faro-ka-haaddaay mooyi;

Calanyahaw waxaad tahay loo-hadh.

Anigana hadhow iyo faallo

Halistaa inaan ka afeeftay

Oo weliba hiif iga gaadhay,

Hagarlaawe, ii geli buugga!

Taariikhda aan wax hilmaamin.

### 3.6 Maddaacale (1984)

Maxkamadda tixdanu ku socoto ninka eedayshanaha ihi waa Cartan-yare. Waa wiilkii canugga ahaa ee aynu kaga soo hadalnay maansadii *Kabo-Caseeye*. Wuxuu imminka hor-taagan yahay caddaaladda, isaga oo loo haysto inuu lacag iyo qalab kaleba ka xaday baabuur uu nadiifinayey. Cartan-yare waxaas oo dambi ah wuu qiranayaa isaga oo ku adkaysanaya inuu xisti daraaddii sidaa u yeelay. Marka sababta la weyddiiyana midh aan loo fadhiyin ayuu ku jawaabayaa. Wuxuu caddaynayaa in ninkan ku mudduciga ihi, isaga oo askartii gumaysiga ka tirsan, uu aabbihii oo gobannimo-doon ahaa dilay. Mar qudh ah ayaa la is-wada eegayaa, oo la fajacayaa, maxkamaddana dib loo dhigayaa.

Waa muunidii hore  
Qorraxdoo malliigyo leh,  
Mina-subax kaliileed  
Oo milicdu kulushahay.

Anoo maahsan weli baan  
Af muggii hamaansaday;  
Sidii ruux la miray baan  
Indhihii maraanmaray;  
Milshi baana igu jirey  
Iyo murugo hoosoon  
Sababteeda moogaa.

Arrinkana mucdiisiyo  
Halkii ugu macaydiyo  
Markii laysla oogsaday,

Tiiyoo la marayaan  
 Anigoon macnihi helin  
 Kala qaaday meeshii.  
 Durba waxan miliilicay  
 Oday miis ku foorara;  
 Oo maryihi hiddaha iyo  
 Maxamuudidii xidhan.  
 Ahna malaha, Ciisoow!  
 Intii aan muqlaysnaa,  
 Ninkii madasha soo galay  
 Ee “mood” la wada yidhi.  
 Wuxu furey maxkamaddii.  
 Oo madaxi sheekadu  
 Waa iga badh-maqanyee,  
 Walba uun mudducigii  
 Intaasoo markhaati ah  
 Uu marag u keensaday,  
 Dacwad muran ka oognaa  
 Intuu yarahe guud-maray,  
 Ayuu yidhi, ‘maddaacale  
 Maxaa lagu yidhaahdaa?’  
 Oo wiil marqaafyo leh  
 Murdisada ku sii goday.

“Cartan Maxamed Dhaashane.”

“Oo kuma ku magac-dheer?”

“Moogaan ku caan ahay.”

“Miyaad mehered haysaa?”

3.6. *MADDAACALE (1984)*

173

“Ragga macasha weyn baan  
Gawaadhida u maydhaa.”

“Baabuurka midabka leh  
Ee Meersandiiska ah  
Waxba maal kol laga xaday?”

“Mayee, waan xusuustaa  
Galab maalku dagan yahay,  
Mar inaan yar tiigsaday.”

“Xaggaad marisay lacagtii?”

“Maalin baan khammaar dhigay.”

“Oo muraayad-haaddiyo  
Marawaxaddi aawaye?”

“Saw taan masruufsaday.”

“Saa waa muftaaxiyo  
Dacasyadi madoobaa?”

“Mooyaan gar-sooroow.  
Xisti baan malaha dee  
Uga tuurey meel daran.”

Oo miridh hakadayoo  
Intuu sacabka midigta ah  
Ku masaxay ilmadi qaar,  
“Mooyaan” haddana yidhi.

“Iga daa munaafaqa  
Hooyaday Mullaaxiyo  
Aabbahay ku maqan yiin.”

Xaakinkii markaasuu

Isa soo melmelayoo,  
     “Kuma maqale, yaa” yidhi.  
     “Maxaa hooyadaa helay?”  
 “Hooyaday maxaa helay?  
 Maskaxday la’dahay, dee!”  
     “Maskaxday la’dahayaa?”

Wuxu yidhi, “miskiinaa!”  
 Oo murugo awgeed  
 Hadba shaarub miiqoo,  
     “Goormaa la maray?” yidhi.

Miciyaha intuu cunay  
 Oo midab-geddoonsamay,  
 Ayuu sheeko ma-hadhiyo  
 Laga reebay maahmaah  
 Meeshii ka sii waday.

Wuxu yidhi, “Macaaneey  
 Waxay tuurtay maradii  
 Milaygaan calool-galay.  
 Markaasoo ku beegnayd  
 Dhagax-tuur markuu dhacay.”

“Ingiriisku maantuu  
 Muqdishoo la sara-kacay,  
 Askartii ku meerreyd  
 ‘Mariyaay!’ intuu yidhi,”

Ninkan igu mudduciga ah  
 Oo saajin-miijii  
 Marxuunkii i dhalay dilay.

3.6. *MADDAACALE (1984)*

175

Muggaasaanay hooyaday  
Miyir ay is-daayen;  
Anna Mooge lay yidhi.”

Mar qudhaa la oogsaday;  
Oo lays miliilicay;  
Midh aan loo fadhiyin baa  
Murankii ku soo baxay;  
Mahaasaana dabadeed  
Lagu xidhay maxkamaddii,  
Mar dambaana loo dhigay.

### 3.7 Dhahar ‘Hadraawi’ (17/9/1980)

Maansadan waxaa curiyey Maxamed Ibraahim Warsame ‘Hadraawi’. Waxay ka mid ahayd tixihii uu dadka ku guubaabinayey. Wuxuu anigana igu weyddiiyey dhawr su’aalood oo aan tixda *Dhederbi* ee soo socota kaga jawaabay. Marka aad iyada akhridid ayaad ta ka dambaysana fahmaysaa.

Dhamme Maxamed Xaashoow,

Ina Xaashi Dhamacoow!

Dhaadmada dareenkiyo

Dhacdada iyo waayaha,

Ninka ila dhadhamiyoow!

Jiilaalki dheeraa;

Dhulka xaabki ka idlaa;

Dhalmo-days cirkii noqoy;

Dabka dherigi saarraa

Dhagxantii bislayn waa;

In kastoo dhir yaab-liyo

Dhamac xoog leh lagu shiday,

Ma dhadhaab nuglaadoo

Sida dhaylo suulkiyo

Lagu goosto dhooshoo

Hilib laga dhigtaa jira?

Dhamme Maxamed Xaashoow,

Ina Xaashi Dhamacoow!

Dhahar waa ninkiisii;

Darajadu dhibtiisiyo



3.7. *DHAHAR 'HADRAAWI' (17/9/1980)*

177

Dhaawaciisa weeyaan;  
Dhalanteedka beentiyo  
Dhaymihiisu waa faan.  
Shilka dhacay ma moogee  
Isagiyo dhanqalatada  
Dhacantaa u kala rogan.  
Wuxu yidhi, “dhibaha jira,  
Dadku baahi dhigatoo  
Lafahooda dhuuxdiyo  
Dhugateey la jiifaaan,  
Arrin aan dhagaystoo  
I dhacaysa maahee;  
Waxa aad dhafoorkiyo  
Dhabannada la haysaan  
Maqasheey ka dhego-lee,  
Hadday tahay dhaqaaliyo  
Hadday tahay dhismaha guud  
Ka dardaarmay dhawr jeer;  
Hadal kuma dhabcaalayn;  
Waxa weliba ii dheer  
Dhambaalkiyo wareegtadu  
Weligood is-may dhimin.  
Anaa guusha dhaliyee  
Dadka wada dhergaan idhi;  
Waxa hadha dhigtaan idhi;  
Dheddig iyo lab waan simay.  
Dhuxdhux iyo faq hoosiyo  
Dhagar-qabe ha joogtee,

Weli ruux dhammaysoo  
 I dhaliila maan arag.  
 Dhugashada kor-meerkiyo  
 Dhaabbaddiyo faagaaraha,  
 Dadku sacab is-dhaafiyo  
 Dhagdhag iyo mashxarad bay  
 Igu soo dhaweeyaan.

Dhan kastaba magaalada  
 Inta ay sar dheer iyo  
 Dhabbo iyo jid leedahay,  
 Inta dheeh far-shaxan iyo  
 Waxa iigu dhigan faan  
 Dhaayihiinnu ha arkeen.

Dhug u yeesha maansada  
 Dhubbad-qaadka heesaha  
 Abwaan dhaatay suu yidhi:  
 “Miyaa ruux i dhaamoo  
 La i dhaafsho haysaan?  
 Dhallinyariyo waayeel  
 Dhabba aan u hadallee,  
 Haddaan dhigo xilkaan sido  
 Yaa u dhiibanaysaan?”

Dhamme Maxamed Xaashoow,  
 Ina Xaashi Dhamacoow!  
 Kolley buuxsan dhiilkii  
 Toban saniyo dheeraad  
 Lagu dhurayey ciilkoo  
 Lugtu jeeni dhaaftee,

3.7. *DHAHAR 'HADRAAWI' (17/9/1980)*

179

Dhaadashadu ma sugan tahay?

Dhumuc iyo ma xoog baa?

Dhillowyahankan geedkii

Lagu beeray dhiiggiyo

Dheecaanka wadhatada

Dhexda tolow iskaga maray,

Dhirta maw ab-tiriyaa

Sida dhalashadeediyo

Dhaqankeedu kala yahay?

Mise wuxu ka dhigan yahay

Habartii mar dhoofta

Doonnidu la dhacante,

Badda dheelligaadiyo

Dhaxantiyo dabaylaha

Dhawawelen ka qaaddee,

Iyadooy dhaqaaliyo

Nafba kala dhaqaaqeen,

Ka dib dhawr ayaamood

Salka dhigatay ciiddee;

“Dhuloow, kaama kaco!” tidhi.

Dhamme Maxamed Xaashoow,

Ina Xaashi Dhamacoow!

Cashaday dhaharatee

Geelu dhimo hadhuubkee

Dhaqayyo galoof yahay,

Rag ka dhoofa baa jira.

Dhamac iyo hannaan iyo

Saddex dhaqan wadaagtoo

Isu dheelli-tirantaa  
Dhuuni lagu bislaystaa,  
Gaariyow, dhardhaarrada  
Kol haddii mid laga dhigo  
Rag dhuyaala baa jira

Maalintay dhanaan tahay  
Rag dhirbaaxo quudheed  
Inta ay ku dhaashtaan,  
Xiddigaha is-dhalan-roga  
U dhufaanan baa jira.

Inta qaran dhiskiisiyo  
Dhidibkiisu taagnaa,  
Dheeraad nin dooniyo  
Nin ku dhega xaqiisoo  
Dhacsanaayey baa jirey.

Dhederbiga colaadaha  
Rag hadduu dhabiltamo,  
Fule dhimashadiisaa  
Dhawr jeer noqnoqotee,  
Wax la yidhi dharaartaas  
Ninka dhiirran geeridu  
Isagay la dhalatee;

Hasha dhaxal-wareegtiyo  
Dheeha furashadeedana,  
Kelideen dhunkaashiyo  
Higta caara-dhuubtiyo  
Dhugta kuma go'aynee;

3.7. *DHAHAR 'HADRAAWI' (17/9/1980)*

181

Haddii laysu jilib-dhigo  
Kumanyaal dhiggeennoo  
Waxba dhawrsanaynoo,  
Sida awrka Dhaameel  
Dhoomuhu gubeenoo,  
Dhibta kula wadaagoo  
Isu dhaarsan baa jira.

Dhamme Maxamed Xaashoow  
Ima Xaashi Dhamacoow!  
Dhidarkuba xabaalaha  
Uma dhaadhaceenoo  
Kuma dhiirradeen ruux  
Celin kara dhawaaqee,  
Kolkuu maydka dhiilliyo  
Dhaqdhaqaaq ka waayuu  
Hore ugu dhawaadaa;  
Dhinacyadiyo feedhaha  
Muruqyada ka dheegtaa.

Kol haddii dhawaaqiyo  
Dhiciisobay gabaygii,  
Dheg-ka-maqal ha joogtee  
Lumay dhaqan-galkiisii,  
Sheekadu Dheg-dheer iyo  
Dhoor-daalis noqotee,  
Gaarriyoow, dhammaadkiyo,  
Halka ay ka dhawdahay,  
Dhakhso mawgu gudubnaa?  
Bulbulahan dhabbacashada

Ku madhsaday dhallaankii,  
Lafta dhabarka ka habsaday  
Waayuhu dhirbaaxeen,  
Dhaa-dhaada taahiyo  
Dhuun-yeedhis mooyee  
Sida kale u tamar-dhigay,  
Beri buu dhinbiil iyo  
Dhuxul dab ah ka kululaa  
Weli lagaga dhawrsado,  
Xaajadu ha dhabaqdee  
Dhabba maw abbaarraa?  
Dadka dhiillo culus iyo  
Dhakafaar ma gelinnaa?  
Dhagar maw badheedhnaa?  
Wedka maw dhadhaminnaa?

### 3.8 Dhederbi (30/9/1988)

Maansada *Dhahar* ee kor ku xusani su'aalaha ay i weyddiisay waxaan ka jawaabay siddeed gu' ka dib. Waqtigaas oo ugu hab-boonaa isaga oo ku beegnaa markii ciidamada S.N.M. ay madax-madaxa isugu tuureen magaalooyinka Burco iyo Hargeysa. Sida la wada og yahayna nabarradii lagu gaadhsiiyey weerarradaas, ayaa ka mid ahaa dhaawacyadii ugu darraa ee taliskii Siyaad ka soo waaqsan waayey. Tixduna arrintaas ayey qaadaa-dhigaysaa.

Dhereroow waxba ha tarin!

Dhumuceey bar-kuma-taal!

Himilooy warkaa dhimay!

Afku wuxu ka dhawrsaday

Dhafooroow adaan qarin!

“Dhega!” maalintuu yidhi,

“Dhallin, saaddambaad garan!”

Sheekaduu korkaw dhigay,

Isba wuxu la dhaygagay

Dhagartuu ka digi jirey

Sidii looga dhayalsaday.

Dhuxdhuxdiyo faqii shalay

Muqdisho ka dhacay Herer

Beentiyo dhuhlayntii;

Dhadadiyo xayaabada

Nimankii dhab-dhabi jirey

Nimankii dhadhabi jirey

Lafba badhi kamay dhugan;

Ilaahayna kama dhigin.

Aniguna “dhug” tii baan  
 Anigoo dhacdiidsaday  
 Dhagidii ka toosoo,  
 Geneyoow dhan loo dayo  
 “Dhigta udubka diiddee  
 Dhacday iigamay darin.”

Adiguna dhacclaaleey!  
 Dhacle darayamuusleey!  
 Dhacda-yahay labaad tahay  
 Laba dhinac ayaad tahay.  
 Dhaqan iyo dhur baad tahay.  
 Dheddig iyo lab baad tahay.

Dhabba-yahay madaareed!  
 Is-dhaaf-dhaafintaadiyo  
 Dhaweyntiyo sagootiga,  
 Gartay inad dhammaad iyo  
 Dhafaneey bilooow tahay  
 Dhafan-dhaaf isugu jira.

Aniguna dhex maan ihi  
 Dhexdhexaad kamaan ihi  
 Xaajadan dhan baan ahay.

Adiguna dhawaaqiyo  
 “Dhammoow!” yeedhmadaad tidhi,  
 ‘Ina Xaashi Dhamacoow!’  
 Kuudhalay Hadraawoow!

Marka xiga, dhiggaygoow!  
 Haddaan ahay ma-dhuuntoow!



3.8. *DHEDERBI (30/9/1988)*

185

Dhaadmada dareenkiyo  
Dhibaabaha adduunyada  
Ninkii kula dhadhamin jirey;  
Ma dhawayn kolkaad tidhi:  
“Dhidarkuba xabaalaha  
Uma dhaadhaceenoo,  
Kuma dhiirradeen ruux  
Celin kara dhawaaqee”,  
Wuxu “maydka dhiilliyo”  
Dhiif iyo sidaad tidhi  
“Dhaqdhaqaaq ka waayuu  
Hore ugu dhowaadaa.”  
Wax ku dhacayba waayadan  
Dhasalaalaqii iyo  
Durba xawliguu dhimay,  
Inuu dhamac ku joogsaday  
Dheeh igama saarree,  
Waxba dhawrkan maalmood  
Lug baa jeeni dhaaftoo,  
“Dhalaw” tidhi ma maqasheen?  
Qarankii dhiskiisiyo  
Intuu dhidib ku taagnaa,  
Dheeraad nin dooniyo  
Nin ku dhegay xaqiisoo  
Dhacsanaayey saa tidhi,  
Labadaysu dhinac yiil;  
Dhagartuna ka oognayd  
Qardoofada dhexdooda ah.

Waxay dhaalacyeysaba  
 Waxba dhawrkan maalmood,  
 Dhoontii madhnayd iyo  
 Dhaanjigii fatihi jirey,  
 Isku dhace ma maqasheen?

Beladii shin dhaaftee  
 Toban saniyo dhiidhii  
 Intaa dhaysinaysee  
 Nin dhursugayba raagsaday,  
 In kastooy sid dheerayd,  
 Laga dhali ma maqasheen?

Dhederbiga dadweynuhu  
 Duufaanka kama dhaco  
 Doonyaha dhirbaaxee;  
 Waxba daadka dhirifkii  
 Moosaskiyo dhufayskiyo  
 Dhacantiyo gidaarrada  
 Dhaadheer ka boodee,  
 Shalay dhuun-castii Golis  
 Iyadooy dharaar tahay  
 Xarumaha dhexdoodii,  
 Ka dhufsaday ma maqasheen?

Ma dhawayn kolkaan idhi  
 Jiilaalka dhaharteey  
 Dhalmo-daysay samadii,  
 Ninkaa dhababtay ceelkii  
 Ka dhexeeyey wadhatada  
 Isna dhaansan maayee,

3.8. *DHEDERBI (30/9/1988)*

187

Wax la wadoba dhiiqiyo  
Dhidarkii xabaalo-qod,  
Qudhun ma uga dhaadhacay?

Deegaanyo dhabatiyo  
Dhulka hadaw ma kaga kacay?  
Cirku danab ma laba-dhigay?  
Ma dhaqaaqday ciiddii?

Ninkii dhaatayee yidhi:  
“Haddaan dhigo xilkaan sido  
Yaa u dhiibanaysaan?”  
Ninkii dharta mari jirey,  
Ma ka dhabaqday xaajadu?  
Wuxu dhawrka odhan jirey,  
Ma ku daalay dhoorkii?

Dayro-dhaafyadaa galay  
Waxaa dhaxanta loo go’ay,  
Durba dhidid far waaweyn  
Ma ka duugay dhabannada?

Ma-dhintoow Siyaaddii  
Aabboow-ha-dhicintii!  
Dhag-dhagtiyo mashxaraddii,  
Miyaa geeso dhiigliyo  
“Dhugcay” lagu sagootiyeey?

Dheecaan macaan iyo  
Haddaan dhabaq ahaa beri  
Dhadhankiisa loo bogay,  
Maantaba dhurdihi mamay

Markay dhabi dhabteed timi  
Dacar ma u dhadhamayaa?

Dhiddin iyo raggiisii  
Deris adag ma loo dhigay?  
Ma dhalaalay barafkiyo  
Dhedadiyo hummaaggeey  
Ka dhisteen mandaraduhu?

Afartaas war kala dhiman  
Isagoo dhan waa sidan:

Burbur iyo dhibaabiyo  
Dhafar iyo qaxootiyo  
Dhudiyeey qasaaraba  
Rag dhabiiltamaa lehe,

Mar haddaan hengelo dhigay  
Dhimashana ka wada simay  
Dhahar iyo ragna is-baray,  
Allaylehe kar baa dhacay.

Hashuu gurey dhaloombiyey  
Dhanna uma fayoobee  
Kol hadday dhib ii tahay,  
Waxa dhab ah Salaanoow,  
“Haddaad dhimato geeridu  
Mar ay nolosha dhaantee,”  
Ceebtiyo dheg-xumadii  
Dhugatana ha daacdee,  
Bagaa rag uga dhiidhiyey.

Bagaa laysu jilib-dhigay;

3.8. *DHEDERBI (30/9/1988)*

189

Wixii lays dhacsiiyiyo  
Bagay dhicisay beentii.

Hubka dhuunta ka onkoda  
Iyo dhagarta miinada,  
Bagaa dhabar-adayg iyo  
Sahraay jiiibka laba-dhaca,  
Dhenged iyo ableey iyo  
Dhagax loogu babac-dhigay.

Baga бага Jikraha dhacay!  
Baga бага dhulkaan labay!  
Baga бага shilkaan dhigay!  
Baga dhoomahaan riday!  
Nimaan dhiili soli jirin  
Bagaan dhiil yar ugu shubay.

Intay belo dhud leedahay  
Dherer iyo ballaadh tahay  
Waa la ii dhudhumiyoo,  
Dheegoow adduunyada  
Qabar ii dhinnaayoo  
Dhacayaa ma noolee,  
Bagaa laysku dhegegsaday;  
Bagaa dhuunta la is-muday;  
Bagaa nabadda dhaawacan  
Cirka looga xero-dhigay.

Ma dhawayn kolkaan idhi  
Wax buraashad lagu dhuro  
Badi way ka dheertee,  
Baguu Ina Dhal-baasoow

Dhulkiiyoon tin laga goyn  
Xaaqinkii dhammaad yahay.

Haddii laaggi lagu dhacay  
Dhaaxo aan ka digi jirey  
Dhabarkana rag kaga jabay,  
Anba layma dhaahine  
Wixii dhumaya yeelkii.

Jiilaalka dhidibsaday  
Xay-dhool nin maalaa  
Damba-same ku dheeryee  
Haddaan dhacarto ii furan.

Intaan dhoobbigaa ahay  
Waxay dhiiqdo Maan-deeq  
Dhal waraabe ula siman,  
Waxba dhayda qubatee  
Dhami-jire ku sama-qabay  
Ku dhabriiran maayee;

Nin dhadhaaran jirey baa  
Dhuuniga la waayiyo  
Dherigaw darsanayee,  
Kol haddaanan dhereg qabin  
Dheglaydaan ku shubay waa  
Dhan kastaba ha lagu qado.

Adiguna Dharjaanoow!  
Maanshee dhurwaa-yahaw  
Dhaadhaada taahiyo  
Dhuun-yeedhis mooyee

3.8. *DHEDERBI (30/9/1988)*

191

Sida kale u tamar-dhigay;  
Waaryaa Dhabaajuur!

Adigoo dhul-bi'iyee ah  
In yar maad is-dhuubine,  
Mar haddaan dhabtaadii  
U ban-dhigay adduunyada  
Wayso kuuma dhawrree,  
Bahalkii isaga dhuro  
Dhaqankaagi waxashnimo.

Dharka aadminimadee  
Bixi kugu dhibaadda ah,  
Dhilli toobal-caaraha!

Dhiillada waqooyiga  
Ka dhisaalan maantiyo  
Nin dhegaystay raadyuhu  
Shilka dhacay ma moogoo,  
Inaad gacan-ku-dhiigliyo  
Tahay dhaylo-dubatiyo  
Dinnaddii dhasheed-cuna,  
Dhoorreydaa ogaatoo  
Dhegi kuuma noolee,  
Intaad dhigato haylaha  
Xidho dhoollahaagii  
Dhogortiyoo miciihihi  
Iyo dabadi dheerayd.

Waxsaan loogu dhololo'in  
Dhagar aanad nagu falin  
Dhigimaysid maantee,

Ma cirkaad dhan soo ridi?  
Wax ma dheera kaaruhu  
Kuwaan shalay dhadhaabtiyo  
Ku dhacsaday ablaydee.

Haddaad wiil dhug badan tahay  
Anna dhoombirkaygii  
Waxan geeyey dhuuntee,  
Maantaba Dhabboosoow  
Labadeenni dhinac bay  
Xeegadu dhex taallaa,  
Dhawr goolla kugu tage  
Dheeshiina waa weli.

Cayn iyo Tog-dheer iyo  
Dhamal iyo Hargeysana  
Dhul-gariirka ruxayaa,  
Adigoon is dhega-marin  
Ilaa Dhoobay weeyaan.

Haddii dhawle kugu ciyey  
Dhiddinoow fandhaal iyo  
Waxba xeedho kala dhacay  
Ha ka guud dhareerine,  
Wax isaga dhig geerida  
Waadigii ka dhaartee.

Jikraa kugu dhawaaqee  
Dhakafaarka kugu riday  
Cir-ka-soo-dhac maahee,  
Nin dharkayn mud-mudayoow,  
Waxaad dhigatay weeyaan!



3.8. *DHEDERBI (30/9/1988)*

193

Dhito biirtay weeyaan;  
Carro dhabaqday weeyaan;  
Bulsho dhiriftay weeyaan;  
Dhirtaad xagatay weeyaan;  
Mankaad dhadhisay weeyaan;  
Dhashaad jalisay weeyaan;  
Dhagax iyo dab weeyaan;  
Dhamac iyo kul weeyaan;  
Dhalashiyo haweenkii,  
Dhaxdin seegay weeyaan.

Dhulkaad gadatay baa laban;  
Dhidhkaad hurisay baa shidan;  
Dhibkaad geysataa badan;  
Laftaad dhuuxday baa jaban;  
Luddaad dhilatay baa qalan;  
Xinjirtaad dhigtaa wadhan;  
Waxaad dhaaftay lama arag.

Adna nabadi kaa dheer;  
Dhumisaye ha raacdayn;  
Dhacantaye ka soo leef;  
Dhambashaye nin qoomoow,  
Hadday doonti dheeliday  
Dhimataye ku taagnoow.

May ahayn dhug-laawoow  
Adoo dhalo ku hoos nool  
Inaad dhagaxyo tuurtee.

Dhubuqdhubuqdi weeyaan  
Durba dhabana-haystuye,

Dhagar-qabe haddaad tahay  
Bartay dhiigga wadhatada,  
Anba dhuunta fadhatada  
Bartay meesha lagu dhego.

Haddaan dhoohanaan jirey  
Dhabandaadsanaan jirey  
Daharoor baraarugay.

Dhaaxiyo wax badan baad  
Adoon dhogor lagaa goyn  
Dheegaggayga dubatee,  
Dhafoor-taabadkii iyo  
Dhukh-dhukhdiyo sidii hore  
Dhici mayso dabadeed.

Waana dhaabad noo xidhan  
Dhankayaga dad-weynaha  
Intay dhoocil gaban iyo  
Inan dhoor li nooshahay.

Annagoo dhibiijooy  
Iska kaa dhibayniyo  
Annagoo dhammaanaa  
Isu kaayo dhinac taal.

## Cutub 4

### Googoos

Tixo badan oo mawduucyo kala duwan ku saabsan ayaa qaybtan ku jira sida tixaha *Siinleyda* oo uu abwaanku ku lahaa.

## 4.1 Aadmi (14/6/1973)

Maanso weeye ka hadlaysa qabka iyo islaweynida ku jirta banii-aadmiga oo u haysta wax kastoo dunida ka jira in isaga daraaddii loo sameeyey. Wuxuu koonka waxa jooga u qabaa isaga awgii in ay u jiraan oo u adeegaan.

Aadmiyahaw hallaysani!  
Ambadyahaw wareersani!  
Maqal ereyadaydoo!

Buuraha ag joogsoo  
Amakaag daraaddii,  
Ilmo gabax ka siiyoo!

Cirka sare u eegoo  
Xiddiggaha astaysoo  
Arag felegga meeroo!

Onkodkiyo hillaaciyo  
Ufadaa dhacaysiyo  
Uurada waraysoo.

Ololkeeda Gooraan  
Aammus oo dhegeysoo  
Shimbiraha la ooyoo.

Badda “aw”-da haysiyo  
Waxa uurka ugu jira  
Axadhoo garwaaqsoo.

Dhulka aad u baadhoo,  
Webiyada ordaayiyo

4.1. AADMI (14/6/1973)

197

Daruuraha indheeyoo.

Oogada jalleecoo

Ciirada aroortiyoo

Dabaylaha af gara oo.

Uduggooda kaymaha

Urso oo jeclaysoo

Ku ilwaadso dooggoo.

U abtiri naflaydoo

Ayaamaha tilmaansoo

Aabiga bilaashka ah,

Waa inaad illowdaa!

Afaggaalayaashiyo

Cadceeddeenna oloshiyo

Awarka samada yaa yidhi,

Aadmigay u shidanyiin?

Ifkoon cidi ku uunnayn,

Miyaan Dirirku oognayn?

Urrradu miyaanay

Kaa ayni weynayn?

Ilayskooda goormaa

Loo daaray awgaa?

Hadmaa felegga oosha ah

Amar buuxa lagu yidhi

Ku ekaw dadkoo qudha?

Haddaad eegga madhataan,

Miyaanuu iftiimayn,

Sidiisaa ahaanayn?

Aadmiyahaw hallaysani!  
Amarkaagu waa been!  
Waxaad uur wadaagtaan  
Ugaadhaa wareegtoo  
Ugbaadkiyo caleentaad  
Uur wada gasheenoo.

Uumiyaha dhammaantii  
Ilma-adeer gudboon iyo  
Isir baad tihiinoo;  
Noolahaad arkaysaa  
Waa ul iyo diirkeed;  
Waa sida indhaha oo  
Kolkay midi ilmaysaa  
Ta kaleeto ooydaa;  
Looma uumin keligaa  
Inay kuu adeegaan.

Ammuuraha badh baa sir ah;  
Sida xaal u eg yahay  
Ujeeddadu ka xeeldheer.

## 4.2 Hayaan (1979)

Waxay maansadu halkan noogu sheegaysaa in cilmigu yahay horseedka nolosha aadanaha. Waxay dadweynaha u tilmaamaysaa oo farta ugu fiiqaysaa in aqoontu tahay lafdhabarka horumarka bulshada. Sidaa awgeed ayay ummadda ku dhiirrigelinaysaa, yar iyo weynba, inay ku dadaalaan sidii ay wax u baran lahaayeen oo noloshooda, mid gaar iyo mid guudba, u horumarin lahaayeen.

Hayaanku ma meel fog baa?  
Hillaacu ma beegso baa?  
Habeenkii socod miyaa?  
Hadhkii ma ha seexan baa?  
Waqtigu ma haloosi baa?  
Ninkii hakadaa boqoolka,  
Habaaska miyuu dhaxlaa?

Quruumahan hore u guuray  
Barwaaqada haybsanaaya,  
Intaad higsan layd gadaasha,  
Hareerta ka raac miyaa?

Hadduu maalku kaa harraado,  
Harooyinka gee miyaa?  
Hurdada ku danseeg miyaa?

Adduunyada waa hadhkaasi;  
Hirba hir daba socdaaye,  
Hankaaga fogee miyaa?  
Hawshaadu ku toos miyaa?

‘Hubsiiino hal baa la siistaa!’  
Halkii daran baahidaada,  
Hantida u qorshee miyaa?  
Dantaadu ma haybi baa?  
Aqoontuna hodan miyaa?  
Iftiin iyo hibo ku ladhanoo,  
Indhoolaha haga miyaa?

Waxaa cirka lagu hujuumay;  
Waxaa dhulka lagu hubsaday;  
Waxaa badahaas hugmaaya,  
Bidhaansaday guntooda hoose;  
Waxaa uumiyaa hanuunshay;  
Waxaa cudurkii halgaaday;  
Waxaa jahligii haleeley;  
Waxaa gaajadii hirdiyey;  
Horseed cilmiyeed miyaa?

Dadkaa heegada isgeeyey;  
Dadkaa haqabbeelka gaadhay;  
Hubqaad kaga dayo miyaa?

Ninkaa buurta roobku heley,  
Gunteeda ka heesayow,  
Figteedaa nolol habboon!



### 4.3 Tanaad (1972)

Waa maanso soo baxday markii 'Far Soomaaliga' la qoray. Wax-  
aan ku maamuusayey dhacdadaas taariikhiga ahayd ee muddada  
badan laga dhur-sugayey.

Caalinow, Ta' iyo Woow,  
Bal tixraac halkaan maro!

Tukayaasha duulaa  
Warka waysu tebiyaan;  
Waa af-tahan qudhaanjadu.

Geeluna tawaawaca  
Kolka biyaha loo tubo  
Ways tibaax yaqaannaa.

Tigaaddaad arkaysaa  
Kaftan ay taqaannay  
Hoos-ka-tuur u leedahay.

Taaha adhigu waa hadal  
Urtu waysku tooydaa;  
Toggagiyo dabayluhu  
Tookh bay la reemaan.

Tinkir buu aboorkuba  
Toos ugu xidhiidhaa;  
Daruuruhu tub gaadhay  
Heesaha u tiriyaan;  
Dhulku wuu tiraabaa;  
Tuska roobka dayruhu  
Onkod buu ku taamaa.

Waxay hoga-tusaysaa,  
Afku nolosha waw tiir  
La'aantiisna tuur iyo  
Tulux lagama waayeen,  
Tayo may lahaateen  
Dhaqan lama tallaaleen  
Qaran lama tusmaysteen,  
Nin kastaa ha tookhee,  
Far baa lagu tanaadaa.  
Haddii qalinka loo tudho  
Wax-qoraalka laga tago,  
Lama taabbageli karo.  
Waaq iyo Tinniix iyo  
Bal Tin-caaro weyddii,  
Soo tiri ayaamaha,  
Taariikhda raacdee!  
Afkaygow, tabaaliyo  
Maxaad taws ku nooleyd!  
Maxaad belo u taagneyd!  
Shisheeyuhu tab iyo xeel  
Muxuu kugu tuntuunsaday,  
Tisqaadkaaga dhaawacay!  
Maxaa gabay tilmaannaa  
Maahmaaho toolmoon  
Maalmuhu tireenoo  
Qalbigaygu tebayaa!  
Maxaa erey tafir-go'ay!  
Maxaan maanso teeri ah,

4.3. TANAAD (1972)

203

Tacab ba'ay ka joogaa!  
Sida ay u taxan tahay  
Murtidaadu tabanaa  
Teelteella badanaa!  
  
Maxaa sheeko taabud ah  
Tawraadi faallayn  
Weli nebina soo tebin,  
Kaa tasoobay oo lumay!  
  
Ubadkaagu toos iyo  
Maxay talada seegeen!  
Maxaa taar mid soo diray  
Ka kaleeto tuuroo,  
Laba tulud wadaagtaa  
Turjubaan u baahdeen!  
  
Qoraalkaagu tacab iyo  
Muxuu dhigay turxaannoo  
Tartan ba'an aloosoo  
Colba doc iska taageen!  
  
Allaylehe tabtaan rabay  
Haddaa lagu tixgeliyoo,  
Tacluustii wadeecada  
Caawaba ka togatee,  
'Taw wiif' ka siiyoo,  
Taltallaabso maantoo,  
Murtidaadu waa toge!  
Taageer hiddaha oo,  
Sayidkii ku toosoo,  
Taabsii xogtaadoo,

Ku tirow Balaayacas!  
Soo toosi Haabiil!  
Raage taranta gaadhsii!  
U tukubi higgaaddoo,  
Soddon tirada dhaafsii!  
Toban shaqal ku geeraar!  
Shibbannaha ku taakuli!

Hadal lama tasoobee,  
Guddigii ku tiirshee  
Kugu taxay xuruufaha,  
Mahad iyo tahniyad sii!  
Taalladay mutaysteen,  
Ka dul-taag Cirjiidhyada!

@SOMALIBOOKS

## 4.4 Dhallaannimo Hufnaydaa (1973)

Habeen baan filim magaalada Burco ku daawaday. Guri baa waxa u soo dhacay budh-cad hubaysan. Ninkii iyo marwadii aqalka lahaa bay sariirtii ku dul-gawraceen. Waxay gacan la haleeleenna way qaateen. Cabbaar yar ka dib ayey gabadh yar oo ay dhaleen toostay. Xoolkii bay ka soo degtay. Markiiba waxay dareentay caruusaddeedii yarayd oo, shaw inta la isla jiidhay, dhacday oo meel ku sii foorarta. Iyada oon dhiillada kale ee dhacday dhaadin, ayey caruusaddeedii ku boodday oo dhunkatay; dabadeedna aayar iska seexatay.

Arrintaasi ayaa waxay i xusuusisay dhallaannimadaydii iyo wanaaggeedii; waana dulucda maansadu ku aroorayso.

Garo oo Hadraawoow!  
Waxan ahay hayaanoo;  
Hayin gibil-ma-diiddoo  
Wax harraatayaynoo  
Hoobal geed-adayg ihi,  
Qarqarsiyey habeenoo  
Hab-samaan kabaallada  
Haamaha ku giijoo,  
Wixii lama-huraan iyo  
Surraddii habeeyoo,  
Kabaddoo hariiryo leh  
Hareeraha ka muujoo  
Haybaddiisa yaabtuu,  
Guradiisa hoy iyo  
Hurin iiga dhigayoo,

Anigoon wax hadihayn  
Hurdadii i saaroo;  
Habqan ii baxaayiyo  
Hardafkeeda beeshiyo,  
Dunuunuca hor-weyntaan  
Hugunkii ku toosoo;  
Hogol biyo-dhiggeed iyo  
Inay hawkar joogaan,  
Inay dawga haystaan  
Iyo inay habaabeen,  
In hadhaa dambeeyoo  
Higsad ay yihiin iyo,  
In handaadub jira oo  
Kii haleeli karayaa  
Hananaayo maatada;  
Halka laga qaxaayiyo  
Hirashadu dhankay tahay,  
In kastoon hawaawiray  
Hadal buuxa waayoo  
Talo wayga hoostee.  
Garo oo Hadraawoow!  
Heehaabad baan oo,  
Waqtigaan halleeyee  
Hore aan u lumiyee  
Huubadiisi laacaan,  
Hiirtaanyadiisii  
Weli hibanayaayoo;  
Hillaacii “dam” yidhi baa

4.4. *DHALLAANNIMO HUFNAYDAA (1973)*

207

Hiyigayga qaadee,  
Maalmihii hulleeliyo  
Dhallaannimo hufnaydaa!

Tiiyoo hir doogliyo  
Reerku hooso yaalloo,  
Seer-ma-weydu hoortoo  
Haradiyo jidhaamaha  
Calcalyadu hadhaysoo,  
Aniguna habraha iyo  
Ku dhex jiro haweenkoo,  
Dadku ii han-weynyoo  
Hawl lay direeynoo,  
Hadhacooda kaymaha  
Shimbiraha la heesoo,  
Hanad kale inuu jiro  
Haabkayga gelinoo,  
Keliday halyey-yaa  
Wax-kasku i haleelee  
Dhallaannimo hufnaydaa!

Hooyaday dhabteedii  
Ma hilmaami karo oo,  
Horaadkii wacnaayeen  
U hamuumi jirayee,  
Hoodo laguma waaree  
Heensaday duxdiisiyo,  
Marka aan hintaaqmaba  
“Hobbo”dii adoogeey  
Hadba igu sabaayiyo;

Geyaankii hablaha een  
La hal-maali jirayee,  
Go'a ay hagoogtaan  
Huwan jirey badhkaygaa,  
Halaq baas sidaan ahay  
Hadba iga ordaayee  
Dhallaannimo hufnaydaa!

Hiirtiyo arooryada  
Heegan baan ahaayoo,  
Hadhka galay kulaylaha  
Hanfi ima karaynoo,  
Hiinraagga daalkiyo  
Ma aqoon harraadkee,  
Dhallaannimo hufnaydaa!

Haddii aan is-mara oo  
Cadho hiifo gogoshana,  
Hooballayda luuqdiyo  
Heelliyo ammaan baa  
Layla heellanaayoo;  
Heensaha xanjeerkaa  
Inta lay hadoodilo,  
Laygu heesi jireyoo;  
Waxa hadimo geystiyo  
Hagardaamadeyduna  
Hadur bay qorreydoo;

Anigoo ka haagoo  
Surbiyaan hirqaday baan,  
Markay ii hudhaanee



4.4. *DHALLAANNIMO HUFNAYDAA (1973)*

209

“Ham” dheh igu yidhaahdaan,  
Hambadaydi aan nacay  
Dib u haaban jirayee,  
Dhallaannimo hufnaydaa!

Dunidani halloowdee  
Heehaabanaysiyo,  
Waxa lays halaagee  
Hingaluhu bateenee,  
Hilbahooda maatada  
Haadda loo shidheeyiyo;  
Waxa hiil ka joogee  
Lays heeray boqontee  
Bari-dhexe holcaayiyo;

Hubka laysu qaatee  
Madaw laga hawoodiyo  
Saan-caddaa habaarani,  
Isku hanaq-go’een iyo;  
Habaaskan daluumay  
Waxa geesi hoydee  
Hootadu wareentaan,  
Isu haystay yahanoo;  
Maan hadayn adduunyada  
Waxa hoog dhacaayee  
Dhallaannimo hufneeydaa!

\* \* \*

Imminkaan habsooboo  
Waqtigay halgaadoo,  
Haydaar ayaamuhu

Inay igu habsiiyeen,  
Illayn dhuur hadhkeediyo  
Waa hadhuub carruurnimo,  
Guntu ay habaysee  
Goormaan hambaabirey?

Hiir-days inaan ahay  
Doobtay hugmaysoo,  
In hadaaqi uu lumay  
Hanqadhkaad ku garataa  
Maxaa helay codkaygii?

Buur ii hireysoo  
Hortey-jire ka quustaan  
Maandhe halabso leeyee,  
Mar haddaanan gaadhayn  
Maxaan ugu handanayaa?

Haatan dhalan-geddoomoo  
Cadda-lool ma haybshoo;  
Madaxayga haareey  
Himiladu u yeeshoo;  
Hammi bay lulaayoo;  
In garaadku halis yahay  
Hankaygii yaraa baa,  
Kolba heer durkaayee,  
Waa maxay habaarkanu?

## 4.5 Garaad-daran (1972)

Maansadan oo qaybo ka mid ah aan ka koray waa falsafadayn.  
Waa muran aniga iyo naftayda dhex maray. Waxaanuu u dhacay  
sidan:

Garaad-daran naftaydaay!  
Geeri iyo nololeey!  
Guluf lagu negaadaay!  
Gabno laga dhergaayeeey!  
Gabbal dunay habeenoo  
Hadh gadiidan yahayeeey!  
Lammaan aan is-geyinoo  
Guri qudh ah u hooydaay!

Googgaada xaajada  
Gaaxdeedu waxay tahay,  
Maan garan xogtaadee,  
Maxaad uga gol leedahay?

Ma wax gaar ah baad too  
Goonidiisa jira oo  
Garab aan u baahnayn?  
Mise gobol dad-weynaha  
Ka go'aynnin baad tahay?

Maadigaa ah Gaarriye?  
Mise laba gudboonoo  
Is-geleynin baad tiin?  
Gurrac-loo-abuuryeey,  
Bal geddaada ii sheeg?

Garaad-daran naftaydaay!  
Gurey iyo cadceedaha  
Isku gedo miyaad tiin?  
Gacal miyaad wadaagtaan?

Bal Giriig warkiisiyo  
Guutadii Fircoon iyo  
Waxa boqor la gawracay,  
Ama aad gariir iyo  
Guri ba'ay u taagnayd,  
Googoos u mariyoo;  
Giddi waaxyahaygiyo  
U galaydh xubnaha oo;  
Midba gees u taagoo  
Ka gur sheekadoodoo;  
Malaayiin gu' oo tegey  
Ku dheh gebagebeeyoo;  
Geeddigoodi dheeraa  
Mid kastaa guduudiga,  
Halkay galabba joogtiyo  
Goorteey kulmeenee  
Gaariye sameeyeen,  
Godolkeeda ii mari.

Garaad-daran naftaydaay!  
Sida gacanka Waaheen  
Hadba gaaf-wareegaay!  
Arrin aad gorfeysiyo  
Waxaad shalay u guuxdaad,  
Maantana ka giigtaa

4.5. *GARAAD-DARAN (1972)*

213

Gol-daloolo yeeshee;  
Miyaad dhalan-geddoontoo  
Dib bay kuu gardaadsheen?  
Ma runtaa gaboowdoo  
Geedkeedu waareyn?  
Guul-darradu dhankay tahay?

Guud ahaan waxaad tahay  
Dadku kugu go'doonyoo  
Isa waa go'aanoo,  
Mid baad geesi adagoo  
Gabbanayn la tahayoo;  
Maan-gaab lumaayiyo  
Mid baa ceel ganuuniyo  
Kuu haysta gocoroo;  
Mid baa kugu goblama oo  
Gurxankiisu damihayn  
Haddii saxar ku gaadhoo;  
Gaadaa wax boobiyo  
Mid baad good la tahayoo;  
Mid baad garab laxaadliyo  
Ruux guda abaaloo,  
Loo galo wanaag iyo  
Gaashaan la tahayoo;

Garaadlaay xogtaadii  
Cidi gaadhi waydee  
Dadkan kugu gabaabsiyey  
Kumaa helay guntaadoo  
Gacan-qaad la siiyaa?

Miyey gabi habaabeen?

Maadigaa wax gabayoo  
Hadba geed is-mariyoo,  
Goobba midab la joogoo  
Gallibaxa habeenkii?

Garaad-daran naftaydaay!

In kastoon gucleeyoo,  
Garmaamada haldhaagiyo  
Gammaankaba ka jiiito  
Cirka sare galaa-baxo,  
Adigay la gooshoo  
Iga gaabinaynoo,  
Goobtaan is-taagaba  
Adigaa galluubane,  
Ma gashaygu baaqdoo  
Lagu yidhi ka soo goo?  
Mise gaari inan oo  
Guur-u-meer ah baad tahay?  
Maxaad gama' u diiddee  
Iga daba-gureysaa?

Dambiyaal waxaan galo  
Ama geysto fool-xumo,  
Gabigoodba ceebaha  
Aan gaar u leeyahay,  
In kastoon is-gijjoo  
Weji kale gashada oo  
Dadka been ku gaasiro,  
Adigaa giraanoo

4.5. *GARAAD-DARAN (1972)*

215

Gunta iimahaygoo,  
Hoos ii guhaadshee;  
Godobtiyo xumaantada  
Inaad tahay ninkeed-gaba,  
Maxaad iigu garataa?

Garaad-daran naftaydaay!  
Gumaysaad ku nooshoo  
Dadkaa kugu garaacdoo,  
Guddoonkooda mooyee  
Kaa gareysan maayaan  
Waxad adigu goysee;

Maad galabsan hawlaha  
Kugu gaardiyaayee,  
Galbiskii adoogaa  
Goco oo ilmeeyoo,  
Hooyadaa u goohoo  
Galabtay ku dihatiyo  
Eerso uur-galkaagii.

## 4.6 Damaq Iyo Xusuus (1973)

Waa maanso baroor-diiq ah oo aan ku sii maamuusay markii uu geeriyooday abwaankii lagu goblamay ee Cabdillaahi Suldaan 'Tima-cadde'. Alle ha u naxariistee, wuxuu ka mid ahaa hal-abuuradii i saameeyey, ee aan rajayn jirey, intii aan yaraa, in mar uun Ilaaheey i gaadhsiyo darajadooda. Xilligii gobannimo-doonka ayaan magaalada Hargeysa ugu garaadsaday iyada oo gabayadiisa loo maalin- tirsado. Waxa la waqti ahaa oo sidiisa looga dhur-sugi jirey Cabdi Iidaan iyo Maxamed Ismaaciil 'Barkhad-cas'.

Xilli waliba deeqdii;  
Xero waliba qaadkeed;  
Gamaan waliba xooggii;  
Tulud waliba xoorkeed;  
Xeere-beegti garadkeed  
Xaajana guddoonkeed.

Xog-ogaal tibaaxdii;  
Xulad waliba qiiqii;  
Maanso xarakadaynteed;  
Xigsin Ina Suldaan galay  
Xiisaheeda gaarka ah.

Geeriyee xijaabaay!  
Xejiyaay fageeyaay!  
Xaasha'e aftahannimo,  
Haddii uu xabaal galay  
Xeel-dheereheedii;



4.6. DAMAQ IYO XUSUUS (1973)

217

Haddii aan bud-dhigay xalay  
Abwaankii xiddigin jirey,  
Murtidii xag loo dayo  
Xulashada ahayd iyo,  
Xarragada higgsaaddii  
Ayaa xarafka hoos-dhabi?  
Faraskii xiddaysnaa  
Xakamihi ayaa sudhi?  
Codkiisii xarraankiyo  
Ka madhnaa xabeebtee  
Xuli jirey wadnaha ee,  
Wixii xay ah daayoo  
Xawaallada gilgili jirey;  
Geelana xasilin jirey;  
Xoor gudhay hadduu yahay,  
Xaaddaydi yaa kicin?  
Gabaygii xalaashiyo  
Xaqa sheeg ha joogtee,  
Dan ku xeeban jirinee  
Xeelli-hadal ku caan-baxay;  
Mabda'aan la xadi jirin  
Suugaanta xaramka ah  
Xushmadeedi yaa marin?  
Xayndaabki maansada  
Xanfaleeyda qaaddaay!  
Haddaad jabisay xeerkaa,  
Anna damaq xusuuseed  
Adna dan iyo xeeshaa

Waa xabag-cadaadeed.

@SOMALIBOOKS

## 4.7 Damaashaad (1974)

Habeen Iid Ramadaan ahayd, ayaan laba nin oo igu dheeraa la soo hadal-qaaday halkii aannu ku baashaali lahayn. Waxay kala ahaayeen: Xasan Cabdi Ducaale iyo Cabdi-raxmaan Xasan-sheekeeye. Anigu waxaan soo jeediyey in la qayilo. Waase la iga diiday. Waxa la go'aansaday inaannu "Cawayska Juubba" tagno. Waxaanay ahayd markii iigu horreysay, maqal mooyee, ee aan caways iyo meel lagu qoob-ka-ciyaarayo indhahayga saaro. Maansadanu waxay ka hadlaysaa waxaan habeenkaa la kulmay.

Damaashaadka iidaha haddaad, Xamar dalxiisayso  
Laysma diiqadeeyee naftaa, lala dadaalaaye  
Anigiyo da'dii aan ku jirey, war is-dareensiinnay;  
Habeenkaa dabkay shidan lahayd, doodda ka  
aloosnay

Nin kastaa si buu door bidee, la igu diid tayda;  
Cawayskiyo docdii loo badnaa, taladi loo daysay.

Degdegii taksiga raagsannoo, socod dabbaalsiinnay  
Fadalkii dadkii naga wareer, dureyna qaadiinnay  
Durbadiiba meeshii nimoo, soo daf nidhi Juubba.  
Duq waraaqo noo jaray adduun, diirran naga qaaday  
Dabadeedna hoygii galloo, gudaha daanshoonnay.

Waxan ahay dekaan ruux qabee, dabada meel saaray  
Soo dege rafiiqii i waday, hadalna deeqsiyey  
Dawo weeye shaahuye yarkii, debec u weyddiistay;  
Isaguna xisaab door ahoo, soo dallacay xoog leh  
Debeddiyo sigaarkii jabnaa, dib ugu xiisooday.

Isu dire dhambaallada indhuhu, danana faalleeye  
Naxariis daraadeed qalbiga, la iska daawaysay  
Afku daa waxaan reen ahayn, loona dacareeyey;  
Midba inu dhex dego ruuxa kale, damacday laabtiisu

4.7. DAMAASHAAD (1974)

221

Habeenkaa ninkii dookh lahaa, dumarki  
baandhaysay  
Qofba dakharradii uu qabiyo, doogti lagu baanay.  
Daba-gaab haddaan helo goli, kuma doqnoobeene  
Aniguna daleeshaan fadhiyey, dib u muraaqooday.

@SOMALIBOOKS

## 4.8 Fad Galbeed (1978)

Galab Ramadaan ah ayaannu (aniga iyo Cabdi-qays) gaadhi ku tamashlaynay jidka u dhexeeya Kuliyadda Lafoole iyo Af-gooye. Waxaannu sheed ka halacsannay hablo midho ka guranaya beer ay lahayd Warshaddii Khudradda ee I.T.O.P<sup>1</sup>. Markiiba baabuurkii ayaannu joojinnay. Gabadhii ugu quruxda badnayd ayaa, iyada oo baraad la', dabayli gaadday; oo gaaddada u qaawisay intay gareyskeedii gilgishay. Waxa kaga darraa, annaka oo eegayna bay na aragtay. Kolkaas bay khajishay oo foorarsatay; oo ciddiyaha qaniintay iyada oo il-qoodha naga eegaysa. Waxa aanan weligay illaawayn quruxdii khajilaaddu u kordhisay gabadhii ugubka ahayd.

Markiiba jidhiidhico ayaa igu jabtay. Qorraxdii dhacaysayna waxay iigu muuqatay inay degdegayso. Waxa aan is-weyddiiyey, tolow ma war naxdin leh oo ay maqashay baa orodka ugu wacan? Mise gabadhan baa ilayskeedii shiikhisay? Mise dayax soo baxaya ayey is-leedahay uga sii dig quruxdan ka wareerisay? Markaan waxba garan waayey, ayaan iyadii toos u waraystay oo aan idhi:

Gabbal-dhaca cadceed-yahay  
U sii faano-guratee,  
Casar gaaban liiqii  
Godka weeraraysaa!  
Go'e fuley miyaad tahay?  
Waa maxay garmaamadu?

---

<sup>1</sup>Shirkad dhinaca tomaadho ama yaanyada

4.8. *FAD GALBEED (1978)*

223

Ma googooska sagalkiyo  
Gamasyada shucaacaa,  
Gaade kaa horreeyiyo  
Gurigaad ku hoyan layd  
War ku gubay ka soo direy?

Mise gabadhan dhoolkiyo  
Gu'goo shaalka xaytiyo  
Fad galbeed la moodaa,  
Kolkaad gelin is-dhugateen  
Guluubkaagi shiikhoo  
Dib-u-guradku waa baqe?

Mise ganac-jabkaagiyo  
Waxaad galabta mudataad  
Intay goori goor tahay,  
Dayax soo lug-gu'i laa  
Sii war-geli is-leedahay?

Gedgeddoonka hiraakee  
Iyagoo garaaro leh,  
Gaatin-socodka laafyaha  
Xarragada u gaarka ah  
Goonyahaaga tiiciyo,

Gaardiga daruuraha  
Kugu gaaf-wareegee,  
Gumucaad ridaysiyo  
Goolli-baadh fallaadhaha,  
Shafka kaga garaacdee  
Isu rogay guduudkee,

Dhiiggooda gobo'liyo  
Giirgiirka caadka leh,  
Ku sibbaaqday guudkiyo  
Garab-saar-dabtoodii  
Maxaa maanta gaasirey?  
Miyey kugu giriifeen?

Mise waxay ka giigeen  
Gobaad haybaddeediyo,  
Gantaalaha jacaylkiyo  
Kal-gacaylka beereey  
Indhaheedu ganayaan?

Afartaa siddiri-gam  
Waxan gocanayaa weli.

Tiiyoo gareyskiyo  
Marta debec u gunuddoo  
Guranaysa hoobaan,  
Oo aan geyaankeed  
Geesaha ka filanayn,  
Dabayshii gadooddee  
Uurkayga garatee  
Gaadmada ku qaaddee,  
Gosha iyo horaadkiyo  
Gaaddada u fayddiyo,  
Garba-duubka maraday  
Durba “geb” isku siisiyo,  
Gabbashada xishoodka ah  
Gorodday lulaysiyo  
Ugubnimo-gandoodkii.



## 4.9 Carshigii Jamaalka (1979)

Waa maanso aan ku ammaanay gabadh aannu Muqdisho kula kulannay (aniga iyo Hadraawi iyo Qays). Markaan sii yara bartayna qof wanaagsan iigu muuqatay.

Ma cawaa ma caanaa?  
Ma cug baa ma cigashaa?  
Ma ciirsaa ma calaf baa?  
Ma cisaa ma culuq baa?  
Ma daruur gu' curatoo  
Cir-caddaadi noqon baa?

Ma cigaalka feleggiyo  
Cir-jiidhkii Mariikh baa?  
Ma magool cusayb baa?

Ma cadceed arooryoo  
Fallaadhaha casuusta leh,  
Ku cabsiisay dhedadoo  
Ceeryaanti didisaa?  
Ma xareed is-celisaa?

Ma habeen cadda ahoo,  
Balliyada cigaagani  
Casuumeen xiddigahoo;  
Cirka dayaxi kaa jirey  
Dhulka kaa cawaray baa?

Cosob rayska xaadhiyo  
Ma gargoorki Ceegoo  
Calcalyada barkaday baa?

Alle samay cuddoonaa!  
Uduggaa carfoonaa!  
Samsam caynka loo dhigay  
Citibaaro badanaa!

Callo maaha liiti ah;  
Habac maaha ceebo leh;  
Qallaf maaha camal ba'an;  
Coon maaha loo hoyan;  
Baali maaha caaryo leh;  
Cirir maaha toomama;  
Cawro maaha socod badan;  
Cayil maaha laga dido  
Caatana u may bixin.  
Cid kastaba u geeyoo  
Meel laga canaantiyo  
Cillad looma heli karo.

Cabdiyoow tallaabada  
Cutiyaan idhaahdaa.  
Timahay cawayskii  
Cidhifyada u saartee,  
Ku cayaara laydhee  
Cawryaan haldhaayadu.  
Dibnaheeda culayga ah  
Cirridkeeda dhuxusha ah  
Ilkahaa caddaanka ah  
Naasaha cambuusha ah  
Sunnayaasha cawsha ah,  
Sanqaroorka caynab ah

4.9. *CARSHIGII JAMAALKA (1979)*

227

Dhexda caaro-dhuubta ah  
Mas-ciideedka midabka ah,  
Cududaha garaaraha  
Kubabkay u culus tahay,  
Cambarshaha surkeedeey  
Sirirsheen cabbaadhyadu,  
Waa xuural-caynool  
Kolba anu tin iyo cidhib  
Cad aan quudho kuma arag.  
Cag-fudayd u may dhalan;  
Cadho laguma sheegayn;  
Waa canaadi lama odhan;  
Wax ka cawda maan maqal.  
Ma cod dheera waa gabadh;  
Xishood baa u caado ah.  
Cimri waa u gaban weli;  
Caqli waa u waayeel;  
Cidhib baanay leedahay.  
Aniguna ma caasiyo  
Cadraddii ammaan lehe,  
Carshigii jamaalkaan  
U caleemo-saaree,  
Adna Cadar Hadraawoow,  
Hambalyada u soo curi!

## 4.10 Dhabannahays (1979)

*Fad Galbeed* ayay heestani taxane la tahay oo inanta uu Gaariye ku ammaanay maansadaas ayay isa sii barteen oo sheeko wada yeesheen. Muddo kaddib ayuu Maxamed Xaashi inantii ka dareemay googgoys iyo sagsaagayn. Dabadeed, jiiftadan canaanta iyo tusaalaynta ah ayuu inantii u tiriye.

Dhooleey, Gobaadeey!  
Dhudihi madheedhkiyo  
Dhebi Hawd ku yaallaay!  
Inta dhixirka xidhatiyo  
Haweenkaba dhammaantood,  
Dhexyartaan ka doortaay!  
Dhegahayga maqalkiyo,  
Dhaayahayga araggaay!  
Tixdan dhabannahayska ah  
Dhiillada la yaabka leh  
Maansadaydan dhirifka ah  
Dhawaaqaygan xoogga leh  
Dheg-xarraanka qaylada  
Dhambaalkayga heesta ah,  
Yuu ku dhaafine, maqal.  
Ma ogtahay dhallaaneey!  
Ragga laguma dheeloo,  
Lama dhibo qof aan mudan.  
Boog haddaadan dheyi karin  
Dhikhka laguma sii saro.

Adoo dhacarta jiilaal  
Hadduu dhool gu' kuu da'o  
Dhaltidii ma-gayno ah  
Dhayal looma gawraco,  
Sahay waa la dhowrtaa.

Hadduu awrku dheelliyo  
Xadhiggaa la dhuujaa  
Dhugcayaydu, waa ceeb!

Dhirta kii gabboolana  
Jikre laguma dhaawo.

Xil-dhibaan haddaad tahay  
Xumo laguma dhaashado  
Dhegta waa la xeershaa.

Hadduu wiil dhiggaa yahay  
Gacanna isu dhiibtaan,  
Dhaqaalee ha joogtee,  
Dhagartiisa lama galo,  
Axdi been ah lama dhigo,  
Dhaxdintaada lama cuno.

Inaad dhoochan tahayoo  
Seedi kuu dhannaanayn,  
Dharaar nool luggooyada  
Dhafoortaabad-kaagiyo  
Waxaad igu dhigaysaa,  
Miyaanay ku dhibihayn?

Dhuunigaad cunaysaa,  
Miyaanay dhunkaal iyo

Dacar kuu dhadhamahayn,  
 Dhuuntaadu adakaa?  
 Sidaad tahay dhinbiil dab ah  
 Halkaad dhinaca saartaa,  
 Miyaanay dhalaalayn,  
 Dharka kugu siraadmayn?  
 Dareen waa u dhalashee,  
 Miyaanu dhiigba kugu jirin?  
 Dhabbadaad maraysiyo  
 Cag halkaad dhigaysaba,  
 Miyaan olol ka dhalanayn,  
 Dubku kaa dhilanahayn,  
 Dhulku kula durdurinayn?  
 Doqon baan wax dhaadine  
 Maxaan dhaabad kuu xidhay!  
 Maxaan hoos wax kuu dhahay!  
 Intaan waano kuu dhigay,  
 Dhagaxoon u mariyaa  
 Ii dhaami laydoo  
 Wax uun baan dhacsiin laa.  
 Waxaad igu dhuraysiyo  
 Kalgacaylkii, Dhudiyeey!  
 Dhalanteed hadduu yahay,  
 Axdigii dhexdeenniyo  
 Haddaad jebisey dhaartii,  
 Dhaqso iigu soo sheeg!  
 Adaa ceeb dhitaystee!

## 4.11 Ka Kufriyey Jacaylkii (1978)

Maansadan waxa ka muuqata dhallin-yarannimo iyo dul-qaad-la'aan. Waxaan ku canaantay gabadh ballan igaga baxday; oo aan ku tuhmay inay nin iga jeeb roon iga raacday. Markii arrintaasu igu timi, ayuun baan waxan u ekaaday sidii nin xalay oo dhan ku riyoonayey isaga oo janno ku jira, oo kolkii waagu beryey is arkay isaga oo gelengel jiifa. Arrintu si kasta ha ahaatee, kollay tix noocan ah ma mariyeen hadday shalay maanta ahaan lahayd.

Jamashooy waxba ha tarin;  
Jarka debecsanaw ciir;  
Ballankii jabaw dood;  
Beeneey jilbaha dhigo.  
Jirka gaaggaxaw бага;  
Dhimo uur-jilaycaw!

Badda jiidaneey guur;  
Jibintii dhacdaay yeedh;  
Dib u guro Cir-jiidhkaw.

Fiintiyoo jugleydaay,  
Ila jiiibsha heesaha!  
Dadka jeebka caabuda,  
U jaxaasa iimaan!

Han-yareey jawaab hoo;  
Shaxdaad jeexday waan degay;  
Irmaan baanay joogtaa.  
Jaraan guudka kuu sudhay;

Jid kastaana kaa xidhan.

Laba-geel-jeclaantii  
 Hadba-doc-u-janjeedhkii,  
 Jillaafuoyinkaagiyo  
 Jirjirroolennimadii,  
 Jaasadeeda waad heli,  
 Jeer dambaad ka sheekayn.

Hadday jugo ku gaadhaan  
 Waxba hay jadeer-wicin  
 Ka kufriyey jacaylkii.

\* \* \*

Xalay jaah-wareerkii  
 Hurdadaan yar jiifsaday  
 Riyo jaan miyaan galay?  
 Jannadaan ladaabsaday  
 Kolkii jiidhku oogsaday  
 Jab miyaan sagootiyey?  
 Jabadkaan astaystiyo  
 Jeeskaan yagleelsaday  
 Hadmaa jaarku i ag dagay?

Jirradaan bogsiin laa,  
 Gurigaan “jiq” siin laa,  
 Garbadaan lahaa jiidh,  
 Dantaydaan lahaa jiri,  
 Jaan-gooyadaydaan  
 Is-lahaa ka jibo-keen,  
 Shaw dhaan jin baan waday!



4.11. KA KUFRIYEY JACAYLKII (1978)

233

Jirriddaan tallaalee  
U soo jeexay laagtee,  
Jeedaaladaydiyo  
Jiiftada ku korin laa,  
Xar baa shaw ku jeerraa!  
Dusha jidhifto mooyee  
Shaw dhuuxba kuma jirin!

Riyo jaadad badanaa!  
Dhalanteed jimcoonaa!  
Uur-jireenka murugada  
Soo-jeed u daranaa!  
Iska jiif lahaydaa!

## 4.12 Eed Hooyo (1979)

Waa hees magaceeda ka wadata riwaayad la yidhaahdo *Eed Hooyo Laga Galay* oo aan qorey sagaal iyo toddobaatankii. Riwaayaddaasu waxay ku socotay inan yar oo da'deedu tahay 18 sano. Waa inan sabool ah oo aad u qurux badan. Islaan aan ubad kale lahayn ayaa ku indha-kuulata. Waxa xiloodinaya boqollaal doob oo guur iyo gaabsiba ka raba. Hebel bay diidaysaa; oo hebel kale ayey diidaysaa. Ugu dambeyntii ayey mid u soo joogsanaysaa ay is-leedahay malaha kanaa ah kii aad ku degi lahayd! Wuxuu been ku maaweeliyaba, aakhirka ayuu lingaxa ka goynayaa oo ay uuraysanaysaa. Waxay dabeed ka codsanaysaa inuu asturo. Isna wuu ku gacansaydhayaa. Markaasay ereyada soo socda ku calaacalaysaa:

Obocdayda wadhaneey!  
Adhaxdayda liicdaay!  
Arrinkayga laalmoow!  
Taladaan il-duufaay!  
Axdigaan rumaystiyo  
Ma arraday jacaylkii?  
Ma engegay darkiisii?  
Ma af-beelay xiisii?  
Ma ajowday laagtii?  
Ma abaaday geedkaan  
Ubaxiisa guran laa?  
Afar-qaadki socodkiyo  
Ma eersaday wareeggii?  
Orgigii la naaxshee

4.12. *EED HOOYO (1979)*

235

Adhi-raacda dhaqataa  
Ku asqaysay heestee,  
Naxariis ujeeddo leh  
Aamminee run moodee,  
Ayaantii la gawracay  
Is ogaaday baan ahay.  
Umal yuururaan ahay.

Cudur igu unkamay baa  
Inimtiisi biqishoo,  
Ajax beri i soo maray  
Eel uu ka tegey baa  
Uurkayga jiifoo;

Aramaa i huruddoo;  
Anigoo arkaayaan  
Axankayga daaqoo;

Macaan-jeceshi oon sun ah  
Loo ursiiyey malabkee  
Ku idlaatay baan ahay.  
Iintii dadkaan ahay.

Caku inan-rageedaw!  
Waxa igadh ka beermaa  
Aarankiisa weeyee,  
Ooryihiini kici laa  
Aarankaad ku dubateen.

Urugada i haysiyo  
Agoonkaa sidkii go'ay  
Aanadiinna weeyaan.

Ab-tirsiimadiisuna  
Utun gaaxsan weeyoo,  
Uurkaygu waa godob  
Eed hooyo laga galay.

@SOMALIBOOKS

### 4.13 Bixiso (1979)

Is-la innaga oo riwaayaddii *Eed Hooyo* ku guda jirna, gabadhii, oo ay talo ku caddaatay, ayaa maalin maalmaha ka mid ah is-odhanaysa bal ninkii ka war-doon, waa intoo Ilaahay kaaga nixiyaaye. Gurigiisii ayey tegaysaa. Waxay kula kulmaysaa isaga oo gabadh yar oo kale ku haysta isla sariirtii uu iyada ku bi'iyey. Markaasay argaggaxaysaa; oo ay teedii illaawaysaa. Waxaanay bilaabaysaa maansadan oo ay ugu digayso gabadha miskiinadda ah ee uu sideedii hodayo.

Weyl yahay baxsani,  
Bixisadu waddaa,  
Bi'i waa war-laay!

Adoon laacdan baran  
Oon weli bislaan  
Ha baraar-shishiyin!  
Is banbaaniyoo  
Ha ku ababin belo!

Laas biir ah iyo  
Biyihii ajo ah  
Kuma ba'o harraad.

Dawac baadi helay  
Ma badbaadiyee,  
Ballan-qaad afka ah  
Ha u beer-nuglaan!

Bilicdaadan ugub  
Dhayladaadan bilan,

Bahal qaba kamiin  
Ha u soo ban-dhigin!

Bi'i waa war-laay,  
Taariikhda bogo!

Maxaa bilis haween  
Oo baar-fidhnayd  
Been lagu khatalay!  
Maxaa bocor il-daran!

Maxaa baylah wadhan  
Haad boobayoo  
La bud-dhigay hortaa!

Maxaa baydi shilis  
Burcad iyo labeen  
La basaasay ciil!

Maxaa gabadh birlab ah  
Oo Beegsi iyo  
Baxsan dhali lahayd  
Baydari makalay!

Bi'i waa war-laay!  
Aniguba Basraay,  
Berigaan yaraa,  
Waan boodi jirey  
Waan badhi caddaa!

Bartaad taal haddeer  
Gogoshaasi baas  
Anigaa ku ba'ay.

4.13. *BIXISO* (1979)

239

Baaxaa-deggiyo  
Beer-laxawsigii  
Jeer aan ku baxay  
Waan baraad la'aa.  
Bi'i waa war-laay!  
Ninkan kuu boqrani  
Waa xilo-bilaal.  
Anigoo bed-qaba  
Waa bukaan i helay.  
Dhunkashada bishmii  
I beleeyey buu  
Adna kugu bawiray.  
Wuxu kuu burqaday  
Beentiyo warkuu  
Igu badawsan jirey.  
Boggaan eeday buu  
Barko kugu yidhaa.  
Bi'i waa war-laay!  
Baantaydan hoo,  
Waad baahan tahay  
Looma bahalo-cuno.  
Bur ha daaqin sun ah!

## 4.14 Wiil Gaabsi (1979)

Weli waa sheekadii *Eed Hooyo*. Gabadhii ayaa tixdana ugu heesaysa ilmaha uurkeeda ku jira. Waana ereyo calaacal ah oo ay kaga cabanayso caddaaladdarrada iyada iyo isagaba haysata. Isla markaana way ku gar-naqsanaysaa.

(Samaw-wa samaw samaw-wa)

Samooow wiil-gaabsiyaw-wa;

Samooow godob-waalidoowa;

Samooow guur-baaqdayoowa;

Samooow geesi-ciillanoowa;

Habeen aan good la seexday

Wixii iga gaadhayoowa.

Ma gocer baa aabbahaa ah?

Ma gacalkaagaa ku dayrshay?

Ma garabkaagaan rag joogin?

Maxaad ku gunaanad-seegtay?

Martiyi waa goor-xun-socode

Waxaad soo galab-carrawdo,

Waxaad soo maalin-gaasho

Ma Giriyaad baad is-keentay?

Guhaadaw aynigaaga

Garnayl baa loo ridaaye,

Adoon weli lagu gardaadin

Maxaa fintii gadoodshay?

Maxaa gabawaray ciddayda?

Maxaa gabagabaha keenay?



4.14. *WIIL GAABSI (1979)*

241

Geyaanku muxuu ka fiigay?  
Guhaadoow wiilkayaw-wa!  
Kuwii gaasirey codkaaga  
Kuwii gocashada abuurey  
Kuwii anigana i gooyey,  
Markii garta loo xil-saaray,  
Arbuhu gofanihi ku yiillay  
Ma guudkeenmuu ka raadshay?

Fuluhu weligii ha goojo  
Wuxuu galabsaday ha diido,  
Halkuu galayaa adduunka  
Ma hooskiisaa ka gaaban?

Waxaan gabanyahaw ku leeyey:  
Wuxuu dadku kaaga giigay  
Haddaan gunti soo ogaaday,  
Gantaal baad tahay boggooda  
Gunaad kaga yaal damqaaya.

Hoheey caku guul-darraanta!  
Hadday garashadi sabooshay,  
Hadduu gamashiyey wanaagi,  
Haddii gees lay faqooqay,  
Gefkii loo wada badheedhay  
Haddii gooni laygu qoolay,  
Gar-soore yaqaan haweenka  
Racfaan baan goobayaaye,  
Halkaa geeddigu ha joogo.

## 4.15 Dhaleeco (1979)

Waxaynnu maansadan ku gunaanadaynnaa sheekadii *Eed Hooyo*. Waxaana tirinaya nin riwaayadda ku matalaya bare ka mid ah macallimiinta gabadha wax u dhigta. Isaga oo murugaysan ayuu haaraamayaa dhaqanka dumarka ka eexday. Wuxuu leeyahay, laba qof oo sariir wada tegay oo isku dambi sameeyey, ayaa ninkiina madaxa loo salaaxayaa, gabadhiina dhiilo iyo garacyolay lagu tilmaamayaa.

Dadyaw dheddiggooda aan dhaqannin  
Dhanaan iyo haani dhay ramag  
Wixii lagu dhigo ayey dhididdaa.  
Dhabaqu dacar buu ka soo dhex baxaa.  
Hashaad dhagaxiyo dhul baas ku furteen  
Waxay dhali laydba way dhicisee,  
Ayaan dhito dhiilo loo culan.

Gabdhaa dhixirkiyo dhacclaa xidhan  
Middii dhabanliyo middii dheg lahayd  
Mankii dharab leba haddaad dharqataan;  
Dhuda curdinka ah haddaad dhadhisaan;  
Saboolka dhashooda dhiig-miirtaan;  
Haddaad Dhaameel dharaar-maashaan;  
Ayaa dhacantee idiin dhixi?

Laftaad dhuuxdeen luddaad dhilateen  
Gabdhaa dhugcayee dhafoorka goddeen  
Wixii lagu dhigay hablaha u dhintee  
Dhaleeciyo xani u sii dheer tahay,  
Dhurwaagii cunoo dhaqaalayn qaba

4.15. *DHALEECO* (1979)

243

Hal dhaawac ku yaal in sii dhagxisaan  
Ha dhaco dhaqankaad ka barateen!

@SOMALIBOOKS

## 4.16 Hordhaca tixaha *Siinleyda*

Sannadkii 1970-kii ayaa Cabdi Aadan Xaad ‘Qays’ tiriyey hees la magacbaxday *Aakhirooy, Xaggee baad naga Xigtaa?* isagoo muddo ka sii horreyseyna tiriyey hees la yidhaahdo ‘Adduunyoooy Xaalkaa Ba!’ Wuxuu Qays is tusaaleeyey, kol haddii uu dunidii wax ka yidhi, bal inuu aakhirona, sidoo kale, sawir ka bixiyo. Xiisad siyaasadeed baa waagaa aloosnayd, waxa xukunkii afgenbi kula wareegay saraakiishii xoogga dalka ee uu hoggaaminayey Siyaad Barre, xukuumaddii shicibka ahayd baa awooddii laga faramaroorsaday. Xildhibaanadii baarlamaanka ayaa xabsiga loo taxaabay, siyaasiyiintii iyo madaxdii xukuumadda rayidka ahayd ayaa la xidhxidhay.

Markii Cabdi Qays tiriyey labadaa heesood ee adduunka iyo aakhiro ka hadlaya, waxay noqdeen kuwo dadweynuhu si xoog leh u dhegeystaan, waxay labadaa heesood dadweynaha u sameeyeen isku xidh dhacdooyinkii siyaasadeed ee wadanka ka dhacayey iyo farriimaha ay gudbinayeen ama xambaarsanaayeen. Waxay kaloo la kowsadeen, kuna soo beegmeen wakhtigii giraantu ama cajaladdu sida xoogga leh uga hirgashay dalka Soomaaliya ee sida aadka ah wax loo duuban jirey, loona dhegeysan jirey. Dadkii ayey si baas oo ba’an u ki-ciyeen, dabadeedna waxa laga mamnuucay in heesahaa laga sii daayo idaacadihii Raadiyow Muqdisho iyo Raadiyow Hargeysa. Hase yeeshee, goob kasta oo dalka dibeddiisa iyo gudhihiisa, gaar ahaan, goobaha dadweynuhu isugu yimaaddo ama ay ku caweeyaan, heesahaasi way ka bixi jireen oo laga dhegeysan jirey.

Muddo gaaban dabadeed, Cabdi Qays wuxuu u socdaalay dalka Jabbuuti, oo kolkaas weli Faransiisku gumeysanayey.

Waxa 1972-kii Jabbuuti ku soo gaadhay hees uu tiriyeey Hadraawi oo la yidhaahdo *Arag, Maqal* markii dambese ku caan baxday *Arraxmaan*, taas oo si toos ah u tixraacaysa, jawaabna u ah heesta Cabdi Qays ee *Aakhirooy, Xaggee baad naga Xigtaa?*

Isla sannadkii 1972-ka ayaa afar halabuur oo ka tirsanaa kulliyaddii waxbarashada ee Lafoole waxay allifeen riwaayad la yidhaahdo *Aqoon iyo Afgarad*. Waxay kala ahaayeen mu'allifiintaasi, Maxamed Ibraahim Warsame 'Hadraawi', Muuse Cabdi Cilmi, Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' iyo Siciid Saalax Axmed. Heesihii riwaayadda ku jirey waxa ka mid ahayd heesta *Saxarla'* oo sabab u ahayd ama ibofurtayba silsiladdii *Siinleyda* Nuqul ka mid ah riwaayaddii *Aqoon iyo Afgarad* ayaa Jabbuuti ugu timi Cabdi Qays, dabadeedna wuxuu ka jawaabay heestii *Saxarla'*.

Dabadeedna waxa tixdii ku soo biiray Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' oo kolkaas ku sugnaa magaalada Burco, barena ka ahaa dugsi sare. Gaarriye wuxuu silsiladda *Siinleyda* ku lahaa afar maanso: *Salaan Guud, Sidataal, Samirsiis* iyo *Sir-ma-Qabe*. Waxaannu ka cudurdaaranaynaa in tixda *Sir-ma-Qabe* aanay ku jirin diiwaankan, oo aanay noo suurtoogelin in aannu ku darro, cillad farsamo oo xagga codka giraanta darteed.

## 4.17 Salaan Guud (1973)

Marka hore salaan guud,  
Rabbi saymo kaa hay!

Marka xiga sabeennii,  
Midi haysa sidatee;  
Saddexdii ka dhalayoo  
Jees sabooli maaloo

Ku sangaaguroodoo  
Xalay socoto baahani  
Marti ugu safteenoo

Mid siniin lahayd baa  
Dogob loogu solayoo  
Ninba waax la siiyoo  
Laba saaka joogee,  
Saaxiib, ma nabad baa?

Waxay Suubban leedahay:

“Ninka soo socdaa, mee?  
Muxuu soo sidaa, sheeg?”

Saaxiib Hadraawow!  
Duurkiyo sarmaantii  
Saac iyo ugbaadkii  
Sogsogtiyo galoolkii,  
Diir lagu salliday baa  
Laamii sariigtoo

Waa soobir caawee,  
Samaydaaban shidan laa  
Sahankaan u dirayee

4.17. SALAAN GUUD (1973)

247

Sannadahan maqnaa baa  
Sakal laygu sheegaye  
Adaa soo jireenee,  
Ma sug baad i leedahay!  
Malaa Suubban maqashee,  
Way siiban tahayoo  
Weli waa sideedii.

Saaxiib Hadraawow!  
Waa erey su'aal ahe;  
Candho-saab ma dararaa?  
Jinaw geel ma sixin baa?  
Sakaraad ma geeraa?  
Alla-bari ma sooryaa?  
Nin la sigay ma nabad galay?

Adoo dayr-cad soofshoo  
Seko lagugu leeyahay  
Suuradaha ka baadhoo,  
Maqaar-saar ma bixin layd?

Sagaal adhiya ruux liyo  
Anoo subagga daadshaa,  
Ma sinnaan karaynaa?

Waxay Suubban leedahay:  
“Suuraaf miyaan ahay,  
Salfudaydku waa maxay?”

“Naf jacayl sawaabaan  
Sahwi dayni haynnine  
Duqii Sabo-wanaag yiil

Wuu soo socdaayoo,  
Seerhiisa kii galay  
Dhab u seexan maayoo,  
Seylac waa tallaabee  
Cirka sare hadduu dego,  
Saddex magac Ilaahay  
Seeftu way dul taallaa.”

Saaxiib Hadraawow!  
Ninka Saxarla’ guursaday,  
Ma seeddaad ka dhigataa?  
Waxay Suubban leedahay:  
“Ninka maydka sarayoow,  
Damqan mayso saantuye.  
Waxa iga sargooyo ah  
Hadda Saaqi waa fool  
Anigaw sed tiriyoo  
Saaddambuu ku buuxaa.  
Intaa waranka Sooyaan  
Hayska samay la’aadee,  
Saaxiib ma nabad baa?”



## 4.18 Sidataal (1973)

Waa maansadii labaad ee uu kaga qayb galay *Siinley*.

Sabadii Togdheer baan

Kaa soo salaamee,

Jaallahay Siciidow!

Ina Saalaxow, nabad!

Marka xiga safkeennii

Waxa ay ku sugan yiin

Iga sii war buuxoo,

Maxay saaka joogaan?

Marka xiga silsiladdii

Siinleydii dheereyd

Waataan sargooyee

Saabka adag u geliyee

“Soddoh weeye” idhiyee,

Mar haddaad ka saartoo

Maryihii ka siibtoo

Soobir tahay islaantii

Wax kalaa ka salaglee,

Ina Saalaxow, nabad!

Sidataal waxay tidhi:

“Heestaydu waa *siin*,

Waa sagal arooryaad,

Waa sahan maqnaayoo

Beeshu ay sugaysoo,

Waa sawd nin weynoo

Sahwi aan ku imanoo,  
Sahay weeye dooroo  
Dusha lagu sitaayoo  
Sidaad mooddey maahee,  
Ina Saalaxow, nabad!”

Sidataal waxay tidhi:  
“Heestaydu waa *siin*,  
Waxa saxay abwaanoo,  
Sayidkaw abtiriyo,  
Waa sedkii Qamaanoo,  
Waa tulud la soofshoo,  
Raagaa salaaxoo,  
Sifo waxay wadaagaan;  
Gabaygii Salaanoo  
Sidaad mooddey maahee,  
Ina Saalaxow, nabad!”

Sidataal waxay tidhi:  
“Senge ruux la loolaa  
Surmi kama fogaadee,  
Same-wade Hadraawaa  
Sixi laa higgadee  
Af Soomaaligaygaa  
Malaa kaa sarreeyoo,  
Maansada sal iyo baar  
Maad helin sirteedoo,  
Sadarkaan ka heesiyo  
Sheekadaadu siday tahay  
Waysa seegan yiinoo,

4.18. *SIDATAAL (1973)*

251

Jinnaa kuu sanqadhayoo  
Saan kuu garaacoo  
Igu kaa sallidayoo  
Sawir baad run mooddee,  
Ina Saalaxow, nabad!

Sidataal waxay tidhi:  
“Dadka kii sokeeya ah  
Ama soor wadaagtaan  
Surdhub looma qariyoo,  
Suryadaad u qooshaa  
Surka lala galaayoo  
Kula siiban doontee.”

“Ninkaad igu sidkaysee  
Ila soo safaysiyo,  
Dembigaad i saartee  
Siciid igu qarisana  
Kaa siisan maayee,  
Saaxiib bal baandhee!”

Sidataal waxay tidhi:  
“Aduun bay saluugoo  
Buur ila salooshee  
Naf jacayl sawaaboo  
Seetada ku gijjoo  
Waxaan ahay silloonoo  
Saxarliyo danteedii  
Kama seexan weliyoo  
Darteed baan Siciidow,  
Uga soomay oontoo

Xeebaha sintoodaan  
Saanaddaydii dhigayoo  
Jeeroon salgaadhana  
Furi maayo suunkee,  
Ina Saalaxow, nabad!”

Sidataal waxay tidhi:  
“Salfudaydku Qays buu  
Saaxiib lug gooyee,  
Seef-la-bood inaad tahay  
Caad igama saarree,  
Goortii sabeenii  
Marti loo sedqeeyiyo  
Sannadkaynmu joognaa  
Waa sagaashan guuree,  
Taariikhda socotaa,  
Ma midaan ku solin baa?”

Sidataal waxay tidhi:  
“Duqa sabo-wanaag yaal  
Soodhkiisa maariyo  
Hadduu saawir kula yahay,  
Way kaa sisibatee  
Saamigaad lahaydiyo  
Nin sedkaagii qaatoo  
Kaa raba siyaadana  
Seeftaada mooyee,  
Inaanay sabaaliyo  
Saadaashu celinayn,  
Sidaa maw ogsoon tahay?”

4.18. *SIDATAAL (1973)*

253

Sidataal waxay tidhi:  
“Candho saabka dararee  
Maraq lagu sakalinee  
Ibtu siiban tahayee  
Dadku uu u simanyee  
Sibraarrada ka buuxsaday  
Haddii uu war sugan yahay  
Waa sareedo Eebbee,  
Ina Saalaxow, nabad!”  
Sidataal waxay tidhi:  
“Tabtii ina Sanweynaana  
Xaajada garsooroo,  
Labadeennii saaxiib  
Waan kala xaq siiyee,  
Aduun bays ka seleloo  
Xaajada sirgacayoo,  
Hadalkaygii saafnaa  
Sawd-daran habawshaye,  
Wax baa kuu sunsumayoo  
Sidaadii ma tihidoo  
Malaa waabad sigatee  
Suufiyaasha weyddii  
Saarkiyo dabayshaba,  
Iyagaa sanceeyee.”

## 4.19 Samir-siis (1973)

Waa maansadii saddexaad ee uu kaga soo qayb galay Siinley.

Ma ogtahay Siciidow!  
Xalay baan saqdii dhexe  
Cirka sare u eegoo  
Sida dirirku leeyahay;  
Bisha Soon markay tahay  
Sabbuux lagama heesee,  
Safar hayla boodine,  
Sannadkii mar uun baa  
Xajka loo sadcaalaa.

Haddii aad sabool tahay  
Sandullayni waa debed  
Af-ku-seefle yeelkii,  
Sal u yeelo sheekada!

Ma ogtahay salaaduhu;  
Midba saacad weeyoo  
Surmigiyo abaaraha  
Waysadu sidaan qabo  
Ku sax weeye ciiddee,  
Nin sahiwiyey rukuucuhu  
Kol labaad inuu sugo  
Waa sadar hubaal ahe,  
Kuu furan sujuudduye.

Ma ogtahay Siciidow!  
Turubkiina maad sugin

4.19. SAMIR-SIIS (1973)

255

Maad helin sirtiisii,  
Sacabkaaga weeyaan  
Waxa selelka keenee,  
Ma anigaa wax-saarka leh?  
Sud ay Raani leedahay  
“Baashe saar!” kumaan odhan.

Kuma odhan, “rankii saydh!”  
Saddexlaha aad qaaddiyo  
Siddeedluhuba waa biig.  
Haddii ay ku sidatoo  
Sokihii magaysoo  
Saameeshay yeelkii,  
Saaxiib, maxaan qaban?  
Foorad baa ku saarane,  
Sal u yeelo sheekada!

Ma ogtahay Siciidow!  
Sagalkiyo arooryada  
Warka loo sarbeebiyo  
Subaxdiyo habeenkaa  
Saaka loo gar qaadoo,  
Inay Suurti dhowdahay  
Sangaa baqal la dhaafshoo  
Siigo dhiig tifleeyoo  
Sarka-dhaban ku ladhan yaa,  
Saanad soo walwaashoo,  
Siraadkii cadceeddiyo  
Caad saartay nuurkoo;  
Waxay Saxarli leedahay:

“Xiddig sudhan korkaygiyo  
 Ifaan sii ridnaynoo  
 Igu sabaya been iyo  
 Saco dhowr ah mooyee  
 Layga saar ilayskoo,  
 Safan baan tallaabada  
 Hadba suul u dhigayaa,  
 Siciidow, xogtaa dhuux!  
 Sanka burada haw jarin!  
 Hadal kuma solayside,  
 Waan sidaaye hoo sii!  
 Surbiyaanka haw miyin!  
 Jaalle, mayla socotaa?  
 Sal u yeelo sheekada!”

Googgaa Siciidow!  
 Sedkaagoon ku duuloo  
 Dadka kale ka sooroo  
 Seko aan ka bixiyiyo  
 Sadqo ii xalaal tahay.  
 Tu kaleeto suuree!  
 Ido laysu soocoo  
 Saf saf loo tumaayaa  
 Sumal lagu illaawoo  
 Lagu sii dhex daayee,  
 Saadaashu waa maxay?

Tu kaleeto suuree!  
 Saaqadaan warkeedii  
 Kuu sifeeyey waa hore



4.19. SAMIR-SIIS (1973)

257

Sidkii waa ka dhowyoo  
Sulub wuu lafaystoo  
Walqashiisa saawiri  
Saanta dhaafi maysee,  
Warankeennii Sooyaan  
Samaydiisi laallayd  
Halka ay ku sugan tahay,  
Siciid maw war haysaa?

Tu kaleeto suure!  
Sirtu ereygay jiiftaa  
Saryan ii higgaadshoo  
Xarafyada sameeyaa  
Sacab farihii weeyaan  
Shibbanuhu ma soorana  
Subci shaqalladiisoo  
Saddex baa mid laga jaray  
Ka gungaadh su'aashoo  
Sagandaaq ku raacdee  
Sidig oo ha naafayn,  
Jaalle mayla socotaa?  
Sal u yeelo sheekada!

Sula ciidan kaan diray  
Sahaydii kamay go'in,  
Soonah iyo dhilowyahan  
Ninka soohay maantaw  
Geed-saraadki muu madhan,  
Sidii baa galoolkii  
Maydhax looga saaraa.

Waxay Suubban leedahay:

“Halkaan saaka joogaa

Suryo oodan weeyoo

Silic lagu mutaayoo

Maaha sabo ayaan lee,

Awрку saawa-saawaha

Yaanu goosan seetada.

Xadhigiyo sitaacana

Ha ka sahamin jeerine,

Isa-sudhanta weyddii,

Ka salgaadh xaqiiqada,

Sal u yeelo sheekada!”

Xadhig lama-sitaanow!

Sibiq ceelka haw gelin,

Soddon baac wax baa dheer

Sallax weeye oogadu

Waa sursuur hareeruhu

Dhexdu waa habeen socod

Hoostuna sud weeyaan

Saymo lagu wareejoo

Ka sokeeye oomane!

Laba-suulle waa muruq

Waa harag sagaaro’e,

Ha ku seexin laba ruux!

Soo horeydu yeedhaye,

U samee wadaanoo

Sida xuubka caarada

Siddeheedu yuu go’in,

4.19. SAMIR-SIIS (1973)

259

Sal u yeelo sheekada!  
Caliyow sargooyada;  
Waan kugu saluugoo  
Sama-doon habkeedii  
Tani uma salaaxnoo  
Safar meel fog kaa jira  
Sahal looma naca oo  
Lama siro nin kaa maqan.  
Samsam iyo Bullaalow!  
Caydiyo sarbeebtii  
Igu soo sinaadee  
Warka aan ku siiyee,  
Jaalle saaxi baan ahay  
Hayska kay saloolane,  
Horta saani ii baro.  
Sidataalti kuu timi  
Kuma cabannin, saaxiib!  
Dhego siigo awdaan  
U tumaayey saanoo,  
Naf sagaal-shub mooyee  
Weedh saran aqoon baan  
U saafaayey sheekada.  
Hadal lama sudhnaadee;  
Cabdi qaaday seeftii  
Hadda waa safkaan ahay  
Ninkay seegtayow maqal,  
Seylac xaal ha loo diro.  
Waxay Saxarli leedahay:

“May samadu heestoo  
Buuruhu siqaanoo  
Subulaha galbeediyo  
Saraar laga dhawaaqoo  
Sanqadhaan Cir-jiidhuhu.”

“May waranka Sooyaan  
Samaydiisu baantoo  
Sabeennuhu hadlaano  
Suubban laga war doonoo  
Ninka samaha raadshiyo  
Si-xun-wax-u-tilmaamaha  
Salaan loogu yeedhoo  
La yidhaahdo kala saar.”

Waxan sidan u leeyahay:  
“Sirta yaan la faallayn  
Ha la sugo jawaabaha,  
Waa Saxarla’ sheekadu!”

## 4.20 Gurmada (20/10/2005)

Tixdan *Gurmada* wuxuu abwaanku ka tiriyey ololihii doorashooyinka baarlamaanka Somaliland ee sannadkii 2005. Wuxuu abwaanku ka digayaa ku shubasho iyo musuqmaasuq. Wuxuu leeyahay ninkii sidaa sameeyaa wuu eedayaa. Wuxuu kaloo tilmaamayaa in aan gari laba ruux ka wada qoslin ee kolleyba mid uun helayee, kiina laga helo inuu samro, kuna qanco natiijada. Wuxuu kaloo leeyahay caddaaladda iyo garsoorku waa muhiime, yaan xaq iyo xormaynta laga tegin. Wuxuu yidhi:

Gun baa haan laga unkaa;  
Duq baa geel loo tubaa;  
Gaw baan ka aqaan durbaan.

Waxaa geed lala kacaa,  
Genkaad tahay erey la da' ah;  
Gefkana bashar baad u tee,  
Haddaad ka garowdo khalad  
Gob bay tahay caadadeed.

Waxaan godobtiisu hadhin  
Gar aad leeduu og yahay  
Nin kaaga masuugay gole.

Waxaa gabay lagu saxdaa  
Candhuuftu geftaa dalqada  
Markuu milil guud ka dhayo.

Golxoo dhammi maaha dhalan  
Mar bay ged kaleeto tahay;

Dibnoo ku gariira iyo  
Gengada waxa keenta been.

Waxay tixdu gaabsataa  
Damiirku markuu gam'aa;  
Hadduu hal ku seego geed  
Waxaad gacataa hurdada.

Intaa guntay oo dhigee;

Hadduu geeraar wax taro,  
Maxaan gelin dhexe onkoday!  
Maxaan goohay oo tallamay!  
Adoo gabbalkaagu dumay,  
Maxaan gudcur baajiyoo  
U daaray cadceed geyiga!  
Maxaan galab oogay shamac!

Waxaan guurow marshiyo;  
Waxaan subax loogay gool;  
Hadday gees kaa mareen,  
Maxaad farta iigu godi?  
Dhegtaada soor-gad lehe,  
Miyaan girifgirif yaraa?

Maxaan godladaa araar;  
Shabeelkaan gurboodku dhalay  
Ku idhi waxa gooyey aar,  
Saw kii Alla-gawrac yidhi  
“Mayee waxa laysay garo”.

Haddaan guga kuu kordhaa  
Gabow mooyee ku tarin

Garaad iyo waaya-arag,  
Illayn wax ma dhaantid geed!

Intaa guntay oo dhigee  
Ku soo noqo goobta iyo  
Garoonka ciyaarta taal.

Xilligu waa goor wax-saar,  
Gegaa lagu dheelayaa  
Shacbigu ka gar-soore yahay.  
Waxaa guul sheegan kara  
Cidday u gartaan iyagu.

Haddaad tahay guur-u-meer  
Garaabo adoon qubqubin,  
Adoon ummadda isku gubin,  
Dadweynahan soo gab yidhi,  
Waxaad ka gadayso mari!

Abaalkana waa gudnaa  
Waxaad noo gashee horiyo  
Gadaal waxaad maagantahay  
Bal noo sheeg waa golee,  
Waxay dadku kaa guntaan.  
Kol ay tahay, Gaafanoow!  
Haddaad gallad weydo kale:  
“Estii” gudahaan ahoo  
Ri’ baan beri gees ka riday.

Intaa guntayoo dhigee;  
Nimay kala gees yihiin  
Inuu libintiisa gado

Ninkii yidhi guul ka dhigo,  
Gub baa kaga dhacay halkaa.

Ninkii yidhi: 'gaal dil oo  
Gartiisana sii' ma maqal,  
Xaqsoor nin ku gaadhi kara!

Rag uu ka dhaxeeyo geel  
Hadduu kala geeyo damac  
Waxaa isu gaysa dane,  
Allow garansii nin moog!

Galool mudhay oo farcamay  
Dhuddaa goonyaha ku fiday  
Hadday kala gaar yihiin  
Guntay ka midaysan yihiin.

Haddaad Garas diiddan tahay  
Ku koob dirirtaada Garas.  
Ha nicin gobolkuu ka yimi!  
Ha giijin xadhkaa ha jarin!  
Ha goyn waxa laysu yahay!

Magliga gacal loola baxay  
Gondaa uma dhaadhacdee,  
Ha gaadhin laftoo ha jabin,  
Afkaagana godob ka dhawr!

Mar baa jirta gumuc la riday  
Galafto ninkii ridee,  
Nin iinloow, daa gujada!

Waxaa bir kuu gooya talo  
Markay gondihiisa taal



Nimaan geshigiisa dayin.

Adoo wax ka gaws qabsaday

Mar baa gefka loo liqaa

Inaan danta guud murkacan.

Intaa guntay oo dhigee;

Garaadkaygaan hadlee

Allow haygu gubin aqoon,

Gar eexana hayga tegin!

Haddaan eego gees kalena;

Gedday tahay dheesha taal

Inuu hebel guul heliyo

Inuu gudbiwaayo hebel

Galaasku halkaa ma yaal,

Nimaan garanoow u toos!

Waxay eegayaan guddida,

Galbeed iyo Bari ka yimi,

Inuu dadku yahay dad gaya

Waxay baadi goobayaan.

Waxay eegayaan guddidu,

Inuu dadku yahay dad gaya

Inay u noqdaan gadh-wade

Dadweynaha Geeska Bari.

Fulow, guuli kuu dhawaa!

Xilliga guuraynayaa

Hadduu kaa tiro gedmaday;

Hir baa laga guurayaa,

Mid baa lagu geeddi yahay.

Waxaan goobayaa hangool  
 Farraarkiisiyo gantadu  
 Midkoodba ku yaallo geed.

Wax baan ka garaabayaa;  
 Wax baan misna gocanayaa;  
 Lammaanaan is geyin,  
 Intaan guri wada furaan  
 Haddana garac diidayaa.

Hortayda bir baa ku go'ay  
 Hareerta god baa ka qodan  
 Gadaal uma laaban karo.  
 Giraangir wareegta iyo  
 Dhig baa lagu guud socdaa.

Waxaan gudayaa habeen,  
 Wuxuu galayaa saqdhaxe  
 Waxaan gudbayaa biriish  
 Biriish ku dul taagan gees  
 Gafuur wiyileed ka baxay.

Waxaa girgir qaanso sudhan,  
 Warkaba aan gaabiyee,  
 Raggii go'ay wuxu u go'ay.

Haddaan eego gees kalena  
 Waxaan gabbal ka arkayaa,  
 Cirkaan u samroo godladay.

Hadduu gelin toomanaa  
 Wuxuu galay Weerarow  
 Ayaankaygii gar-dhalad.

4.20. GURMAD (20/10/2005)

267

Ciyaartuna gebaggebiyo  
Waxay joogtaa gantii  
Halkay ku gudhaysay talo.

Gefkana xeer baa ka yaal;  
Ninkii ku kacaa xad-gudub  
Wuxuu geleyaa *off-side*,  
Allow garansii nin moog!

@SOMALIBOOKS

## Cutub 5

# Goloobal (Caalami)

Cutubkan waxa ku jira tixo caalami ah oo abwaanku kaga faalloonayo arrimo kala duwan oo dunida khuseeya.

## 5.1 Anwar Saadaat (Oktoobar 1981)

Wuxuu maansadan, Gaarriye, ka tiriyey geeridii Anwar Sadat oo muddo 11 sano ah (1970-81) xukumey dalka Masar. Sawirka tixdanu kuu muujinaysaa waa sida soo socota: Nimankii keligood-taliyayaasha adduunka ahaa ee dhintay oo aakhiro iyo cadaabta dhexdeedii ku loollamaya kursigii madaxtinimada Jahanama. Dabadeed wuxuu nin waliba soo ban dhigayaa oo uu ku faanayaa Ummulo-dooxuu dhigay iyo dhibaatooyinkii uu adduunka ka sameeyey. Iyadoo laysku haysto ayaa Saadaat iyagii ku soo biirayaa.

Xushmad gabay, Hadraawow!

Araar xiiso loo qabo

Xarakiyo dirsoocba leh

Xilliyadu tukubiyaan,

Xasan Geney durdursii!

Una sheeg xiddigiskii

Xiito feejignaantii

Nabaaddiina-xidhiddii

Xaamxaamadkeedii,

Xirsi iyo qardhaas iyo

Suuf iyo xanjoba way

Isku belo xijaabtee,

Geeri baan xakamo iyo

Xadhig lagu ceshaa jirin.

Xidaarkiina faalkuu

Igu yidhi: “Ximruu galay”,

Xaashe’e ma beenaan.

Durba xoox-horraadkii  
Wax ku daatay Xaynoosh,  
Niriggii xasaraddiyo  
Xaaraanta lagu dhalay.

Xinjirihii sunta ahaa  
Iyo xabag-dhunkaashii  
Xoorkiina waa weli,  
Xigsimooyin baa hadhay.

Afartaasi waa xubin.

Xuunshaa wax lagu yidhi,  
Beri Xoolojaliyiyo  
Xaaraame-cune dhacay:  
“Ma ogtahay, Xilmoogeey!  
In xaqii ku soo deggay  
Xabiibkii Ilaahay?”

Nin xantaday dantiisee,  
Laye xoosh-la-mooddii,  
Waxba maysan xaalayn  
Xadantadu ma saamayn  
Ma xanuujin dhiilladu.

Isna cadho la xuurtow,  
Is-xabeebiyoo yidhi:  
“Dammaneey xogli’idaa,  
Xaggee hadalku kaa maray?”  
“Xaashaa kallay!” tidhi.  
“Ha xanaaqin!” buu yidhi.  
“Xeeshaa dhac!” bay tidhi.

5.1. ANWAR SAADAAT (OKTOOBAR 1981)

271

Kuye: “Xaajo waa gobo’!”

“Ku soo xoori!” bay tidhi.

Kuye: “Weer cad soo xidho!”

“Hays xiijin!” bay tidhi.

“Rasuul baa xijaabtee,

Ku xisaabtan!” buu yidhi.

“Xusi maayo!” bay tidhi.

“Ha xujoobin!” buu yidhi.

Kute: “Hay xajiimayn!

Intuu Nebigu, Xaydow,

Noolaaba xaar iyo

Xaab baan cunaayee!”

Waa duur-xul sheekadu,

Xog-ogaalna waan ahay.

Ceebtiyo dheg-xumadiyo

Ragga xalay nijaastii,

Marna geed-xunkii dhacay,

Xiisayn ma doonaan.

Warka xalayto aakhiro

Xaashiyaha wargeyskiyo

Xilliyadu ka weriyeen,

Wuxuu sheegey xanan iyo

Xulad iyo dab oognaa

Iyo waliba xiisado

Ka dhex huray xumaystii.

Nimankii xaduurkiyo

Adduunyada xajiintiyo

Xaska gogosha uga dhigay;

Wax-ma-xeerayaashii  
Xaramkii dadweynaha  
Ku kufsaday xilkoodii.  
Daad-xoorta naartiyo  
Laye: “Xaydhaweyntii,  
Iyagoo xariirtiyo  
Xaaraantii lagu mamay,  
Nin kastaa xarragadiyo  
Xushmadduu mar qabi jirey  
U xaraaradoodoo  
Raba dumb in loo xidho”.  
Iyagoo xaraabaha  
Mid kastaa xaggiisii  
Xildhibaan in laga dhigo  
U xaraar butaystoo,  
Salasaar xafiltamay;  
Nayroonna xaasiday;  
Oo Shaahii xayraan  
Ka xumbeeyey dhoollaha;  
Farankana xanaaq iyo  
Qab-xun uu lahaan jirey  
Xummad ba’an ku kiciyeen;  
Samawsana ku xila furay  
Xag loo daayo mooyee  
Inay talo xayiran tahay.  
Oo Xayle dhaar maray  
Darajada in loo xulo,  
Kuna faanay Xiitiyo



5.1. ANWAR SAADAAT (OKTOOBAR 1981)

273

Xaraskii Balqiis iyo  
Xoogaggii Abraha ee  
Xaramaynka gaaddiyo,  
Xumuhuu barbaarshiyo  
Xaqluhuu addoonsaday,  
Intuu hanad xartaalliyey  
Xuur baahan siiyiyo  
Shacbiguu xasuuqee  
Ku xukumay: “Rabbaan ahay!”  
Oo jar-iska-xoorkii  
Hitlerkii xujeysnaa  
Qirtay xero-gubkiisiyo  
Malaayiintu xaaqiyo  
Ubadkuu xab-burushiyo  
Duniduu xagaafiyo  
Diga-xaadka mariyiyo  
Xaqirkiyo ismoodkiyo,  
Ummadduu xareeyee  
Jiritaanka ka xarrimay,  
Dhiigguu xalaashaday  
Xasillooniduu nacay,  
Kibirkuu la xiiqee  
Ka gadaal xaqiiqsaday  
Xad ceshaa inuu jiro.

Iyadoo xiniin iyo  
Ninba tab iyo xeeshii  
U soo xaytay duullaan,  
Mise waa xambaysane;

Gorgorkii xammuurraa!  
Xaruntii wax soo galay  
Bacaluul la xaman jirey,  
Anwaroo xabbado qaba,  
Shicibkiisu ku xukumay.  
Durba, “Xaadir!” buu yidhi.  
Xigtadiisa goortii  
Xisbigooda lagu daray.  
Dabadeeto xiisii;  
Golda Meyr u gogol-xaadh,  
Una sheeg xodxodatkii  
Xubbiggeeda awgii,  
Inuu Xaramki diintiyo  
Xurmadii Ahraamtiyo  
Milgihii xorriyaddiyo  
Xuquuqdii shucuubtiyo  
Masar xoolaheediyo  
U xaraashay Falastiin.  
Oo dhaar ku xagaf sii  
Inuu yahay xabiib jecel  
Xididkana u roonaa,  
Oo aanu “xiix!” odhan  
Wixii xulashadeedii  
Xeer iyo shuruud adag  
Kaamp Dheevud lagu xidhay.  
Wuxuu yidhi: “Xayaatii!  
Waxaa cunay xuskaygii  
Xisti iyo gumeystiyo

Xoogaggii shirqoolkiyo  
Cadaawihii xaqsoorkiyo  
Inta xeerka dumisiyo  
Xulafadi Israa'iil".

"Gashigaan xambaarsaday  
Dulligaan xantoobsaday  
Doonantaan xiloodshee  
Khasab kaga xantaystee  
'Xigo, Beegin!' idhiyee  
Nimaan geyin u daba xaday,  
Fool-xumaanti aan dhigay  
Taladaan xayrubsaday  
Nabaddaan xijaab adag  
Xuub caaro uga dhigay  
Xaramkana ku baayacay,  
Xayaysiinti ceebtiyo  
Xaradhaamadii baa  
Heedhe, laygu xooroo  
Xasabiyo tol iyo gacal  
Xayn yar bayga raacdoo  
Xigaalkii Jamaal iyo  
Nin xishoonayaa, maya,  
Xabaashaydii may iman."

Iyaduna xaggeedii  
Xarragada ka raacdoo  
Ku xurmeysey taajkii  
Miinadu ku xeerneyd.  
Shaahuna xusuus iyo

Xillad lagu lahaan beri  
Ugu xeeriyoo, sii.

Waxay xawli socotaba;  
Iyadoo xisaabtii  
'Ku xad iyo ka leef!' tahay  
Xaalxaalna lagu jiro,  
Ayaa show xan hoosiyo  
Warka lays dhex xuliyoo,  
Wax go'aan ku xaasilay;  
Siyaad iyo xertiisii  
Oo xaggooda laga wacay,  
Xaajada in lala sugo.

Noodyo (notes):

- Anwar el-Sadat (1918–1981): Madaxweynaha dalka Masar (1970-81)
- Muhammad Riza Pahlavi (1919-80): Shaaha Iiraan (1941-79)
- Francisco Franco (1892-1975): Keligitaliye iyo hoggaamiye ciidammo ee dalka Isbayn (1939-75)
- Golda Meir (1898-1978): Ra'iisalwasaarad dalka Israa'iil (1969-74)
- Luis Somoza (1922-67): Madaxweyne Nikaraguwa (1956-63)

5.1. ANWAR SAADAAT (OKTOOBAR 1981)

277

- Menahem Begin (1913-92): Ra'iisalwasaare dalka Israa'iil (1977-83)
- Antonio de Oliveira Salazar (1889-1970): Keligitaliye Jamhuuriyadda Bortuqiiska (1932-68)
- Haile Selassie (1891-1975): Boqorkii Itoobiya (1930-74)
- Adolf Hitler (1889-1945): Keligitaliyihii Naasigii Jarmalka (1933-45)

## 5.2 Wootar-gayt (1977)

Markay Angooli xornimadeedii dhacsatay, ka dib kolkay dagaal qadhaadh la gashay Boortuqiiskii gumaysan jirey, ayaa dawladda Maraykan iska hor-taagtay inay Qaramada Midoobay ku biirto. Arrintaas waan u qaadan waayey. Waxaan dabeed is-weyddiiyey waxay uga jeedeen waxay “Wootar-gayt” odhan jireen. Hadday ahayd fadeexad iyo dhaqan-xumo ay dhihsadeen, waxaan garan waayey waxay u dhihsan waayeen fadeexadaha ka daran ee ay faraha kula jiraan sida: gar-darraysigii Fiyatnaam iyo dhaxal-wareegga Falastiin iyo xiisadihii ka oognaa Simbaabwi iyo Namibiya (oo waqtigaas siday u kala horreeyaan loo kala odhan jirey Roodiishiya iyo Koonfur-galbeed Afrika).

Wiswis bayga galay Kaartaroow, weheshigiiniye  
Waaya-arag wixii aan ka helay, buugaggii weriye  
Wixii aad baddeen buu khalqigu, weli la taahaaye.  
Su’aalaan ku weyddiinayaa, ila sal-waaweyne;  
Walaalnimadi aan koolin jirey, waadhka yaa geliyey?  
Nabaddiyo wanaaggii ayaa, wegeredkow gooyey  
Isagoo takoor wada ayaa, laba-wejiileeyey?

Waadaasha xoolaha lumaa, weere waw halise  
Wedkii Maalkam Eges waan ka naxay, wacad  
Ilaaheeye.

Hadba weerka naag baw xidhaan, wayday kii qabaye  
Kolka geesi wayraxo ayaa, dacar waraabsiiya?  
Yaa waday raggii Luudar Kiin, waagi hanaq-gooyey?  
Hindidii casayd yaa waddaray, wadarna yaw laayey?  
*Alle weger waxaa belo dhigteen, waa ka waasacane!*

*Niksan wayla sahal ceeb haddaad, ka werweraysaane,  
Qirta wootar-gaytyadu ka badan, taydin weriseene!*

Walbahaarka Falastiin nin ogi, qulub la weydoowye  
Waa debed-wareeggii sidii, “woohow” loo yidhiye  
Waddankoodi goortii la dhacay, wahaabku kooreeye.  
Waagii kastaba Pii El Oo, waw dagaal wicide  
Ummaddaasi wadhan yaa sidaa, waajib kaga yiilay?  
Miyaan lala wadaagayn Yuhuud, wiirsigiyo ceebta?

*Alle weger waxaa belo dhigteen, waa ka waasacane!  
Niksan wayla sahal ceeb haddaad, ka werweraysaane,  
Qirta wootar-gaytyadu ka badan, taydin weriseene!*

Fiyatnaam wixii aad baddeen, uunku wada yaabye  
Sidii dhibic wajiineed wixii, gumuc is-waydaartay  
Nin waraystay waa garanayaa, wahanki Saygoone.  
Minawaarro dhagaraysanoo, cudur walwalaaya  
Iyo nacab dayuurado wataa, geliyey weesaade.  
Raggaad waranka siiseen anoo, weli u ooyaaya  
Marna waxan i daynayn duqii, ugu fil-weynaaye  
Waheey geeridii Hooshi Miin, wiilashay gudhaye.

*Alle weger waxaa belo dhigteen, waa ka waasacane!  
Niksan wayla sahal ceeb haddaad, ka werweraysaane,  
Qirta wootar-gaytyadu ka badan, taydin weriseene!*

Woobiga Angoolee qarxaday, wiririgtii yeedhay  
Boortuqiiski wiiqay rabeen, inay ku waabshaane  
Goortuu wadnaha taabtay bay, wegen u fuuleene.  
Waxay waarrisaba maalintay, calanki waaheeshay  
Waqalkiyo daruurihi onkoday, webiyadii dooxmay;

Wadhiyeey maxaad ugu riddeen, welegta Viitowga?

Wadhiyeey maxaad ugu riddeen, welegta Viitowga?

Sida ceel wiyiiraad kol hore, nooga wabaxdeene  
 Warshaddiina dhiiggaan tufaa, lagu waraabshaaye;  
 Garaad ma laha ruuxii wabiin, wacad la qaataaye  
 Ka il-baxay wallaahida afka ah, walalac beenaade.  
 Werwerkii Simbaabwaa qabaa, weris-la-mooddiiye  
 Waadiga Namiibiya rag baa, waayir xidhayaaye  
 Idinkaa watee Yaan Ismiidh, wadhaf ma tuureene.

*Alle weger waxaa belo dhigteen, waa ka waasacane!  
Niksan wayla sahal ceeb haddaad, ka werweraysaane,  
Qirta wootar-gaytyadu ka badan, taydin weriseene!*



### 5.3 Simbaabwi (7/4/1980)

Maansadan waxaan kaga qayb galay dabbaal-deggii loo samey-nayey gobannimadii Simbaabwi, ka dib markii loo galay hal-gan qadhaadh oo naf iyo maalba loo huray. Waxa la odhan jiray dalka Rhodesia caasimaddiisana oo imminka Harare la yidhaahdo Salisbury baa la odhan jiray.

Cirka sare dayaxa  
Suudi-meerayiyo  
Xiddigaha socdaa  
Dar silloon miyaa?  
Oon sebenka iyo  
Taariikhdu solin.  
Saw kuwan Fu'aad  
Weli saaxigaa!  
Een saxalka iyo  
Saacays beddelay  
La sakhraansanayn!

Dhulku waa sidee?  
Ma sawaaban yahay?  
Sanam baan dirgane  
Saw ka aan gilgilan!

Maanigaa sirgacan?  
Mise Saalaxoow  
Baddan suuxsan baan,  
Saksifoonka iyo  
Sawdkaba maqlayn?

Ma dhirtaan sirtiyo  
Suugaanta gabay  
Ula sooganaan  
Saarreey ahayn?  
May sacabbiyaan?  
Sinta may lulaan?  
Ma Simbaabwi baan  
Saaka loo walqalin?

\* \* \*

Siddi iyo wigliyo  
Sanqadh iyo durbaan,  
Waxa siidhi dhacay  
Waa Saalasbari.

Gabadhii la siray,  
Ee sixirka iyo  
Saqajaanku helay.

Gabadhii sinada,  
Safka laga galee  
Soodhka lagu kufsaday.

Waa Saalasbari.

Gabadhii safayn  
Sidii yawmal Badar  
Saraayuhu ka dhacay.

Gabadhaan sardhada  
Saranseerki helay,  
Saqda dhexe hurdada  
Uga seleli jirey.

5.3. *SIMBAABWI (7/4/1980)*

283

Waa Saalasbari.

Gabadhii suryada

Loo soohayee,

Sulubkay jecayd

Seefta lagaga hirey.

Gabadhii Sureer

Ee suuq madaw

Subax lagu gatee,

Sisal Roodis iyo

Magacyada sendahan,

Ka subxaanalee

Summad looga dhigay.

Waa Suubbaneey

Waa Saalasbari;

Oo silsaal ka dhacay

Reer Suweeto iyo

Ruxay Sawd Afriik.

Waa Saalasbari

Oo siraad ka baxay

Falastiin ku simay.

\* \* \*

Waxan uga socdaa,

Gabadhii Sureer

Silicii la baday

Laga sabato-saar.

Imminkay Sahraay

Saygeedi geyey

Sawjad ay u tahay.  
Waanu soo dhacsaday  
Ee cidi ma siin.

Guushiyo samuhu  
Waa sabuul dab iyo  
Dhiig sabi ku baxay.  
Soobir baw guntaday;  
Sabool baa u go'ay;  
Sawjar baa darteed  
Sibidhka u gogladay;  
Sallaxana barkaday;  
Oo siigadiyo  
Sufurtaw huwaday.

Waxay sawlaxdaba,  
Soori-qaadaygii  
Moosareewa sirey  
Laga gacan-sarree;  
Samir Yaan Ismiidh;  
Calankii la saar;  
Siiqir iyo kabiir  
Sara-kace dadkii.

Saajaceey shuftada  
Ku sifayn jireen  
Hadda waa siciim.  
Saldadduu u baxay  
Sawd buu ku helay.  
Sinji-dhaanki iyo  
Midab-sooc ma jiro.

5.3. *SIMBAABWI (7/4/1980)*

285

Waxan uga socdaa,  
Sacii Faarso nacay  
Soddon goortu qaday  
Sandulluu ku yimi.

@SOMALIBOOKS

## 5.4 Maandheela (Luulyo 1980)

Nelsan Maandheela oo markii dambe madax-weyne ka noqday Koonfur Afrika, wuxuu ahaa kolkii maansadu soo baxday maxbuus ku xidhan Jasiiradda Robin. Wuxuu ku xukunnaa madaxaa-ha-ku-furto. Sannadkii 1963 ayaa la xidhay ka dib kolkii ururkiisa A.N.C. ay go'aansadeen inay halgan hubaysan ku qaadaan taliskii midab-takoorka ku dhisnaa ee dalkiisa ka amar-ku-taaglaynayey. Maansadanu waa sharaf aan ku maamuusay Maandheela iyo wixii uu u taagnaa.

Gabay-yahaw i maqal!  
Madax-yahaw rimmani,  
Jiiftada madiix!  
Masafooy gadood!  
Maax-yahay ha gudhin!  
Inta uu mudduci  
Madal-weyne yimi,  
Wax kastuu marsado  
Marlay kiiska qabo;  
Oo maddaacalii  
Maanshaa allee,  
Garta madax ka yahay  
Ka markhaati yahay  
Sharcigana matalo,  
Madfac-yahaw ha damin!  
Mujrim-yahaw ha ladin!  
Magan-yahay gilgilo!  
Maskax-yahay godlani,

5.4. MAANDHEELA (LUULYO 1980)

287

Maansada ha dayn!

Qalin-yahaw mindiyo

Ii noqo maddane!

Ku marriimo dhiig;

Kuna maydho ciin.

Khadkan hoo murka ah;

Kii macallinka ah,

Ee midab-caska ah!

Ku dhig heestan milil!

Maaleey qadhaadh

Dacar lagu margado.

Maarrahaan sitiyo

Kalaashkoofka mudan,

Midig aad tartide

“Maddad” baan ku idhi.

Maska ubadka jaray

Dhiiggana ku mamay

Ila moora-duug.

Murti iyo higgsaad

Maxlal aan ku dhalan,

Ninna macasha qaban

Waa meeqa odhan,

Ku macsuun tix aan

Maamuus ku ladhay,

Maandheela iyo

Muudaaga xumi

Dad wuxuu makalay;

Ama uu malmalan  
Iyo reer muskood  
Kaga dhigay maxbuus.

Afartaa miscirir  
Mus-duleed u daa;  
Mid kaleeto waa  
“Maqalaay war-laay  
Ma laguu warramay?”

Waxan ahay madluun  
Godobtiisa maqan,  
U maleegan oo  
“Maya” yidhi dulliga.

Waan miiganaahay;  
Nin mannaagayoo  
Macaluul darteed  
Milgo-beelayoo,  
Maalkiisa dhacan  
Marti inu ku yahay  
La marsiinayiyo,  
Mana ihi miskiin  
Ninna muuno iyo  
Naxariis ka mudan.

Nacas muruq is-biday  
Markuu dhabanka bidix  
Farba meel ku dhigo,  
Sidii Nabi Masiix  
Dhanka midig u dhiib,  
Mawd baan ka xigay.



5.4. MAANDHEELA (LUULYO 1980)

289

Ninka midho-yariyo  
Madi garab lahayn  
Ii malaynayiyo,  
Muska tiidsanee  
Igu meersanee  
Madaw iyo cadba leh,  
Een mawqifkiyo  
Mitidkaannu nahay  
Ku midaysan nahay,  
Kala maan ahaa.

Uurkayga madhan  
Muruqyada i fagan,  
Murugada naftiyo  
Dabarkaygu maran,  
Mucsurkaan qabaa,  
Waa miino iyo  
Meleg aasanoo,  
Mar inay qarxaan  
Ku muddaysanoo,  
Wixii lay marshiyo  
Waxan maaganahy  
Kala maan ahaa.

Maanshee la yidhi:  
“Xaaqinkaa murxee  
Dhul madhaa ma jiro”.

Miciyihi darraa  
Ee igu mudnaa,  
Mariidkiyo suntii

Maaradoodi helay.

Haddaan maahsanaa

Miyir-doorsanaa,

Miiraabay oo

Mugga waan il-baxay.

Majaraan hayaa

Duul hore u maray

Ay mahadiyeen.

Afartaa mullaax

Uga maydhax-diir,

Mid kaleeto waa;

Hadal waa murtiye,

Maqal Abu-Hadroow!

Tixdu waa mag-dheba;

Nin kastoo mitida

Oo madiidin neceb,

Waa madhax u yaal.

Waa muuno iyo

Taallo aan u muday,

Maandheela iyo

Cidda uu matalo;

Magli baan ku qoray.

Adna Maxamadoow,

Maansadu nin geya

Kama maarantee,

Mayalkeeda qabo!

Gumaystaha ku maag!

5.4. MAANDHEELA (LUULYO 1980)

291

Madaxoo la rogo  
Iyo midab-takoor,  
Inaynnaan mareeg  
Marna qaadanayn,  
Ninka mooggan iyo  
Macal-cune dhacsii!  
Miliqsade ka nixi!  
Hal-muceedyadii  
Mari aad tiqiin;  
Oo mahadho iyo  
Maahmaah ka reeb!  
Kana marag ahaw  
Rag hadday murmaan,  
Mabda'eennu waa  
Isagoon mugdiyo  
Madmadoow ku jirin,  
Maantiyo berriba:  
"Malafsade ha dhaco!  
Xalaal-maal ha jiro!  
Dadku waa masee,  
Ha mudh-baxo cadligu!"

## 5.5 Nabdaado (Oktoobar 1981)

Waa maanso caalami ah. Waxay soo baxday markii tartanka hubka halista ihi gaadhay heerkiisii ugu sarreeyey. Waxay ka digaysay inuu dagaal ka dhex qarxo labadii gaashaan-buurood ee Waarso iyo Naato.

Najayna najayna!  
Najayna najayna!  
Najayna anaa leh;  
Nayruushkan haddeerto  
Necawda dhacaysa,  
Haddii nabaddiiba  
Kor taal naxash maanta.

Najayna najayna!  
Najayna najayna!  
Ammaanka nuglaaday  
Naddaaradda maamka  
Naxaasta sumaysan  
Niyuutaran boomka,  
Hubkaan laga nuuxsan  
Nacuudu billaahi!  
Intuu dadku naaro  
Niyuukliyar oo dhan.

Najayna najayna!  
Najayna colaadda!  
Nitaakhada joogta  
Nayaayir xumaanta,  
Jikraa ma-naxaanka,

Nakhuudaha mawdka  
Bamkaan laga nuuxsan.

Sidii nurka roobka  
Qaloombiga “naw” leh,  
Galdhiidhiga naarta  
Nacaybka gadhoodhay.

Najayna najayna!  
Najayna misaaylka!  
Dagaal nuxur-goys ah  
Laxaadsiga Naato  
Nuxnuxuusiga Waarso,  
Calool naxli dhaanshay  
Dardaaran-naqeeda.

Najayna najayna!  
Najayna anaa leh!  
Haddii najis xoog li  
Namruud muruqaystay,  
Ciddaan nacamaynnin  
Nafiif uga dhaartay.

Najayna najayna!  
Najayna najayna!  
Khaliijkiyo Niilka  
Namiibiya Shiine  
Banaamiyo Nayjar  
Ilaa badda Noorway  
Nebaalka ku meersan.

\* \* \*

Waxaa nabadeey leh  
Dhammaan san-ku-neefle  
Adduun nololeedka  
Intii naqas jiiddey.

Waxaa nabadeey leh  
Nabaadka baxaaya;  
Nagaadhkiyo doogga  
Is-nuugta ugaadha  
Dhurdaa nasan waayey.

Waxaa nabadeey leh  
Xamaanka nakhiilka  
Kob uu nasligiisa  
Negaansho u seexsho,  
Nudaa ku tidcaaya.

Waxaa nabadeey leh  
Xataa ma-nafleeyda,  
Dhadhaabtiyo niibta  
Dix-naanida ciidda.

Waxaa nabadeey leh  
Nacuu Hitler biirey  
Naftii Musaliini,  
Fashiistiyo Naasi  
Nasiib kaga doogtay.

Waxa nabadeey leh  
Wixii nabarkeedi  
Ka nool Horashiima;  
Jugtii Nagasaaki

5.5. NABDAADO (OKTOOBAR 1981)

295

Jabkii lagu naaftay.

Waxaa nabadeey leh

Ilaa Nabi Aadan

Nalkii la shidaayey;

Naqii tacabkeenna

Naqwii dhaqankeenna,

Wixii lagu noogay

Nahdii laga tuujay.

Macaan nabad baa leh;

Naruuro samaa leh;

Nas baa igu taam leh;

Nimcooy waxa maanta

Mindhaa nadigiisa

Natijjo ku raadsha

Dagaalna niyeeysta,

Nin moog wixi gaadhay,

Dhurwaagi nabnaaye

Intuu nacasobay,

Bishmaa nirig goostay

Dabeed yidhi, “naa jaq!”

Hal uu jarey naaska.

Dib soo nurus-naarush

Maxay bal ku nuugi?

Maxayse ka nuugi?

## 5.6 Geeridii Ina Boqor (13/4/1981)

Sannadkii 1981 ayaan waxaan daawaday filim uu nin Ingiriis ihi sameeyey oo la magac-baxay *The Death of a Princess*. Wuxuu kaga hadlayey qiso yaab leh oo uu la kulmay. Ninku Sucuudiga ayuu tegay 1976. Maalin maalmaha ka mid ah ayuu ka qayb galay iyada oo gabadh reer boqor ah iyo nin ay is-jeclaadeen la dilayo. Si tuuga ah ayaanuu sawirro uga qaatay. Dambiga keli ah ee lagu soo oogayna wuxuu ahaa iyaga oo jabiyeey xeerkii u yiillay qoyska dalkaas xukuma. Waxa xaaraan ah in qof reer boqor ihi ka guursado dadka kale ee caadiga ah. Arrintaas ayuu filimka ka sameeyey, isaga oo qaawinaya sida aanay isu lahayn, Islaamka ay sheeganayaan iyo waxay ku kacayaan. Xaa-jadaas, oo berigaas Ingiriiska iyo Sucuudiga iska hor-keentay, ayaan maansadan ka curiyey.

‘Xaye cala salaa’

‘Xaye calal falaax’

Xilli loo addimay

Ma xusuusan karo;

Xilna waa jiraa

Waana xaal-adduun;

Xiddigihi cirkana

Xalaa laygu yidhi:

“Xinjireey liqeen”.

Dhulku wuu xarkagay

Sidii xuuko geel

Waanu xiiran yahay.

Xooluhu dhammaan



5.6. *GEERIDII INA BOQOR (13/4/1981)*

297

Waa xaaluf-daaq.

Xaggu waa qaniin  
Xaggu lama-degaan;  
Xidhku waa saliid,  
Daad-xoor dab-liyo  
Xadhig-lama-sitaan  
Ku dul xeeran yiin.

Xaggu waa bacaad  
Xanfar iyo dabayl;  
Malaa waa xagaa.

Xaggu waa masniyo  
Fooq iyo xaraar  
Isha xiijiyoo;  
Demesh iyo xariir  
Ku xiddaysanoo  
Cirka soo xansada.  
Oo dad loo xil-qabo  
Xamastoodu taal.

Togag baa dhex xula;  
Biyii Xaramka iyo  
Wiski xooriyaa  
Dhex xumbaynayaan.

Xaggu wa dar-xumo;  
Xaawaleey carruur  
Ku xansheeran oo,  
Xiiq iyo harraad  
Xuurteeysan iyo

Xammaal iyo wastaad.

*Afartaasi xidhan.*

Xaggan kalena eeg:

Gabadheenna Xiis

Waa xabag-barsheed;

Waa xero-u-dhalan

Xulad geenyo ugub.

Oon xiito guluf

Dirir iyo xabbaadh

Loo sudhin xakame.

Waa xuur-al-cayn;

Iyo Xaaliyeey

Dayax xoosh ahoo

Xalay gaadh ahaa,

Saakana xarrago

Xil-wareejintii,

Xuubkii cirkiyo

Daahyadi xidhnaa

Kor u xaydayoo;

Sagal xaradhyo lihi

Qorrax xiiso wado,

Xaraaraha bulka leh

Ku xiddeeyeyoo;

Xod-xodtooy iyana

Xaradhaamadiyo

Hab-xiloodintii

Xadantootayoo;

5.6. *GEERIDII INA BOQOR (13/4/1981)*

299

Xummad iyo kulayl  
Naf-xaraare baas,  
Xaam-xaamadkii  
Xayn furatay oo  
Xusul joogga le'eg.  
Xaashaa kallaa!  
Xubno-jeedalleey  
Haddii aan xistiyey  
"Xaal qaado" dhaha.

\* \* \*

Gabadheenna Xiis  
Xubin bay ahayd  
Xuddun webi ku taal;  
Oo xidh oodan iyo  
Xakab loo dugsiiyo;  
Oon xagaaga arag  
Dhirta xaalufshiyo  
Xanaf iyo kulayl.  
Mar uun bay 'xaf' tidhi;  
Mar uun bay Xorriyo  
Ka kufriday xumii;  
Laye xaawo hee!  
Xadhka-goowsayaa;  
Xadki jabisayaa.  
Is-xabaal wax badan  
Godka uu xabkiyo  
Xinjiraha ku cuno,  
Huwin jirey xariir

Ka xayuubisaa;  
Xin u qaawisaa;  
Ceebaha xilka leh  
Xabbad-qaaddayaa.

Geedkii xaskiyo  
Xuladada wax guba  
Xaabuu u yahay  
Loogu xeeban jirey,  
Inu xabag-dhunkaal  
Xordan yahay dadkii  
U xaqiijisaa.

Xubbi iyo kalgacal  
Laab xuunsho galay  
La xariidisaa;  
Dareenkeeda xalan  
Iyadoon xidh-xidhin,  
Hanadkii xasladay  
Xiiseeysayaa;  
Xasil diiddayaa.

Xusbaddana ma gelin  
Inay xilo nin tahay  
Qasab loogu xidhay;  
Xaaleeyna-mayn  
Xaafaddeey ka timi,  
Iyo Xaaliyeey  
Xeerkii ka jirey.

\* \* \*

5.6. *GEERIDII INA BOQOR (13/4/1981)*

301

Waxay xawlisaba  
Xanti durugtayaa;  
Xogsigii horeba  
Xigtadii Gobaad,  
Dir-xumaan-ku-nool  
Ka xanaaqdayaa;  
Baha-xaydho-weyn  
Xayraantayaa.

Gabadhii Xaddiyo  
Caashaqa ku xidhay  
“Laan-gaabka xune  
Xagga sare ahayn.  
Xulashada gurraan  
Ee sumal-xadka ah”  
Ku xujoowdayaa;  
Xabsi loo diryaa.

Iyadoon Xorriyo  
Aan cidi xukumin  
Qalbigii xallaa.

Xaramkii cishqiga  
Xadradoow ahaa.  
Taalladi xubbiga  
Xabbad lagu furyaa.

Laye Xaadsan iyo  
Xuurkeey jeclayd  
Loogu xiiryeyaa;  
La xabaalyeyaa.

Halna waa xusuus  
Sheekada ku xidho:  
Meeshu waa Xijaas  
Xaruntii waxyiga  
Halka loo xaj tago,  
Ee Xabiibalaah  
Xudduntiisu tahay.

@SOMALIBOOKS